

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOMALIYA



PUNTLAND STATE OF
SOMALIA

AXKAANTA Qoyska Dawladda Puntland ee Soomaaliya

Garowe, January .09.2013

قال الله تعالى :

يا أيها الناس اتقوا ربكم الذي خلقكم من نفس واحدة وخلق منها زوجها وبث منهما رجالا كثيرا ونساء واتقوا الله الذي تساءلون به والأرحام إن الله كان عليكم رقيبا (سورة النساء: الآية 1)

Axkaanta Qoyska Dawladda Puntland ee Soomaaliya

Qodobka 1^{aad}. Axkaantan waxaa lagu magacaabaa (Axkaanta Qoyska Dawladda Puntland ee Soomaaliya).

Qodobka 2^{aad}. Sharcigaan Axkaamta uu kulminayo oo dhan waa lagu dhaqmayaa, wixii Xukun ah oo ku saabsan Qoyska oo Sharcigaan laga waayo waxaa loogu noqonayaa Qur'aanka iyo Sunnada Nebiga(SCW) Haddii laga waayana , Aragtida Raajixa ah ee Mad-habka Al-Imaam Al-Shaafici, iyo Mabaadi'da guud ee Shareecada Islaamka .

Kitaabka Kowaad : Doonista(Ardaa-galka) Haweenta iyo Xiridda Guurka.

Qaybta Koowaad : Doonista Haweenta.

Qodobka 3^{aad} - Doonis-tu waa in Ninka doonaya Haweenta Guurkeeda ama wakiilkii-su ka codsado Weligee-da si Haweentaas loogu Guuriyo, Haweentaasna waa inay tahay Mid Guur Nin kale iyo Ciddo-tirsi ka madax banaan, isla markaana Guurkeedu Xalaal u yahay Ninka doonaya.

Qodobka 4^{aad}.-Haween-ka doonistoo-du reeban tahay :

b-Waxaa reeban in Haween Nin kale Doonay laga dul doono kadib markii la aqbalay, iyadoo Ninka hore ogolaansho laga helin, ama aanu ka tanaasulin Doonistiisii, ama si cad aan loogu diidin haweentaas Guur-keeda .

t- Waxaa reeban in Doonis Guur Nin kale u caddaysto Marwo Ciddo-tirsi ku dhex jidha Nooc kasta oo kala-tagaasi ku yimid , waxaa kaloo reeban in Doonis Guur loo sarbebo Marwo ku dhex jidha Ciddo tirsi Saygee-dii Cidada dhexdeeda ku ceshan karo, Hase-yeeshee Doonis Guur waa loo sarbeebi karaa Marwo ku dhex jidha Cido-tirsi Saygeedii aanu ku dhex ceshan Karin (بانن).

j- waxaa reeban Ninku inuu soo doono Haweeney Guurkeedu Xaaraan ka yahay (Dhalasho, Xididtinimo, iyo Nuugmaba) si Abadi ah ama Waqti ku xiran.

x- Sayga qaba Afar Marwo, ama qayb kamid ah oo uu furay ugu jiraan Ciddo uu ku dhex ceshan karo, waxaa Ka reeban inuu Haween Shanaad soo doono.

Qodobka 5aad- Ninka iyo Haweeneyda is doonay mid walba ogolaansho kadib Nikaaxinta ka hor, waxaa u banaan inuu Doonistii Guurka ka laabto, waxaana Waajib ku ah Qofkii Doonistii Guurka ka laabtay inuu si degdeg ah u ogesiiyo Midkii kale.

Qodobka 6aad- haday jiraan Hadiyado Ninku Haweenta siiyey Intii Doonista Guurka lagu dhex-jirey waxaa loogu xisaabtamayaa sidatan:

b-Haddii Haweeney-du Doonistii Guurka iyadu ka laabato waa inay Ninkii u celisaa wixii Hadiyado ah oo waqtigii Doonista uu siiyey, waa haddii sidoodii loo hayo, haddii aan la hayn waa inay Celisaa Qiimihii Hadiyadahaasi joogeen Markii la siiyey. Hadiise Ninku Isagu ka laabto Doonistii Guurka Hantidii uu Hadiyada Haweenta u siiyey waxba looga celinmayo.

t- Haddii Labadii Qof oo is-doonay Mid-kood Dhinto Guurka ka hor, ama ay Guurkii hor istaagto Awood Labadooda-ba ka baxsan, waxaa Ninkii loo celinayaa wixii Hadiyadihii Laga hayo oo keliya wixii baxayse waxba laga celinmayo.

Qodobka 7aad- Waxaa reeban in Weligu ku xiro wax Yarad ah ama Xurmo ah Guurinta Gabadha uu Walaaya-deeda leeyahay. Haddii Sayga Gabadha guursadey iskiis Yarad ama Xurmo u siiyo Weligii Gabadha, Weligiina Yaradkaas gudoomo, laguna wareejiyo wuxuu noqonaqyaa Hibo, sidaa daraadeed mar dambe Saygaasi Yaradkaas kuma noqon karo, kumana dacwoon karo.

Qaybta Labaad : Xiridda Guurka (Nikaaxinta).

Madaxa 1aad : Qeexitaanka Guurka iyo Aqoonsiga Qoyska.

Qodobka 8aad- Guurku waa Xiriirka dhex-mara Laba Qof oo Lab iyo Dhedig ah oo si Sharci ah is-ku guursadey, Kaasoo Labada Qof mid kasta oo ka mid ah u xalaalaynaya inuu ku raaxaysto midka kale, isla markaasna is dhaafsanaya Xuquuq iyo waajibaad Midba Midka kale ku leeyahay.

Ujeedada Guurka laga leeyahayna waa in Xumaanta lagaga Dhowrsoonaado , in lagu dhiso Qoys Dhaqan wanaagsan ku taagan, iyo inay ka dhalato Tafiir ka dambaysa labada Waalid .

Qoyskana waxaa loo aqoonsanyahay inuu yahay Asaaska Bulshada.

Qodobka 9^{aad}- Dawladda iyo Shacabka Puntland waxay Qoys u aqoonsanyihiin oo keliya Lamaane kasta oo Lab iyo Dhedig ka kooban, kuwaasoo isku guursadey si Shareecada Islaamka Waafaqsan, waxaa Reeban in Qoys ama Guur loo aqoonsado Laba Qof oo isku Jinsi ah (wada Lab ah ama wada Dhedig ah).

Qodobka 10^{aad}- Ninku Xaaskiisa iyo Qoyskiisa isaga ayaa Madax u ah.

Madaxa 2aad : Tiirarka iyo Shuruudaha Xiridda Guurka .

Qodob.11^{aad}- Shuruudaha Ansixitaanka Guurka lagama maarmaanka u ah :

b- Xiridda Guurka ama Nikaaxintu waa inay hal Fadhi Ku dhamaato .

t- Oraah Cadaynaysa Guurin (الإيجاب) waxaan kugu nikaaxiyey ama kuu guuriyey Gabadha Hebla hebel)oo ka soo fula Weliga Gabadha ama Wakiilkiisa.

j- Guurkaas inuu isla Fadhiga ku Aqbaloo Ninka Gabadha loo guurinayo ama Wakiil-kiisu (القبول) (Guurkaas ama Nikaaxaas waan aqbalay guurkeeda ama nikaaxeeda).

x- Oraahaha Guntidda Guurka (الإيجاب والقبول) oo lays-dhaafsanayaana Sida Caadiga ah waa inay wada xiriiraan.

kh- Weliga Gabadha guurinaya iyo Ninka Guurka Gudoomaya iyo Wakiiladooduba haday jiraan, waa inay ahaadaan Lab , Qaangaar ah , Miyir-qaba isla markaana Xarmasho Xaj iyo Cumro midna aan ku jirin , hadii Haweenta la guurinayaa Muslimad tahay , Weliga guurinayaa waa inuu Muslim yahay.

d- Waa in Fadhigaas Labada lamaane oo is guursanaya Mid kasta oo ka mid ah lagu yaqaan :Magac ,ama Naanays, ama Aragti, iyo sifo kasta oo dadka kale ka soocaysa .

r- Hadalka Guurinta Haweenta oo lays-dhaafsanayaa waa inuu yahay mid Go'aan ah, isla markaana Waqti iyo Laal-reeb-kale midna aan lagu xirin , waxaan waxba laga soo qaadayn Shardi kasta oo aan shareecadu u jideyn labada lamaane , ama hor-joogsanaya ujeeddooyinkii Guurka laga lahaa.

s- Labada lamaane oo Guurku dhex-marayo mid-kasta oo kamid ah waa inuu ka maran-yahay Arrimaha Guurka hor istaagi kara ee ku xusan Madaxa Sadexaad ee Qaybtaan.

Qodob.12^{aad} - Tiirarka Afarta ah ee Guurinta lagama maarmaanka u ah waa :

b- Labada Lamaane (Ninka iyo Haweenta) Xiridda ama Caqdiga Guurku dhexmarayo.

t- Weliga Gabadha guurinteeda leh ama Nin kale oo uu wakiishay.

j- Oraahaha Cadaynaya Xiridda Guurka oo ay is dhaafsanayaan Weliga Haweenta iyo Ninka wax guursanaya ama wakiiladoodu , Qofkii aan hadal Afka ah awoodi Karin waxaa Booska u gelaya Tilmaan(fara ka-hadal) la fahmi karo ama Qoraal.

x- Fadhiga Guurku ka dhacayo waa inay Goob-joog ka yihiin Laba Nin oo Markhaanti ah ,oo Caadiliin ah, Qaan-gaar ah , Miyir qaba ,Wax maqlaya ,Muslimiin ah ,isla markaana Fahmi kara Oraahaha Guurka ama Tilmaamaha ay is dhaafsanayaan Weliga Haweenta iyo Ninka wax loo guurinayo .

Qodob.13^{aad}-

b- Gabadha waxaa guurinaya waligeeda, haddii la waayana lalana xiriiriwaayo waxaa guurinayaa qaadiga, haddii la waayo waxaa guurinaya Shiikh ruqsad ka haysta Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Diinta, haddii la waayo Nin faqiih ku ah Shareecadda Islaamka.

t- Marka la waayo Weliga Gabadha iyo wakiilkiisaba ayna jiraan meel fog aan lagala xiriir karin waxaa gabadha guurinaya Qaadiga.

J- Marka weligu diido in uu guuriyo gabadha sabab la'aan qaadiga ayaa guurinaya.

Qodob.14^{aad}- Axkaamta ogolaanshaha Guurka , Guurinta khasabka ah , iyo Guurinta Lamaanuhu aanay wax war ah ka hayn:

b- Haddii Haweentu tahay Garoob marka la guurinayo waa inay Raali ahaansho cod ah bixisaa ,haddii ay Gashaanti tahayse waxaa ogolaansheheeda ku filan inay aamusto .

t- Guur kasta oo Labada Lamaane oo Qaan-gaarka ah mid ka mid ah ama Labadooda-ba la khasbay waxba kama ansixin.

j- Haddii Gabadha Gashaantida ah oo Qaan-gaarka ah aan Weligeedu Guurinteeda ogeysiin waxay Ikhiyaar u leedahay inay Guurintaas ogolaato ama Fasakhdo, Haddii Haweeneydu Garoob tahay oo Guurinteeda aan la ogeysiin waxba Guurintaas kama ansixin.

Qodob.15^{aad} - Qofka Waalan, ama ah Doqon aan waxba kala garanayn, Lab iyo Dhedig Mid kasta oo uu yahay ; waxaa u guurinaya Aabihiis, haddii la waayana Awowgiis Aabe, haddii la waayana Qaadiga, iyadoo la tixgelinayo Shuruudaha kala ah :

b-Inuu Guurkaas Raali kayahay Lammaanka fayow.

t-Qof ka waalan ama dhiman haduu yahay Qof Dhedig ah ,Waa in Guurkaas Dan Dhaqaale , ama Maslaxad kale ugu Jidhaa.

j- haduu yahay Qofka waalan ama dhiman Qof lab ah, waa inuu Qaan-gaar yahay ,isla markaana waa inuu Guurka u baahan-yahay , Baahidaas-na haday tahay xaga Dareenka Jinsiga ,waa inuu Qoraal ku caddeeyaa Dhakhtar Aqoon dheer u leh Cudurrada Dhimirka ku dhaca.

Qodob.16^{aad}- Gabadha aan Qaan-gaarka ahayn waxaa guurin kara Aabaheed ama marka la waayo Awowgeed Aabe oo keliya . Ninkuna lama Guri geli karo, lagumana wareejin karo, ilaa Gabadhaasi in loo galmoodo Awood u yeelato. Wiilka aan Qaan-gaarka ahayn waxaa loo Guurin karaa Marka Guurka Maslaxadi ugu jidho, waxaana u guurin kara Aabihiis ama marka la waayo Awowgiis Aabe oo keliya .

Qodob.17^{aad}- Ninka Safiihnimo(Xoolo-mubadar) lagu xukumay, ma guursan karo isagoo Weligiisa ogolaansho aan ka helin .

Qodob.18^{aad}- Weliga Haweenta Guurinayaa waa Ragga Naftiisa ku-casabeeye (العاصب بنفسه) Haweenta ku dhaxlaya , Waxayna u kala horreeyaan sidatan :

b-Aabaha , Awoowayaa-sha Aabe Hadba kan u sokeeya .

t-Walaalka, Walaalka Wiilkiisa iyo Tafiirtiisa Siday ukala Sokeeyaan .

j- Adeerka , Ina Adeerka ,Aabaha Adeerkiis , Ina Adeer labaad , iyo Casabada kale oo la helo siday u kala Xigaan Gabadha .

x- hadii walaalo simman gabadha guuriyaan waxaan ansaxaya kan ugu hor guuriya isagoo idan ka haysta gabadha, hadday isku qabsadaan waxaa guurinaya qaadiga.

kh- Walaalihii Gabadhu ay guurinteeda u wada idantay, haday isku mar Niman kala Duwan u wada guuriyaan ama Midka guurintiisu horreysey aan la ogeyn , Guurintaas oo dhan waxba ka ansiximayaan .

Qodob.19^{aad}- b- haddii weligu meel fog jiro isla markaana aan lala xiriiri Karin waxaa guurinaya qaadiga.

t- haddii weligu sabi yahay ama uu waasho ama safiih yahay ama diin aan ta Muslinka ahayn aaminsan yahay ama uu faasiq yahay walaayadu waxay ku wareegaysaa casabada gabadha.

Qodob.20^{aad}- Haweentii aan Weli lahayn Qaadiga ayaa Weli u ah oo guurinaya , Haweentii sheegata inaysan weli lahayn Cid kale oo arintaas ku diidaana aanay jirin waa loo rumaynayaa, kadib markii Qaadigu arrinteeda baaritaan ku sameeyo, laguna dhaariyo inay run sheegayso.

Qodob.21^{aad}- Haddii Weligii Haweentu diido inuu u guuriyo Nin ku haboon waa in la qaadaa Tallaabooyinka soo socda :

b- Weligu wuxuu noqonayaa Mid diidey Haweenta Guurinteeda, markay tahay Haween Qaan gaar ah ,Miyir-qabta , isla markaana Raali ku noqotay Guurka Nin u beegtoon.

t-Qaadiga ayaa Haweentaa Weligeêda amar ku siinaya inuu u guuriyo .

j- Markaas kadib hadii weligii diido Qaadiga ayaa u Guurinaya Haweenta Nin ku haboon uguna guurinaya Meher ku haboon .

x- Haddii weligu codsado in la siiyo Waqti uu kaga baaraan dego Ninka Haweenta ay heshiiyeen ,haddii Weliga iyo Haweentu isku meel wada joogaan waxaa la siinayaa Mudo 7 Beri ah , Haddii ay kala maqan yihiina waxaa loo qabanayaa Muddo 15 Beri ah .

Qodob.22^{aad}- Ma jiro Hal weli oo loo ogolyahay inuu wada qaato Oraahdii Guurinta labadeeda daraf (الإيجاب والقبول) Marka laga Reebo Awowga Aabe oo isagu isu Guurin kara Gabar iyo Wiil aan Qaan gaar ahayn oo labada-ba Isagu weli u yahay .

Qodob.23^{aad} - Ninkii guuriya gabar uu weligeedu joogo, haddii la waayana uu qaadigu joogo haddii la waayana uu joogo Nin ruqsad ka haysta wasaaradda Cadaaladda waxaa lagu ganaaxayaa 2,000,000, (labo malyan oo sh.so) oo loogu bedeli karo hadduu bixin waayo xabsi u dhigma.

Qodob.24^{aad} Xiridda (Caqdiga) Guurka Waa in laga Diiwaan geliyaa Maxkamadda ugu Dhow Muddo Toban iyo Shan Maalmood aan ka badnayn, haddii Magaalo la joogo, hadii Baadiye la joogana Muddo Bil gudaheed ah. Waxaana Diiwaan gelinta Fulinaya Weliga iyo Sayga oo wada jira Ama wakiiladooda ,ama Qofkii Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Diinta Ruqsad u siiyey Guurinta, Waana in Diiwaan gelinta lagu Muujiyaa Arimahan :

b- Magacyada Labada lamaane oo Afarran.

t- Da'da Labada lamaane iyo Nambarada Waraaqhooda Aqoonsiga haday leeyihiin .

j- Garoob iyo Gashaanti Haweentu Mida ay tahay .

x- Qadarka Meherka lagu heshiiyey iyo Waqtiga Ninku ku bixinayo .

kh- Magacyada Weliga Gabadha Nikaaxiyey iyo Labada Markhaanti .

d- Taariikhda Xiridda Guurku dhacday .

r- Degaanka Labada Lamaane, iyo Magaca Meesha Xiridda Guurku ka dhacday.

Qodob.25^{aad}- Dadka Guurku dhex-maray haday joogaan Wadanka Dibadiisa waxaa Xiridda Guurka iyo Furriin-kaba laga diiwaan gelinayaa Xafiiska Qunsuliyadda Dawladda Soomaaliyeed.

Qodob.26^{aad}-

b- Guurka iyo nikaaxa lagu ridayo qofkii ka taga waxay galayaan mas'uuliyada Guddoomiyaha Maxkamada derajada 1-aad ee degmadaas.

t- Khidmada diiwaangelinta nikaaxu waa 150,000 Sh.So (konton Kun)

Qodob. 27^{aad}- Lamaane is qaba oo aan Muslimiin ahayn Haday soo islaamaan, waxaa loo Tixgelinayaa Guurkoodii hore, Marka laga reebo Dadka Shareecada Islaamku inay is guursadaan Reebtay .

Qodob. 28^{aad}- Isu-qirashada Guurka :

b- Haddii Haweeney Qaan-gaar ah oo Miyir qabta, u qirato Guur Ansax ah, oo suurto-gal ah Nin kale , isla markaana Ninkaasi Guurkaas isna qiro, haddii

Haweenta Weligeedii Guurkaas jiritaankiisa Beeniyoo waa in Qaadigu hubiyaa sida Guurkaasi Ansax ku yahay .

t-Weliga mujbarka ah (Aabaha iyo Awawga) gabadhiisa waa guurin karaa idan la'aan meherkaasna wuxuu noqonayaa mid ansax ah, gabadha qaan-gaarka ah haddii uusan kuf u ahayn ninka lagu ijbaaray qaadigu waa ka fasikhi karaa intaan loo galmoon ka hor haday u soo dacwooto.

Madaxa Sadexaad : Waxyaalaha Guurka hor-istaagi kara .

Qodob. 29^{aad}- Dumarka ka reeban Ninku inuu Guursado :

b- Ninka waxaa ka reeban inuu Guursado Xaga dhalashada Dhammaan Dumarka uu ka soo farcamay Hooyada iyo wixii ka sareeyaba .

t-Dumarka Isaga ka farcamay ; Gabdhihiisa iyo wixii ka hooseeya .

j- Dumarka Aabihiis ama Hooyadiis ka farcamay (Walaalaha iyo wixii ka sii tafiirmay).

x- Qof kasta oo Dumar ah oo la walaal ah qof uu ka soo farcamay Rag iyo Dumar mid kasta ha ahaadee (Habar-yar iyo Eeddo) .

kh- Xaasaska Ragga uu ka soo farcamay (Aabaha iyo wixii ka sareeya) , sidoo kale waxaa ka reeban inuu Guursado Xaasaska Wiilashiisa iyo Nin walba oo Isaga ka sii farcama Xaasas-kooda .

d - Xaasaskiisa Hooyooyinkood iyo Dumarka ay ka soo farcameen Xataa haddii aanu Xaaska la guri gelin. waxaa kaloo ka reeban Gabdhaha Xaasaskiisu dhaleen waa hadii Hooyada uu la guri Galay .

Qodob. 30^{aad}- Sidoo kale waxaa Ninka ka reeban inuu guursado Waalidiinta iyo Tafiirta Dhedig ee Haweenta uu ugu galmooday is-moodsiiis (شبهة), ama Guuran Shuruudi-hiisii iyo Tiirarkiisii Dhamays-tiran(Faciid ah).

Qodob.31^{aad}- Xagga Nuugmada Waxaa ka reeban Ninku inuu Guursado Dumarkii Dhalashada ahaan ka reebanaa sida Hooyada uu nuugey ,Gabadha ay dhashay, iyo haddii ilmaha wax nuugey Gabar yahay Ninka leh Caanaha ay nuugtey .

Qodob.32^{aad}- Nuugmadu waxay ku sugnaanaysaa Markii Ilmo laba sano ka yar jiraa Nuugo Haweenta ugu yaraan shan jeer oo kala duwan ama wax ka badan.

Qodob.33^{aad}- Waxaa kale oo Ninka ka reeban inuu Guursado Dumarkaan :

b- Dumarka aan Muslimiinta ahayn Marka laga reebo Yahuuda iyo Kiristaanka .

t- Haweenta Diinta Islaamka ka Laabatay(ridowdey) .

j- Haweenta Nin kale qabo.

x- Haweenta iyo Ninkeedii ay leecaantameen Guurkooda dambe waa reebanyahay.

kh-Haweenta Ninku sadex dalqadood ku furay iyadoon Guur iyo Guri-gal Nin kale soo marin Ninkaas kalana ka cidad bixin .

d- Haweeney Ciddo Nin kale ku jidha .

r-Haweeney Xaj ama Cumro ku jidha .

s- Labeebya-da aan Lab iyo Dhedig u kala cadaan

Qodob.34^{aad} - Waxaa Ninka ka reeban inuu Guur isugu keeno Laba Haween ah kuwaasoo Dhalasho ama Nuugmo Xigto ku ah, oo Midkood Hadduu Lab ahaan lahaa Tankale ay Xaaraan ka noqon lahayd.

Qodob.35^{aad}- Haweenta hal Dalqad ama labo lagu furay ilaa inta ay Cidada ka baxayso Ninkeedii Furay ayaa Mas'uul ka ah isaga ayaana ceshan kara intay Cidada ku jidho .

Qodob. 36^{aad} . Haweenta Muslimadda ah waxaa ka reeban inay guursato Nin aan Muslim ahayn, Diintuu doonaba ha haystee.

Qodob. 37^{aad}- Guurka Xalaalaynta (Maxlalka التحليل) Haweenta Sadex Dalqadood lagu furay haddii marka hore lagu sii heshiiyo waxba kama jiraan, Haweentuna Ninkii hore Xalaal ugu noqon mayso.

Qodob. 38^{aad}- Guurka Kala bedelashada Laba Haween ah (الشغار) , iyadoo Mid walba si gaar ah Meherkeeda aan loogu magacaabin, waxba kama jiraan.

Qaybta Saddexaad : Axkaamta Guurka .

Madaxa 1aad : Axkaam guud .

Qodob. 39^{aad}. Caqdi ama Xirid Guur oo kasta oo Dhamays-tirtay Tiirarkii iyo Shuruudihii lagu soo sheegay Qaybta Labaad ee Sharcigaan waa Ansax Xataa haddii Guri-gal uu san dhicin, isla markaana waxaa ku sugnaanaya Xuquuqda Guurka dhamaanteed Taasoo lagu sheegi doono Sharcigaan.

Qodob. 40^{aad}. Axkaamta Guurka Faasidka ah (aan ansixin) :

b- Xirid Guur oo kasta oo aan dhamaystiran Tiirarkii iyo Shuruudihii lagu soo sheegay Qaybta Labaad ee Sharcigaan waxba kama jiraan (ma ansixin) .

t- Guurku inuu Faasid yahay ama uusan Ansixin waxaa xukumi kara Qaadiga Maxkamadda.

j- Isla marka Guurka lagu eedeeyo inuu Faasid yahay ama aanu ansixin waa in Qaadigu Labadaas Qof kala kaxeeyaa.

x- Marka la habsado inuu Guurkaasi Faasid yahay, Haweentaas Nin kale looma guurin karo ka hor intaan Qaadigu Labadaas Qof kala dirin.

kh- Guri-gal haduusan dhicin ma jiraan wax Xuquuq ah oo Guurkaas Faasid ka ah ka sugnaanaya .

Qodobka 41^{aad} Mas'al. - Haddii Guri-gal dhaco Nikaax aan sax ahayn (Faasid ah) kadib waxaa ka waajibaya arrimahaan soo socda :

b-- waa in la kala kaxeeyaa Labadaas Qof .

t-Ninka waxaa ku waajibaya Meherka Haweentaas kuwa lamid ka ah lagu guuriyo (مير المثل) .

j- Haweenta waxaa ku waajibaya inay Ciddo tirsato.

x- Haddii Meeshaas Ilmo ka dhasho wuxuu ku Abtirsanayaa Ninkaas .

kh- Wax Xad ah (حد الزنا) ku waajibi-mayaan Ninkaas iyo Haweentaas.

d- Ninkaas Haweentaas Waalidiinteeda iyo Tafiirteeda Dhedig Guur-koodu abid waa ka reebanyahay, Iyadana Ninkaas Waalidiintiisa iyo Tafiirtiisa Lab Guurkoodu Abid waa ka Reebanyahay.

Madaxa 2aad :Meherka.

Qodob.42^{aad}-Marwo kasta oo Lagu guursado Guur ansax ah waxaa Saygee-da ugu waajibey Meher Qadarkiisa laysla ogyahay Raalina laysaga yahay . Meherkaasi waa inuu yahay Hanti ay bannaantahay inay Lamaanuhu Mulkiyaan , Waxaa kale oo Meherku noqon karaa Manfaco in laysu Qabto Shareecada ku banaan .

Qodob.43^{aad}- Haddii Caqdiga Dhexdiisa aan Meher laysla ogyahay lagu magacaabin waxaa isla magacaabaya labada lamaane . ama Qaadiga ayaa u magacaabaya, Haddii Ninku Haweenta la guri galo iyadoon wax Meher ah laysla magacaabin waxaa u Sugnaanaya Meherka Gabdhaha la mid ah lagu Nikaaxiyo (مهر المثل).

Qodob.44^{aad} - Waqtiga Saygu Meherka ku bixinayo :

b- Meherka oo dhan ama Qayb kamid ah waxaa Ninku u bixinayaa hadba sidii Lamaanuhu ku heshiiyaan Hormarin iyo Dib'udhigidba (Deyn).

t-haddii aan Labadaas Arimood midna lagu balamin waxaa Meherkii Saygu ku bixinayaa hadba Curfiga Meeshaas ka jira Hormarin ama Deyn sida uu keenayo.

j-haddii lagu heshiiyo Hormarin(Qadimaad) waxay Haweentu Xaq u leedahay inay Guri-galka Diido ilaa inta Meherka laga siinayo . Hadiise ay Dib-udhigid (Deyn) raali ku noqotay Guri-galka ma diidi kadho .

Qodob.45^{aad}- Meherkii lagu heshiiyey in Deyn lagu bixiyo hadii Labada lamaane Midkood geeriyoodo, ama Furriin Dhammaaday(بائن) lagu kala tago waxaa Marwadii u waajibaya in deg-deg loo siiyo.

Qodob. 46^{aad} - Meherkii laysla Magacaabay Dhamaantiis ayaa Marwada u waajibaya marka la helo mid ka mid ah Arrimahan :

b- Marka Guri-gal uu dhaco , Guri-gal-kuna wuxuu ka sugnaanayaa Marka ugu horaysa oo Sayga iyo Marwada Isu-Galmood dhexmaro.

t- Marka labada Lamaane Midkood dhinto Guri-gal ka hor .

Qodob. 47^{aad} - Mararka Haweentu Mutaysanayso Meherka Dumarka la mid ka ah lagu guuriyo (مهر المثل):

b- Marka labada Lamaane Midkood dhinto Guri-gal ka hor iyadoo wax Meher ah Haweentaas aan loo magacaabin .

t- Haweenta Galmo Khasab ah lagu sameeyey waxay Ninkii khasbay Hal Galmo oo kasta ku yeelanaysaa Mehru-misli (مهر المثل).

j- Marka Meherkii laysla magacaabay uu noqdo Hanti ama Manfacu kala qaadashadeedu aysan shareecada Islaamka ku bannaanayn.

x- Markii Saygu Marwadii la guri galo , Dabadeedna ay kala tagaan iyadoo wax Meher ah aan horay loogu magacaabin .

Qodob. 48^{aad} -Meherkii laysla Magacaabay Barkiis ayaa Marwada u waajibaya:

b- Haddii la furo Guri-gal ka hor .

t- Marka kala-taggu ku yimaado Sabab Sayga Xagiisa ah Guri-galka ka hor : Sida; inuu Diinta Islaamka ka Laabto , inuu soo islaamo iyana Gaalnimadii ku hadho , iyo inuu Marwada Xigatadeeda kula kaco Galmo Haweentaa ka xarrimaysa .

Qodob. 49^{aad} - Haddii Labada Lamaane Midkood laga helo Ceebtii ama Cudurkii Fasakhashada Banaynayey, Markaas ka dibna La kala Fasakhdo Meherkii Xukunkiisu wuxuu noqonayaa sidatan:

b-Marwadu wax Meher ah maleh Haddii Guri-gal aanu dhicin .

t- Haddii Ceebta oo Jidha Sayguna aanu ka warhayn Guri-gal dhaco, Markaas kadibna Fasakh yimaado Marwadu waxay Sayga ku yeelanaysaa Mahru-Misli.

j- haddii Ceebta ama Cudurku yimid Guri gal kadib Fasakh-na yimaado Marwadu waxay Sayga ku yeelanaysaa Meherkii Laysla Magacaabay oo dhamaystiran.

Qodob. 50^{aad} - Haddii Marwada la furo iyadoo wax Meher ah aan loo Magacaabin Guri-gal ka hor , Waxaa u waajibaya Dhaqaale Fara-saar ah (مئة), Haddii labada Lamaane Fara-saarka ku heshiin waayaan waxaa Jaan-goynaya Qaadiga isagoo Tixgelinaya Xaaladda Dhaqaale ama Bulsho ee labada Lamaane .

Qodobka 51^{aad} Mas'al. - Haddii labada Lamaane oo Guurku dhexmarayaa si Qarsoodi ah ugu heshiiyaan Meher ka duwan midkii laga sheegay Fadhiigii Xiridda Guurku ka dhacaysey , Marwadaasi waxay Ninkaas ku mutaysanaysaa Meherkii Fadhiigii Xiriddii Guurka lagu magacaabay.

Qodob.52^{aad} - Marwada Qaan-gaarka ah oo Miyir qabta isla markaana Tasarufkeedu sii deysan yahay waxaa u banaan inay Meherkeedii oo dhan ama qayb ka mid ah Cafiso.

Qodobka 53^{aad} Mas,al. -Haddii labada Lammaane isku Khilaafaan Qadarkii Meherka , Sifadiisii ama Noociisii , in Meher laysla magacaabay iyo inaan waxba la magacaabin, Wax markhaanti ahna aan la helin , Labada Lamaane waa isla laba dhaaranayaan (تحالفا), Laba dhaarashadaas ka dibna waxay Haweentii Ninkii ku mutaysanaysaa Mehru-misli .
Haddii Labada Lamaane isku qabtaan Meherkii in Marwadii qaadatay iyo in kale Ninka waxaa laga rabaa Markhaanti haddii la waayana Marwada waxaa lagu yeelanayaa Dhaar.

Madaxa 3aad : Dhaqan wanaaga Labada Lamaane .

Qodob.54^{aad} - Saygu wuxuu Marwadiisa xaq ugu leeyahay inay ku raacdo wax kasta oo Qoyska Maslaxadi ugu jirto.

Qodob.55^{aad} - Xuquuqda Haweentu Ninkeeda ku leedahay :

b- Inuu Dejiyo Guri labadooda Lamaane u haboon .

t- Inuu siiyo Biil iyo Marashi u dhigma Haweenka iyada lamid ah .

j- Inuu Cadaalad u sameeyo Haddii Ninku qabo hal xaas wax ka badan .

x- Inuusan Ku xadgudbin Xoolaheeda u gaarka ah .

kh- Inuusan wax dhib ah u geysan Nafsad ahaan iyo jidh ahaanba (Dhib muuqda iyo mid qarsoonba), Taasoo ka baxsan Edbintii Shareecadu jideysey marka Marwadu Ninkeeda ku Naashidowdo.

Qodob. 56^{aad} - Guriga Qoysku degayo waxaa lagama maarmaan ah inuu yahay :

b- Guri u gaar ah isla markaana Haweentu ugu nabadgeleyso Nafteeda iyo Maalkeedaba, iyadoo la tix-gelinayo inuu yahay guri ku haboon labada lamaane iyo Dhaqanka Meeshaas kajira ,waana inuusan noqon Guri Marwada lagu xumaynayo.

t- Waxaa Sayga u banaan inuu Gurigaas Qayb ka mid ah la dejiyo Haweenta Carruurtiisa Marwadaasi dhashay iyo Kuwa Marwo kale u dhashay, xataa haddii ay Qaangaar yihiin, Labadiisa Waalid iyo Mage-yaankiisa kale oo

Dumarka ah, Waa haddi dadkaas Guri dejintoodu Ninka waajib ku tahay, iyadoo markaas ay lagama-maarmaan tahay in Gurigaasi Dadkaas kuwada Filanyahay wax dhib ahina Marwada ka soo gaarayn. Isla markaana Marwadu Waqtigii Guurinta aysan Shardi ka dhigan wax sidaas ka duwan.

Qodob. 57^{aad} - Sayga uma banaana inuu hal Marwo wax ka badan hal Guri wada dejiyo, Haddii aysan Xaasaku sidaas Raali ku noqon , waxaana Marwada u banaan inay ogolaanshahaas ka laabato markii ay doonto.

Kitaabka Labaad :Burinta Guurka iyo Axkaamteeda.

Qodob. 58^{aad} -Guurku wuxuu Ku dhamaan karaa (Buri karaa) arrimahas soo socda

b- Furniin

t- Is-furasho

J- Geeri

x- Fasakhasho

kh- Ridoobid

d- licaan

iyo muxrimnimo dib laga ogaaday

Qaybta Koowaad : Fasakhidda Guurka (Baabi'inta الفسخ)

Qodob. 59^{aad} - Fasakhashadu waa baabi'inta Xiridii Guurka , marka la helo sababihii Banaynayey. Fasakhashadu Waa inay ahaataa Oraah uu ku dhawaaqo labada Lamaane midkood ,iyo wixii kale oo Cadaynaya Fasakhashadaas.

Qodob. 60^{aad} - Fasakhashadu waxay ku iman kadhaa Marka labada Lamaane midkood laga helo Ceeb ama Jirro Banaynaysa Fasakhashada, kaasoo Xiridda Heshiiskii Guurka ka hor aan la ogeyn,ama Guurka ka dib soo kordhay, waana inay Fasakhashadu ku dhacdaa Go'aan maxkamadeed , Go'aankaas ka horna Majidho wax Axkaam ah oo kasugnaanaya Fasakhashada, haddii Fasakha la xukumo Guri-gal kadib waxaa haweenta ku waajibaya Ciddo tirsi ka bilaabanaya Marka Xukunka Fasakhu dhaco .

Qodob. 61^{aad} - Haddii la ogaado Sabab ka dhigaysa Guurka labada lamaane mid reeban sida Dhalasho ama Nuugmo uma baahna in Maxkamad la geeyo . waase in kala-tagaas laga Diiwaan-geliyaa Maxkamada .

Haddii labada Lamaane midkood inkiro Jiritaanka sababtaas waa in Sugitaan Maxkamadeed loo helaa.

Qodob. 62^{aad} -Ceebaha iyo Cudurrada Fasakha keeni kara iyo Axkaamtooda :

b- Labada Lamaane Mid kasta waxaa u banaan inuu Guurkii Fasakho Marka Lammaanaha kale uu ka helo Ceeb laga didayo (laga anfariirayo) , Taasoo ay adagtahay in lagu wada noolaado.

Ceebtaasi ha jidho Guurka ka hor ama ha timaado Guurka ka dib.

t- Ceebaha Fasakha Bannaynaya oo labada lamaane mid kasta laga heli karo waxaa kamid ah Waallida ,Cudurka Baraska, Cudurka Juudaanka , iyo Dhamaan Cudurada Faafa oo aan dawada loo hayn sida Aidhiska .

j-Haweenta Ceebaha ay la gaar noqon kadho waxaa kamid ah Laf ama hilib Daboola(awda) Makaankii Galmada . Ninka Ceebaha u gaarka ahna waxaa kamid ah Dhufaan-naanta iyo Go'naanta Xubintii Taranka .

x-Haddii Lamaanka Fayow si cad ama Muuqan kadha Raali ugu noqdo Ceebta lamaanaha kale Markuu ogaadey ka dib Xaqii Fasakhashadu Majirayo.

kh-Ceebaha Jirrooyinka ahi waxay ku sugnaan karaan inuu Qirto Lamaanaha qabaa, ama lagu cadeeyo Qoraal Baaritaan Dhakhtar Aqoon dheer uleh Cudurkaas.

Qodob. 63^{aad} - Isu habboonaanshaha

b. (Kafaa'ada) Labada lamaane waa Xaq u gaar ah Haweenta la guurinayo iyo Weligeeda.

t. Kafaa'ada waxaa loo eegayaa diinta iyo dhaqanka suubban.

j. Qaadiga keliya ayaa go'aan ka gaari kara fasakha kafaa'ada.

Qodob. 64^{aad} - Haddii Ninku soo islaamo iyadoo Xaaskiisu aysan ahayn Kitaabiyad (Yahuud iyo Kiristaan) ,isla markaana ay diido inay soo islaamto , ama Haweentii ay soo islaamto isna uu Diido , ama labadii Lamaane midkood Islaamkii ka Laabto (لا ابراهيم ولا نوح) , Arimahaas oo dhan Haddii Guri gal uusan jirin Nikaaxii isla markaaba waa fasakhmay(waana buray) , haddiise Guri-gal jiro oo inta Haweentu Ciddada ku jidho Labadii Lamaane Diintii Islaamka soo wada galaan Nikaaxii Sidiisii Hore ayuu u jiraa, Hadiise Cidadu Sidaas ku Dhamaato Guurkii sidaas ayuu ku fasakhmay laga soo Bilaabo Markii Diin-bedelku dhacay.

Qodob.65^{aad} - Ninkii Xaaskiisa Biil iyo xuquuqda kale ee ay ku leedahay siin waaya, isagoo awood u leh qaadiga ayaa ku khasbaya.

Qodob. 66^{aad} - Haddii Ninku awoodi waayo inuu Xaaskiisii Biilo Xoolo la'aan darteed waxaa Xaaskaas u banaan inay Guurkaas ka fasakhato kadib markii Qaadigu sadex Maalmood Ninkaas u qabto Dabadeedna Biilkii awoodi waayo.

Qodob. 67^{aad} - Ninka Waddanka Dibaddiisa ku Maqan lana ogyahay Meesha uu joogo hase yeeshee Diida inuu Xaaskiisa u yimaado ,Haddii Ninkaasi Marwadaas soo biilo , Laba Sano markay gudubto Maqnaanshaa ka dib Marwadaasi waxay Xaq u leedahay inay codsato inay Ninkaas Nikaaxiisa ka Fasakhato, Hadduusan soo biilina waxay Marwadaasi Xaq u leedahay Ninkaas Maqan Hal Sano ka dib inay Codsato inay ka Fasakhato , Labada jeerba Qaadiga Maxkamaddu wuxuu Marwadaas Fasakha u ogalaan karaa Markuu Tallaabooyinkaan qaado ka dib :

b- Ninka dalka dibadiisa ku maqan, lana ogyahay meesha uu joogo hase yeeshee diida in uu xaaskiisa u yimaado, haddii marwadiisu ninkaas ka soo dacwooti qaadigu waa in uu u diraa labo qof oo caddaalad ah oo labadaa lamaane ehelkood ah

t- hadday soo cadeeyaa in gabadhu xaq leedahay in ninkaas laga fasakhayso^o Qaadigu waa ka fasakhi karaa.

j- Qaadigu wuxuu Go'aanka Fasakha qaadan karaa Markuu ku qanco inuu Ninkaasi diidey inuu yimaado ,ama uu diidey in wax Xiriir ah lala sameeyo.

Qodob. 68^{aad} - Marka Sababaha aan soo sheegnay Dartood Fasakhasho ka dhex dhacdo labada lamaane waxaa lagu tirinayaa Kalatag Fudud (بينونة صغري) wax Dalqada ahna ma dhacayaan, Markii ay doonaan ayayna Labada Lamaane Guur kale isugu noqon karaan.

Qodob. 69^{aad} - Haddii Ninka iyo Haweentu isku Khilaafaan Fasakhasho Jiritaankeed iyo inaysan jirin , labadooda midka Fasakhashada sheeganaya (Mudaciga) waxaa wax ugu Sugnaanayaan Markhaanti iyo Caddayn uu keensado, haddii uu waayana, Midka wax inkiraya waxaa lagu yeelanayaa Dhaar .

Qaybta Labaad : Furriinka iyo Isfurashada (Khuluca).

Madaxa laad : Furriinka iyo Axkaamtiisa .

Qodob.70^{aad} - Qeexidda Furriinka iyo Arrimaha uu ku ansaxayo :

b-Furriinku waa hadal kasoo Fulaya Sayga, kaasoo lagu goynayo(Burinayo) Xiriirkii Guurka ee Lamaanaha ka dhexeeyey.

t-Furriinku Wuxuu noqon karaa hadal Cad oo Furriin mooyee wax kale aan laga fahmi karin , waxuu kaloo noqon karaa Hadal Sarbeeb ah marka Saygu Furriin ula jeedo, kaasoo Furriin iyo Macne kalaba laga fahmi karo.

j- Furriinku waxa uu ku ansaxayaa Luqad kasta oo uu garanaayo qofka ku hadlaya sidoo kale waxaa uu ku ansaxayaa qoraal niyad wata iyo tilmaanta qofka aan hadli karin.

Qodob.71^{aad} - Ninku Xaaskiisa wuxuu ku qabaa Sadex Dalqadood. Hal Cod ama Hal fadhi hadduu isku raaciyana Sadexda Dalqadood-ka waa wada dhacayaan.

Qodob.72^{aad} - Waxaa Furriin ka ansaxayaa Nin kasta oo miyir kiisu dhamays-tiranyahay , Qaangaar ah , isla markaana aan La khasbin, sidoo kale waxaa Furriin ka ansaxayaa Qofkii Ninku u wakiisho Furriinka Xaaskiisa, Wakiilkaasi Qof Dumar ah ba ha ahaadee ,waxaa kaloo Ninka u banaan inuu Xaaskiisa u wakiisho inay is furto.

Qodob.73^{aad} - Qofkii Isticmaala Daroogo ama Daawo daroogo loo isticmaalay kuna sarkhaama inta uu sarkhaankaas ku jiro, haddii uu xaaskiisa furo furriinkiisu waa dhacayaa.

Qodob. 74^{aad} - Furriinku ha ahaado Midka shareecadu banaysay (سنی) ama ha ahaado Midka shareecadu Diidey (بدعی) Mar walba waa dhacayaa.

Qodob. 75^{aad} - Furriinka haddii Saygu Shardi uga dhigo Fal samayntiis ama ka tegidiis Markii shardigaas la helo ayuu dhacayaa.

Qodob. 76^{aad} - Furriinka qaybihiisa iyo Axkaamtooda :

Furriinku wuxuu u qaybsamaa Laba qaybood oo kala ah Furriin aan dhamaan (رجعی) iyo Furriin dhamaaday (بائن) waxayna kala yihiin sidatan :

b- Furriinka aan dhamaan kaasoo Ninku Xaaskiisii Ceshan karo (رجعی) intay Ciddada ku jidho waa midka Yimaada Guri-gal ka dib , isla markaana Sadex Dalqadood kayar (Hal ama labo) , iyadoo aysan jirin wax Xoolo ama Manfac ah oo Hawentu Madaxeeda ku furatay(الخلع) .

t-Haddii Cidadu dhamaato iyadoo Ninku Xaaskaas aanu ceshan Furriinkaasi wuxuu noqonayaa kalatag Fudud, (بينونة صغرى) , Kaasoo labada Lamaane u Banaantahay inay Guur kale iyo Magacaabid Meher kale isugu yimaadaan Ciddada ka dib.

j- Haddii Ninku Xaaskiisa ku furo Sadex Dalqadood Furriinkaas waxaa lagu magacaabaa Furriin dhamaaday (بينونة كبرى), Labadaas Lamaanana Guur kale isuguma iman karaan Ilaa Haweentu Nin kale Guur ansax ah ku soo Guursato, lana guri galo, soo furo, kana soo cidad baxdo.

Qodob. 77^{aad} - Marwada ku dhex jidha Ciddo Saygeedii ku dhex ceshan karo, mar kale Cidada Dhexdeeda waa sii furi karaa, Dalqadahaasina Kuwii hore oo dhacay ayay biirinayaan.

Qodob. 78^{aad} - Haday Guur Labaad isugu yimaadaan Lamaanahii Horay u kala tegey Dalqadaha Saygu Marwadaas ku qabayo waxay noqonayaan sidatan :

b-Haddii Ninkii iyo Haweentii ku kala tegey Furriin aan dhamaan (بينونة صغرى) Cidada-bax ka dib Guur kale isugu yimaadaan Ninkaas Haweentaas wuxuu ku qabayaa Hadba intii Dalqadihii hore uga hadhay.

t- Haddiise Furriinku ahaa Sadex Dalqadood ama Furriin dhamaaday (بينونة كبرى) oo Haweentaasi Nin kale soo guursato Markaas kadibna Ninkii hore Guur kale isugu noqdaan wuxuu ku qabayaa Sadex Dalqadood oo hor leh.

Qodob. 79^{aad} - Axkaamta Markay Sayga iyo Marwadu isku khilaafaan Furriinka :

b-Haddii Labada Lamaane isku waafaqaan Furriin inuu dhacay Waqti la soo dhaafay, hase yeeshee isku khilaafaan Furriinkaasi inuu ahaa Mid Ninku Xaaskiisa ceshan karo (Furriin aan dhamaan) iyo Mid aanu ceshan Karin (Furriin dhamaaday). Waxaa dhaartiisa loogu rumaynayaa midka sheeganaya Furiinka aan dhamaan kaasoo Ninku Xaaskiisa ceshan karo intay Cidada ku jidho.

t- Haddii Saygu Waqtiga la joogo qiranyahay inuu Sadex Dalqadood wax ku furay sidaas ayaa loogu rumaynayaa.

j- haddii Labada Lamaane isku qabtaan in Furriin jirey iyo in kale Waqti lasoo dhaafay waxaa dhaartiisa loogu rumaynayaa hadba Midkooda Furriinka inkiraya.

Qodob. 80^{aad} - Ninka wax furay waa in uu maxkamada ka qoro furniinka taariikhda uu dhacay tirade dalqadaha hadduu magaalo joogo 15-beri gudahood hadduu baadiye joogana 45-beri gudahood.

Qodob. 81^{aad} - Qofka aan oofin Mas'uuliyadda Ku xusan Qodob. (80), waxaa lagu ciqaabayaa Ganaax u dhexeeya hal Malyan ilaa labo malyan oo Shilin Soomaali ah.

b- Ninkii fulinwaaya mas'uuliyada ku xusan qodobka 85-aad waxaa lagu ganaaxayaa lacag dhan 2,000, 000 ilaa 3,000,000 So.Sh.

t- khidmada diiwaangelinta furniinku waa 100,000 So.Sh

Qodob.82^{aad} - Markii Sayga iyo Marwadiisii kala tagaan haday isku qabtaan Aqalkii, iyo Alaabadii Waqtigii Guurka lagu dhaqmayey, waxaa loogu qaybinayaa sidatan:

b- Wixii Alaab ah oo Dhaqanka Ninka u gaar ah ama isagu si gaar ah u adeegsado waxaa iska leh Ninka.

t- wixii Alaab ah oo Dhaqanka Haweenta u gaar ah ama Iyadu si gaar ah u adeegsato waxaa iska leh Haweenta.

j- Wixii Alaab ah oo Labadooduba wada adeegsan karaan waxaa iska leh, hadba Midkoodii Isagu Markii hore Alaabadaas Hantidiisa ku soo iibiyey, Hadaan la helin Curfi ama dhaqan sidaas ka duwan, kaasoo Alaabadaas Cid gaar ah siinaya.

Madaxa 2aad : Isfurashada (الخلع) iyo Axkaamteeda .

Qodob.83^{aad} - Isfurashadu waa labada Lamaane inay ku kala tagaan Hanti ama Manfaco Marwadu ama cid kale ay bixisay, Sayga-na la siiyey.

Qodob.84^{aad} - Isfura-shada Marwadu (الخلع) waxay ku ansaxaysaa wax kasta oo qiimo leh Deyn , ama Cayn laysla yaqaan iyo Manfaco intaba .Haddii Marwadu isku furato wax aan la aqoon ama Xalaal ahayn Isfurashadaasi waa ansaxaysaa waxayna bixinaysaa Meher-misli (مهر المثل) .

Qodob.85^{aad} - Labada Lamaane oo Isfurashadu dhex maraysaa waa inay yihiin Dad dhan (Qaangaadh ah,Miyir qaba , aan Safiih ahayn), isla markaana waa inay Raali ka wada yihiin Isfurashadaas .

Qodob. 86^{aad} - Haduu Marar badan soo noq-noqdo Khilaafka u dhexeeya Labada Lamaane , isla markaana ay adkaato in Xal loo helo Khilaafkaas, Qaadigu waa inuu qaadaa Tallaaabooyinkaan soo socda :

b-Waa inuu Arinta Labadaas Lamaane u saaraa Guddi Labada Lamaane Labadooda Xigto ka tirsan , si Gudigaasi Khilaafkooda u xaliyo.

t- Haddii Gudigaasi wax Xal ah ka gaari-waayaan Khilaafka Qaadiga Maxkamaddu waa inuu Lamaanahaas Hal Dalqad ku kala Furo .

j-hadii Khilaafku ka socdo xaga Haweenta oo Ninku Codsado in Haweenta Dhaqaale looga celiyo , Qaadigu Ijtahaadkiisa ayuu ku Xukumayaa Haweentaas Xoolo aan ka badnayd Meherkii ay qaadatay ama Mehru-Misli .

Qodob. 87^{aad} - Isfurashadu waa Furriin aan Dalqadihiisii dhamaysan ,Ceshina (الزَّجعة) Maleh, waxaana dhacaya markiiba Hal dalqad . Labada Lamaane Guur Cusub ayayna isugu noqon karaan Markii ay doonaan; waa haddii Dalqadda Isfurashadu Dalqado Horay u dhacay Sadexdii Dalqadood aysan ku dhamays-tirmin .

Qodob. 88^{aad}- Haddii labada Lamaane isku khilaafaan In Haweentu Hanti isku furatay iyo in kale , Haddii wax Markhaanti ah aan la helin waxaa Dhaartiisa loogu rumaynayaa Ninka. Haddiise ay isku khilaafaan Qadarkii ama Noocii Hantidii lagu heshiiyey inay Marwadu isku Furato wax Markhaanti ahna aan la helin ,Labada Lammaaneba way isla laba dhaaranayaan , Laba Dhaarashada ka dibna waxay Marwadii mutaysanaysaa Mehru -misli.

Qaybta Sadexaad: Ceshiga , iyo Ciddada.

Madaxa 1aad: Ceshiga(الزَّجعة) .

Qodob. 89^{aad} -Goorta Saygu Marwadiisii ceshan karo, iyo Codka uu ku ansaxayo :

b- Marwo kasta oo Saygeedii ku furay wax kayar Sadex Dalqadood wuxuu xaq u leeyahay inuu Ceshado inta ay Ciddada ku jidho.

t-Ceshigu wuxuu ku ansaxayaa Oraah Saygu ku dhawaaqo Kaftan-ba ha ahaadee , iyo Qoraal Markhaanti leh .

j- Marka Ninku Xaaskiisii ceshanayo Uma Baahna inay Iyadu Raali ka tahay, ama Weligeedii Ceshigaas Raali ka yahay.

Qodob.90^{aad} - Ninka waxaa waajib ku ah inuu Ceshiga ogeysiiyo Xaaskiisa uu ceshadey intaysan Ciddada ka bixin, haddii Xaasku yahay Qof Dhiman wuxuu Ceshiga ogeysiinayaa Weligeeda.

Qodob.91^{aad} - Haddii Sayga iyo Marwadu markii Cidadu dhamaatay kadib isku khilaafaan Ceshi inuu jirey iyo in kale , Markhaantina la waayo waxaa Dhaartiisa loogu rumaynayaa hadba Qofka Ceshiga diidan (Inkiraya).

Qodob.92^{aad} - Xukunka marka Marwadii la furay iyo Saygeedii furay isku

khilaafaan inay dhamaatay iyo in kale Ciddadeedii Saygu dhexdeeda uu ku ceshan karey:

b- Haddii Marwadu ka mid tahay Dumarka Dhiigga Caadada hela inarkay sheegato Waqti suurto gal ah inay dhamaatay Daahirra-dii ay ku cidad baxaysey Dhaarteeda ayaa loogu rumaynayaa.

t- Haddii Marwadu Uur lahayd Markay sheegato waqti suurto gal ah inay Uurkaas dhashay iyadana Dhaarteeda ayaa loogu rumaynayaa .

j- Haddii Marwadu Ka mid tahay Dumarka aan helin Dhiigga Caadada , haddii ay sheegato in Saddexdii Bilood u dhamaatay, saygiina ku inkiro isaga ayaa dhaartiisa loogu rumaynayaa inaysan Marwadaas Bilihii Ciddadu u dhamaan .

Madaxa 2aad :Ciddada (العدة):

Qodob.93^{aad} - Ciddadu waa Muddada ilaa ay dhamaato Marwada Saygeedii ay kala tageen aysan Nin kale Guursan Karin, waxayna waajibtaa(Timaadaa) Marka la helo Furriin , Fasakhasho,Is-furasho, ama Geeri .

Qodob.94^{aad} - Haddii Marwada la furo ama la fasakho ama ay is furato ,iyadoo aan lala Guri-gelin wax ciddo ah maleh,hase-yeeshee Haddii laga dhinto iyadoo aan Guri gal jirin Ciddo ayay tirsanaysaa.

Qodob.95^{aad} - Marwada la furay waxay Ciddadu u bilaabanaysaa isla marka la furay , Midda la fasakhayna waxay Ciddadu u bilaabanaysaa marka fasakha la xukumay Midda laga dhintay waxay ciddadu u bilaabanaysaa Marka Ninkeedii dhintay.

Qodob. 96^{aad} -. Marwada laga dhintay wax Uur ahna aan lahayn waxay ku cidad baxaysaa Afar bilood iyo toban Beri oo Bilaha Dayaxa ah , waxaana u waajibey inay deganaato Gurigeedii looga dhintay intay Cidada kujidho,wax Masruuf iyo Marashi ahna cidna kumaleh.

Qodob. 97^{aad} - Marwada Uurka leh si kasta oo kala tagu ku yimid waxay ku cida baxaysaa inay dhasho Uurkeeda dhammaatiis ,kaasoo ay lagama maarmaan tahay inuu yahay Ilmo abuurmay, kuna abtirsanaya Saygeedii ay kala tageen, ama ka geeriyoodey.

Qodob. 98^{aad} - Kala tagga ku yimid Furriin , Is-furasho , ama fasakhasho Arrimahaas oo Guri-gal ka dib yimid, iyadoo Marwada wax Uur ah aanay lahayn waxay Haweentu ku cidad baxaysaa siyaabahan:

b- Marwada Dhiiga Caadada heshaa waxay ku cidad baxaysaa Sadex Daahir ; haddii la furo iyadoo Daahir ah waxay Cidadu u dhamaanaysaa Marka uu ku bilawdo Dhiiga Sadexaad, Haddii iyadoo Dhiiga qabta la furay waxay Cidadu u dhamaanaysaa markuu ku bilawdo Dhiigaas midka ku afar ah.

t- Marwada aan Dhiiga Caadada helin waxay ku cidad baxaysaa Sadex Bilood oo Bilaha Dayaxa ah.

j- Marwada Tirsanaysa Ciddo Rajciya ah Haddii Ninkeedii Furay Dhinto waxay u wareegaysaa inay tirsato Afar Bilood iyo Toban Maalmood.kana bilaabanaysa marka Ninkaasi dhintay.

x- Marwada Dhiigu iska socdo jirro darteed (مستحاضة) isla markaana Dhiigii Caadada aan ka sooci Karin dhiiga kale waxay ku cidad tirsanaysaa Sadex Bilood oo Bilaha Dayaxa ah.

kh- Marwada Dhiigga Caadadu ka Daahay Sabab jidha awgeed sida Nuugmo iyo Jirro way sugaysaa ilaa intay sadex dhiig ka helayso ,markay ka quusato in dhiigii ku soo laabto waxay tirsanaysaa Sadex bilood oo Bilaha Dayaxa ah.

Qodob. 99^{aad} - Haweenta Ismoodsiis (شبهة) ama Guur aan ansixin(فاسد) loogu galmooday xaga Ciddada waxay kala midtahay Midda la furay.

Qodob.100^{aad} - Marwada Ninkeedii Furay ka dibna uu Ceshadey, ama Guur hor leh ay isugu yimaadeen , isla Ciddadaas dhexdeeda, markaas ka dib hadduu mar kale Furo Marwadaasi waxay ku cidad baxaysaa sidatan :

b- Haddii Marwadaasi Uur lahayd iyadoo marka Furriinka dambe dhacay Uurkeedii weli jiro mar walba waxay ku cidad baxaysaa inay Uurkaas dhasho.

t- Haddii Marwadaasi wax Uur ah aanay lahayn ; Midda Saygeedii uu ceshadey dabadeedna uu furay haddii Guri-gal dhacay iyo hadanu dhicinba , Ciddo hor leh ayay bilaabanaysaa , Hase yeeshee Marwada Is furatay iyo Midda Ninkeedii ay kala fasakhdeen ,haddii Ciddada dhexdeeda Guur kale isugu noqdaan ,markaas kadibna intuuusan la guri gelin uu furo waxay tirsanaysaa Ciddadeedii hore intii uga harsan , haddii uu la guri galana Ciddo Labaad ayay Furriinka ka dib tirsanaysaa.

Qodob.101^{aad} - Haweenta Gogol-dhaafka samaysay(Sinaysatey) haday Uur yeelato waxay ku cudad baxaysaa inay ilmahaas dhasho , hadaanse Uur lagu arag waxaa lagu hubinayaa Sadex Dhiig.Hadaysan Dhiig helina Sadex Bilood.

Qodob.102^{aad} - Marwada ku cudad tirsanaysa Dhiiga Caadada ,haday sheegato waqti suurto gal ah inay Cidadii u dhamaatay waa loo rumaynayaa.

Qodob.103^{aad} - Marwada ku dhex jidha Ciddo Rajciya ah waxay leedahay Axkaamtaan soo socota:

b- Saygii furay intay Cidada ku jidho waa ceshan karaa.

t- Haddii Sayga iyo Marwada midkood dhinto waa is dhaxlayaan.

j- Waxaa Marwadaas Sayga ugu waajibey Degaan, Gurigeedana kama bixi kadho ,haddii Saygu aanu u ogolaan ama aysan u bixin arrin lagama maarmaan ah.

x- Waxaa Marwadaas Saygeedii ugu waajibey Masruuf iyo Marashi.

kh- waxaa Saygaa ka reeban inuu guursado inta Cidadu socoto Haweeney shanaad ama mid ay reebantahay in Marwadaas Cidada ku jidha Guur laysugu keeno.

Qodob.104^{aad} - Marwada ku jidha Cidada Saygu aanu ceshan karin (بائن); Taasoo ah Marwo lagu furay Sadex Dalqadood, Haweeney iyada iyo Ninkeedii Fasakh dhexmaray , iyo Haweeney Dhaqaale Iskufuratay inta Haweentaasi Cidada ku jidho waxay leedahay Axkaamtaan :

b-Ninkeedii Ma ceshan karo .(Rajciyo maleh) intay Cidada ku jidho.

t-Haddii Ninka iyo Haweenta Midkood dhinto Cidada dhexdeeda is dhaxlimayaan.

j-Haweentaas waxaa Ninka ugu waajibey Degaan, waxaana u banaan inay Danaheeda iyo Baahideeda Guriga uga baxdo.

x - Masruuf iyo Marashi midna Ninkaas kuma laha hadaysan Uur lahayn .

kh- waxaa Ninka u banaan inuu guursado Haween Midaas ay kala tageen Shan ku ah, iyo mid ay reebantahay in Haweentaas Guur laysugu keeno.

Qaybta Afraad:

**Axkaamta Dhabar-habreedinta, Kadhaarasha Xaaska, Leecaantanka
iyo Ninka la waayey.**

Madaxa 1aad : Dhabar-habreedinta (الظهار).

Qodob.105^{aad} - Qeexidda Dhabar-habreedinta iyo Codka ay ku guntamayso :

b- Dhabar-habreedintu waa in Ninku Xaaskiisa uu qabo ku matalo (kala mid-dhigo) Qof Dumar ah oo Guurkeedu Dhalasho ahaan si Abadi ah uga reebanyahay sida (Hooyaday baad iga tahay ama Walaashay Baad iga tahay IWM).

t- Dhabar-Habreedintu waxay ka ansaxaysaa Nin kasta oo Qaangaar ah, Miyir-qaba isla markaana aan la khasbin.

j- Dhabar-habreedintu waxay ku ansaxaysaa Hadal cad iyo Sarbeeb niyo la Xiriirto, sidoo kale waxay ku ansaxaysaa in Shardi ama Waqti lagu xiro iyo inaan waxba lagu xirin.

Qodob.106^{aad} - Ninku Haduu Xaaskiisa iska dhabar-habreediyo islamarkaaba haduusan Furiin raacin waxaa ku waajibaya inuu la yimaado Kafaaradii Dhabar-Habreedinta, waxaana ka reeban inuu Xaaskaas u galmoodo Kafaara-gudka ka hor.

Qodob.107^{aad} - Haddii Ninku Dhabar-habreedinta Shardi ku xiro, Dhabar-Habreedintu waxay Guntamaysaa (bilaabanaysaa) marka Shardigaa la helo, Hadduu Muddo u Magacaabay Ninku Dhabar-habreedinta, Mudadaas Dhexdeeda ayaa waxaa ka reeban inuu Xaaskaas u galmoodo isagoo aan Kafaaro gudan, Mudada ka dibna Dhabar-habreedintii waa dhamaatay, waana u Xalaal, wax kafaara ahna kuma waajibin.

Qodob.108^{aad} - Kafaarada Dhabar-habreedintu waa : Inuu Ninku Qof Addoon ah oo Muslim ah Xoreeyo, Haddii uu waayo ama awoodi waayo wuxuu Soomayaa laba Bilood oo Xiriir ah oo Bilaha Dayaxa ah, Haduu awoodi waayo wuxuu Cunto ku quudinayaa Lixdan Miskiin mid walbana wuxuu siinayaa Hal Mud (مد) oo Raashinka la quuto ah una dhigma (600 g).

Madaxa 2aad : Ka Dhaarashada Xaaska (الإيلاء) iyo Axkaamteeda :

Qodob.109^{aad} - Ka Dhaarashadu waa in Nin wax furi kara isla markaana aan la khasbin ka dhaarto inuu Xaaskiisa u galmoodo isagoo wax Waqti ah aan ku xirin

, ama ku Xiray Waqti Afar bilood ka badan .waxay Dhaartu ku ansaxaysaa Hadal cad iyo Sarbeeb Niyo wadata Labadaba.

Qodob.110^{aad} - Xaas ka dhaarashadu waxay ku ansaxaysaa Ninku inuu ku dhaarto Magacyada Allaah iyo Sifooyinkiisa , sidoo kale waxay ku ansaxaysaa inuu Shardi ku xiro , sida inuu yiraaho hadaan kuu galmoodo waad iga furantahay , ama Allaah wuxuu igu leeyahay intaas oo Salaad ah ama Soon ah ama Xaj ah.

Qodob.111^{aad} - Ka dhaarashada Xaaska Afar Bilood wax ka badan ma banaana sidaas awgeed Ninka waxaa ku waajib ah inuu ka laabto. Marka Ninku Xaaskiisa uu u galmoodo Waqtigii uu ka dhaartay intuuusan dhamaan ka hor, ama Dhaartii aan Waqtiga lahayn, waxaa ku waajibaya Kafaara-gudkii dhaarta) (كفارة اليمين, Galmada ka horna Kaafarada Qaybaheedii kale waa gudan karaa marka Soon-ka laga reebo .

Qodob.112^{aad} - Haweentu Marka Ninkeedu ka dhaarto waxay sugaysaa Afar Bilood , Markaas ka dib Hadduu Ninkii diido inuu Xaaskiisa u galmoodo waxaa u banaan inay Maxkamadda ka dacweyso. Qaadiga ayaana Ninakaas wuxuu farayaa inuu Dhaartiisii ka laabto ama Xaaskaas furo , haddii labadaas midna uu diido Qaadiga ayaa Dalqad kaga furaya.

Qodob.113^{aad} - Kalaabashada Dhaartu waxay ku sugmaysaa inuu Ninku Xaaskiisii u galmoodo markuu awoodi karo ,kii aan markaas Galmo awoodi karin waxay ku sugmaysaa inuu Balanqaad afka ah sameeyo .

Qodob.114^{aad} - Ninku hal mar Xaasaskiisa oo dhan Hadduu ka wada dhaarto waa ansaxaysaa, Dhamaantood Markuu u wada galmoodo ayay Kafaaradii ku waajibaysaa, Mid walbana waxay xaq u leedahay Markii Afartii Bilood dhamaato, inay Maxkamadda horteeda kaga dalbato inuu u galmoodo ama furo.

Qodob.115^{aad} - Haddii Labada Lamaane isku qabtaan in Ninku ka dhaartay iyo inkale , ama isku qabtaan in Afartii Bilood dhamaatay iyo in kale , Haddaan markhaanti la helin waxaa dhaartiisa loogu rumaynayaa Ninka sheegashiisa.

Madaxa 3aad : Axkaamta Leecaantanka (اللعان).

Qodob.116^{aad} - Qeexidda iyo Asbaabaha Leecaantanka keena :
b- Leecaantanku waa Dhaaro dhex mara Labada Lamaane Kaasoo Ninku Xaaskiisa ku eedaynayo inay Sino ku dhacday ,Haweentuna arrintaa ku beeninayo .

t- waxaa Leecaantanka keena markii Nin Qaan-gaar ah oo miyir qabaa Xaaskiisa dhawrsoon, ama Haween uu furay kuna jidha Ciddo uu ku ceshan karo ku eedeeyo inay ku dhacday Sino Xad (Ciqaab) keenaysa.

j- waxaa kale oo Leecaantanka keena marka Ninku Diido inuu isagu dhalay Ilmo Xaaskiisu Gogoshiisa ku dhashay .

x- Waxaa waajib ah in Leecaantanku ka dhaco Qaadiga Maxkamadda hortiiisa.

Qodob.117^{aad} - Marka Dacwada Leecaantanka Maxkamadda la keeno .waxaa Qaadiga laga rabaa inuu Labada lamaane wacdiyo kuna booriyo inay Run sheegaan, Haday markaas ka dib diidaan ,wuxuu Dhaarta ku bilaabayaa Ninka ; Afar jeer ayuu wuxuu oranayaa : Allaah waxaan uga Markhaanti kacayaa inaan Run ku sheegayo Sinada aan ku eedeeyey Haweentaydaas,Haddii uu jiro Ilmo uu diidayo inuu dhalay wuxuu ku darayaa: inuusan Ilmahaas dhalin , Dhaarta Shanaad wuxuu isku habaarayaa Lacnadda Allaah inay korkiisa ahaato haduu Been sheegayo .

Qodob.118^{aad} - Marka Leecaantanku Ninku sidaas Qaadiga hortiiisa uga dhaco waxaa ka sugnaanaya Arrimahan:

b- Ninka Xadkii Qadafku waa ka dhacayaa .

t- Ilmihii uu diideyna waa ka beri noqonayaa.

j- Haweentaasi waa ka baa,inoobaysaa(kalatag adag) abidkeedna Guurkeedu waa ka Xaaraan.

x- Haweentaasna waxaa ku waajibaya Xadkii Sinada .

Qodob.119^{aad} - Markaas ka dib Haweentu waxay Xadkii Sinada isaga difaaci kadhaa inay Afar jeer Magaca Allaah ugu Markhaanti kacdo Ninkaasi inuu Been ku sheegayo Sinada uu ku eedeeyey, iyo Ilmaha uu ku diidey(haddii Ilmo jiro) , Marka Shanaad-na waxay isku Habaaraysaa in Carada Allaah korkeeda ahaato Haddii Ninkaasi Run sheegayo .

Waxaa waajib ah in Dhaaraha Ninku bilaabo Haweentuna ka dambayso, Haddii Haweentu ku hor-madho waa lagu soo celinayaa.

Qodob.120^{aad} - Haddii Ninku ka joogasado Leecaantanka, kadib markuu Marwadiisii Sino ku eedeeyey , waxaa lagu Fulinayaa Xadkii Qadafka (حد القذف), sidoo kale haddii Haweentu ka joogsato Jawaabta Leecaantanka, iyadana waxaa lagu Fulinayaa Xadkii Sinada (حد الزنا) .

Qodob.121^{aad} - Ninku hadduu Mar-uun ku laabto Ilmihii uu diidey , Laabashadaasi waa ansaxaysaa , Ilmahaasina waa raacayaa , Xadkii Qadafkana (حد القذف) Ninkaas waa lagu Fulinayaa, Hase-yeeshee Isaga iyo Haweentaasi mar dambe Guur isugu iman-mayaan.

Madaxa 4aad : Axkaamta Qofka la waayey (المفقود) .

Qodob.122^{aad} - Qofka la waayey waa Midka aan la ogeyn Meesha uu jiro, iyo Noloshiisa iyo Geeridiisa midna .

Qodob.123^{aad} - Qofka la waayey Hantidiisa haduusan uga tegin cid u Wakiil ah, Waxaa Qof Mas' uul ah oo Hantidaas Maamula u qabanaya Qaadiga jooga Meesha Hantidu taal , waxaana lagu wareejinayaa Qofkaas Mas' uulka ah Markii lagu tiriyo ka dib ,Waxaana Hantidaas loo Maamulayaa sida Hantida Qofka Dhiman loo maamulo .

Qodob.124^{aad} - Waayitaankaas wuxuu Dhamaanayaa marka la helo Arrimahan :

b- Marka la helo Qofkaasi isagoo Nool.

t- Markay sugnaato inuu dhintay .

j- Marka Qaadiga Maxkamaddu Ijtihadkiisa ka dib Go' aan Xukun ah ku soo saaro inuu Geeriyooday Qofkaas la waayey .

x- Hadduu Qofkaasi ka tirsanaa Ciidamada Qalabka sida; Markii Wasaaradda G/dhigu kusoo saarto Dekreeto Geeridiisa cadaynaysa.

Qodob.125^{aad} - Qaadigu wuxuu Go'aamin karaa Geerida Qofka lawaayey Marka la helo Arimahan mid ka mid ah :

b- Markii Caddayn loo helo inuu Geeriyooday .

t- Markay gudubto Muddo Qaadigu Ijtihadkiisa ka dib ku qanci karo inuusan Qofkaas Maqani Noolayn Muddadaas kadib ,iyadoo Fiiro gaar ah la siinayo Duruufihii uu ku sugnaa Marka Qofkaas Warkiisa ugu dambeysey. Mudada go'aan qaadashada qaadigu waa in aanay ka yaraan 4-sanno.

Qodob.126^{aad} - Qaadiga mar walba waxaa ku waajib ah Mudadaas Maqnaanshaha inuu adeegsado jid kasta oo suurto gelin kara in wax war ah laga helo Geeri iyo Nolol Qofkaas la waayey, ka hor inta Xukunka Geerida aanu Gaarin .

Qodob.127^{aad} - Haweentii Ninkeedii La waayo ama uu Maqnaado iyadoo aan la ogeyn meesha uu jiro , waxaa la sugayaa Afar sano oo ka bilaabanaysa marka waayitaankiisa la gaarsiyo Qaadiga Maxkamadda , Mudadaas Hadii aan la helin Ninkaas Xaaskiisii waxaa u banaan inay Ka fasakhato , kadib markii Maxkamaddu u xukunto .

Qodob.128^{aad} - Maalinta Qaadiga Maxkamaddu xukumo Geerida Qofka la waayey ayaa loo aqoonsanayaa inuu geeriyooday. Haweentuna markaas ayay Cidada bilaabaysaa .

Qodob.129^{aad} - Qofkii lawaayey oo la xukumay inuu geeriyooday, markaas kadib haddii Nolol lagu helo, Wuxuu mutaysanayaa in loo celiyo Hantidiisii wixii jooga , sidoo kale waxaa u soo noqonaya Xaasaskiisii aan Cid kale guur kula aqal gelin .

Kitaabka Sadexaad .

Xigtanimada iyo Axkaamteeda:

Qaybta Koowaad :Abtirsiinyaha, Nuugmada, iyo Xanaanada .

Madaxa laad : Sugnaanta Abtirsiinyaha(Nasabka) .

Qodob.130^{aad} - Xigtanimadu (Nasabku) waxay ku sugnaataa Afar arimood oo kala ah : Guur, Markhaanti ,Qiraal iyo Caan-bax .

Qodob.131^{aad} - Lamaane kasta oo isku qaba Guur Sax ah oo dhamays-tirtay Tiirarkiisii iyo Shuruudihisii, Ilma kasta oo Haweentaasi dhasho inta Guurkaasi jiro waxaa Aabe u ah kuna Abtirsanayaa Ninkeeda.Waxaase lagama Maarmaan ah in Ninkaasi qaan-gaar yahay ,Galmoodna ka suurtageli karo , islamarkaana Ilmahaasi ku dhasho Lix Bilood iyo wax ka badan laga soo bilaabo Markii Caqdiga Guurku dhacay.

Qodob.132^{aad} - Sidoo kale Ilmo kasta oo ka dhasha Guur Tiirarkiisii ama Shuruudihisii wax ka dhimanyihiin, ama ka dhasha Galmo laysku khaldamay (شبهة) wuxuu ku abtirsanayaa Ninkaas, waana marka Ilmahaasi ku dhasho Lix Bilood iyo wax ka badan laga soo bilaabo Marka Galamadii ugu horeysey dhacday.

Qodob.133^{aad} - Haweentu Ilmo kasta oo ay sugnaatay inay iyadu dhashay xataa haddii aysan qirsanayn iyadaa Hooyo u ah ,

Qodob.134^{aad} - Ilmo kasta iyo Uur kasta oo jiritaankiisa la hubsaday isla markaana aan la aqoon cida dhashay , wuxuu ku abtirsanayaa Cidii sheegata inay Ilmahaas ama uurkaas dhashay, xataa Qirashadaasi haday dhex dhacdo jiradii Geerida, marka la helo Shuruudahaan:

b- inay suurto gal tahay Ninkaasi Ilmahaas inuu dhalo isla markaasna aanay jirin Cidkale oo loo yaqaan inay Ilmahaas Sharci ku dhashay.

t- Ninkaasi inuusan Qiran Ilmahaas Sino inuu ku dhalay.

j- Ilmahaasi haduu Qaan gaar yahay hadaan Dhalashadaas Markhaanti loo helin ;
waa inuusan Sheegashadaas beenin.

Qodob.135^{aad} - Xukunka marka Laba Nin ama ka badan isku qabsadaan Ilmo ay suurto-gal tahay in Mid walbaa Aabe Sharci ah u yahay, isla markaana aan la helin Markaanti iyo Caddayn kale oo lagu kala saaro :
b- Haddii Ilmaha laysku qabsaday uu Qaan-gaar yahay Waxaa la raacinayaa had-ba Ninkii Ilmahaasi sheegashadiisa u rumeeyo.

t- Haddii Ilmahaasi aanu Qaan-gaar ahayn, Lana waayo wax Caddayn ama Markhaanti ah oo Mid-kood Sheegashadiisa Xoojiya , waxaa Ilmahaas midkood raacin kara Sinji sooce Ilmaha loo bandhigay, Ama Baaritaanka DNA .

j- Haday Suurto geli waayaan Baaritaanadaasi Markii Ilmahaasi Qaan-gaaro isaga ayaa dooranaya Cidduu raaci lahaa.

Qodob.136^{aad} - Qofkii aan la'aqoon Cidda dhashay haduu Aabe iyo Hooyo geeriyodey ku abtirsado waa laga aqbalayaa , Haddiise Dadkaasi noolyihiin waxay dhalashadaasi sugnaanaysaa oo keliya Markii Aabahaas iyo Hooyadaasi Qiraan inay Qofkaas sheegtay Waalid u yihiin. Waana in Xis iyo Sharci midna aanu Beenin sheegashadaas , isla markaana Aabaha la sheegtay aanu qiran inuu qofkaas Sino ku dhalay.

Qodob.137^{aad} - Haddii Qof Dumar ah sheegato Ilmo aan Horay loogu aqoon inay Hooyo u tahay Sheegasha-daasi waxay ku sugnaanaysaa oo keliya Inay Haweentaasi Markhaanti u keensato inay Ilmahaas iyadu dhashay , ama Nin-keedii u qiro inuu Ilmahaas Aabe u yahay iyadoo Mar walba la ilaalinayo Shuruudihii lagu soo sheegay Qodobka. (139).

Qodob.138^{aad} - Qofka Nasabkiisa aan la aqoon Hadduu Qof kale ka dhigto Aabe ama Hooyo , Dhalashadaasi u gudbi-meyso Cidkale (Walaal ama Adeer) hadaysan iyaguna la ogolaan, waa hadii Dhalashadaas aanu Qiran waalid ka wada dhexeeya Dhinacyadaas, ama Farac Xiriirinaya , Ivadoo mar walba la tixgelinayo Shuruudihii aan ku soo marnay Qodob.(139).

Qodob.139^{aad} - Mar haddii Qof qirto Dhalasho uu la wadaago Cid kale isla markaasna Dhalashadaasi Sharci ahaan sugnaato , Qofkaasi mar dambe Qirashadaas kama laaban karo , Sidoo kale qirashadaas waxaa ku sugnaanaya (Ratibmaya) dhamaan Axkaamtii Dadka wada dhashay ka dhexeeysey .

Qodob.140^{aad} -Muddada ugu yar ee Ilmo Nool ku dhalan karaa waa Lix bilood , Mudada loo badan-yahayna waa Sagaal Bilool , Muddada ugu badan ee Ilmo Calool ku jiri karaana waa Afar sano.

Qodob.141^{aad} - Wiilka iyo Gabadha Mid walbaa wuxuu ku qaan gaari karaa Marka la helo Arrimahan :

b- Marka Mani ka timaado ugu yaraan markay jiraan Sagaal sano .

t- Markay Da'ahaan u dhamays-tiranto Toban iyo Shan Sano oo Bilaha Dayaxa ah .

j - Gabadhu intaas waxay la dheertahay Marka uu ku bilawdo Dhiiga Caadada ugu yaraan Markay Gaadho Sagaal sano . Sidoo kale Gabadhu waxay ku qaangaaraysaa marka lagu arko Uur.

Qodob.142^{aad} - Marka Qofku sheegto inuu ku Qaangaarey Da' , suurto gal u ah waa loo Rumaynayaa .

Haddii laysku qabto Qofku inuu qaan gaarey iyo in kale Waqti suurto-gal Labada arimoodba ay noqon karaan , Waxaa loo Rumaynayaa waxa Qofkaasi sheegto, waa haddii aan la helin Caddayn kale oo beeninaysa sheegashadiisa .

Qodob.143^{aad} - Haweentii la furay hadii ay Ilmo Dhasho intaysan Cidada ka bixin ka hor Ilmahaasi wuxuu ku Abtirsanayaa Ninkeedii Furay .

Qodob.144^{aad} - Haddii Ilmahaas ku dhasho Furriinkii kadib Lix Bilood wax ka yar iyadoo markaas ka hor Sheegatay inay Cidadii u dhamaatay Ilmahaas mar walba waxaa loogu abtirinayaa Ninkii furay .

Lix Bilood iyo ka badan haday ku dhasho Ilmahaas iyadoo aan Haweentaas Cidkale guursan waxaa loo eegayaa si uu Ninkaas hore ugu abtirsado Mudadii Uurka oo Sharcigaan lagu soo sheegay **Qodob.(145)** Mudadaasoo ka bilaabanaysa Markii Furriinku dhacay .

Qodob.145^{aad} - Haddii Haweeyneydii Ciddada ka baxday Nin kale guursado markaas ka dibna ay Ilmo ku dhasho Muddo ka yar Lix bilood , Ilmahaas wuxuu ku abtirsanayaa Ninkii hore oo Furay ,Nikaaxaas dambana waxba kama jiraan , haddii Ilmuhu ku dhasho Lix Bilood iyo wax ka badan waxaa iska leh kuna abtirsanayaa Ninka dambe , Labada goorna Mudada waxaa laga tirinayaa Markii Guurka dambe dhacay.

Qodob.146^{aad} - haddii Haweeney Ciddo ku jidhaa Guur Faasid ah Nin kale kula Aqal gasho isla Cidadaas dhexdeeda , Markaas kadibna Ilmo dhasho Ilmahaas si Labadaas Nin Mid-kood loo raaciyoo waxaa loo eegayaa Arrimahan :

b- haddii Ilmahaasi ku dhasho Lix Bilood wax kayar laga soo bilaabo Galmada Ninka dambe wuxuu ku abtirsanayaa Ninkii hore , Ciddadeeduna Dhalmadaas ayay ku dhamaanaysaa , markaas kadib ayay Ninka dambe Cidadiisii bilaabaysaa .

t- haddii Ilmahaasi ku dhasho Afar sano wax ka badan Laga soo bilaabo Markii Haweentaas Ninkii hore kala tageen, wuxuu Ilmahaasi ku abtirsanayaa Ninka dambe .

j- Haddii Ilmahaasi ku dhasho Lix Bilood iyo wax ka badan Laga soo bilaabo Galmada Ninka dambe ilaa Afar Sano iyo wax kayar laga soo bilaabo kala taggii Ninka hore, Ilmahaas Labada Ninba waa ka suurto geli karaa waxaana midkood raacin kara Sinji sooce Ilmaha loo bandhigay ama Baaritaanka DNA.

Qodob.147^{aad} - waxaa reeban, isla markaana wax Xiriir dhalasho ah, ama Axkaam Xigtanimo aysan ka sugnaanayn Sheegashada Qofku Sheegto inuu Waalid u yahay Ilmo uusan dhalin (التبني), walowba Ilmahaas aan cidna loo aqoon.

Madaxa 2aad: Nuujinta Ilmaha iyo Axkaamteeda.

Qodob.148^{aad} - Hooyadu Ilmahay dhashay waxaa waajib ku ah inay Nuujiso hadaan la helin Cid kale oo nuujisa ,iyada ayaana Hooyadu Xaq u leh inay Ilmaheeda nuujiso mar hadaanay dalban Kiro ka badan Mida Ilmahaas Haweeneyda iyada lamid ahi ku nuujiso . Haddii Ilmaha Haweeney kale nuujinayso Ilmahaas Xanaanadiisa iyo hayntiisa Hooyadiis ayaa Xaq u leh hadaan la helin sabab Xanaanadaas ay ku weydo .

Qodob.149^{aad} -Hooyada Ilmaha nuujinaysaa waxay Aabihiis ama Weligiisa kale Xaq ugu leedahay,Haday codsato Ujrada iyadoo kale la siiyo inta Nuugmadu socoto ilaa Muddo Laba Sano ah, kana bilaabanaysa markii Ilmahaasi dhashay. Ujradaas hadaan Hooyada la siin ama aysan Cafiyin waxay u yeelanasaa Deyn .

Madaxa 3aad : Xannaanada Ilmaha iyo Axkaamteeda.

Qodob.150^{aad} - Xannaanadu waa in Ilmaha Yar oo aan keligiis is maamuli Karin la dhaqaaleeyo , la koriyo (Tarbiyeeyo) ,wax la baro , Asluubtiisa la hagaajiyoo ,isla markaana laga ilaaliyo wax kasta oo dhib u keeni kara. Xanaanaduna waa Xaq Ilmaha ugu waajibbey Waalidkiisa oo aan marna laga dayici Karin.

Qodob.151^{aad} - Dhamaadka Xannaanada Ilmaha :

Xannaanada Ilmuhu waxay dhamaanaysaa Markuu gaaro Da' uu iskiis isu maamuli karo, siiba xaga Cuntada ,Dhar-xirashada ,Nadaafada iyo jifka , Ilmahaasna waa inaysan Da'diisu ka yarayn Todoba Sano .

Qodob.152^{aad} - Qofka Ilmaha Muslimka ah Xannaanaynayaa waa inuu yahay Qof Muslim ah , Qaan gaar ah , Miyir qaba , ka Caafimaad qaba Cudurrada khatarta ah oo laysu gudbiyo , Indha qaba, Ilmahaasna loo aamini karo ,islamarkaasna awood u leh Ilmaha Tarbiyadiisa iyo Ilaalintiisa Xaga Jirkiisa iyo Xaga Akhlaaqdiisaba . Qofka Ilmaha xanaanaynayaa hadduu Haween yahay waa inay u madax banaan tahay Ilmahaas , isla markaana waq inuusan qabin Nin Ilmahaas Xigto dhow aan u ahayn.

Qodob.153^{aad} - Hooyadu iyadaa ugu mudan Xanaanada Ilmaheeda , waa haddii ay Awood u leedahay Xanaanadaas ,Mana diidi kadho hadaan loo helin Ilmaha cid kale oo Xanaanaysa .

Qodob.154^{aad} - Hooyadu haday geeriyooto ama Xanaanaynteedii suurto gili weydo ,waxaa Ilmihii Xanaanaynaya Hooyada Hooyadeed iyo Ayeeyooyinkeed Xaga hooyada hadba siday Ilmaha u kala xigaan , Markaas ka dibna Xanaanadii waxaa yeelanaya Aabihii Ilmaha, kadibna Hooyooyinkiis hadba siday u kala xigaan , Awoowihii Aabe , Hooyooyinkiis hadba siday u kala xigaan , Markaas ka dibna Habaryartii , markaas kadibna Walaashii Labada Waalid Ilmaha la wadaagtey ,dabadeedna walaalkii La sinaa ,Dabadeedna , Walaashii Aabe keliya la wadaagtey .Walaalkii taas la sinaa , Walaashii Hooyo keliya la wadaagtey , Walaalkii la sinaa , Dabadeedna Ilmaha walaalihiis Carruurtooda hadba siday u kala xigaan , Dabadeedna Eedooyinka Siday Ilmaha u kala xigaan

Qodob.155^{aad} -Dadka Xannaanada Ilmaha lihi haday dhinac walba ka sinaadaan Qaadiga ayaa u dooraya midka ugu haboon.sidoo kale Qaadigu wuxuu Awood u leeyahay hadduu u arko Ilmaha Maslaxadiisa inuu Dadka Xanaanada leh siday isugu xigaan si ka duwan u kala hormariyo.

Qodob.156^{aad} - Shuruudaha lagu soo sheegay **Qodob.(157)** kuwaasoo laga doonayo Qofka Ilmaha Xannaanaynaya , haddii Qofkii laga waayo Xaqii Xannaanadu wuxuu u gudbayaa Qofkii ku xigey.

Qodob.157^{aad} - Waajibaadka Qofka Ilmaha Xanaanaynaya :

b- Qofka Ilmaha xanaanaynaya waxaa laga rabaa inuu Ilmahaas u qabto wax kasta oo uu u baahanyahay, marka laga reebo Masaariifta Cid kale lagu leeyahay iyo wixii soo raaca .

t-Hooyada ama Qofka kale oo Ilmaha Xanaanaynayaa Midna Safar iyo Geedi Ilmaha lama Geli karo, iyadoo Ogolaansho aan laga helin Aabihii Ilmaha ama Weligiisii kale, waxaana Safarkaasi ama Geeddigaasi Banaanaan karaan Marka Ilmaha aysan ka soo gaarayn wax dhib ah Jirkiisa, Dareenkiisa iyo Akhlaaqdiisaba.

j- Haddii Labada Waalid midkood Ilmaha Xanaanaynayo kii kale wuxuu Xaq u leeyahay Inuu Ilmaha soo booqdo hadba siday ugu heshiiyaan Labada dhinac, ama haday is khilaafaan Qaadigu go'aamiyo.

Qodob.158^{aad} - Ujrada ama Hawlka Xannaanada Cidda lagu leeyahay :

b- Qofka Ilmaha Xannaanaynayaa wuxuu Hawlkiisa (Ujradiisa) ku leeyahay Ilmaha uu Xanaanaynayo Xoolihiisa , hadaanu Xoolo lahayna, Cidda Ilmaha Masaariiftiisu ku waajibtey.

t- Hawl-ka waxaa lagu jaangoynayaa hadba Awooda dhaqaale ee uu leeyahay Qofka Hawl-kaasi ku waajibey .

j- Ilmaha Hooyadiis Xanaanaynayso haddii Aabihiis Qabo Wax Hawl ah (Ujra ah) Xannaanada kaga yeelan mayso.

x- Aabuhu Hadduusan wax Dhaqaala u awoodin Xannaanada Ilmihiisa waxaa Hawlka bixinaya Hooyada haday Awood u leedahay .

kh- hadii Maxkamada ogolaanshaheeda Cid kale Halwka Ilmahaas Deyn ahaan u bixiso waxaa loo raacanayaa Aabihiis.

Qodob.159^{aad} - Wixii Dhib ah oo Ilmaha ku soo gaara Xad-gudub , ama Dayac si ula kac ah uga yimid Qofkii xanaanaynayey Isaga ayaa loo raacayaa . wixii Gaf ama kama' ku yimaadana Caaqiladiisa ayaa loo raacayaa.

Qodob.160^{aad} - Marka Ilmuhu wax kala garto islamarkaana keligiis is maamulo, haddii Hooyada iyo Aabahu aanay is qabin kuna heshiin waayaan Xannaanada ; Ilmaha ayaa la kala dooransiinayaa hadba Labadooda kuu raaco , Kii uu doorto ayaana lagu wareejinayaa , Cid aan labada Waalid ahayn haday isku qabtaan Xannaanada Ilmaha Qaadiga ayaa kala saaraya ,Isagoo mar walba tixgelin siinaya Maslaxadda Ilmaha iyo Doorashadiisa .

Qaybta Labaad : Axkaamta Masaariifta ,iyo Mas'uuliyadda Dadka dhiman .

Qodob.161^{aad} - Masaariiftu waa Kharashaadka lagama maarmaan-ka u ah Noloshu Aadamiga sida Cuntada, Dharka , Degaanka ,Daawada , Adeega IWM ,Taasoo laga doonayo Qofka ay ku waajibtey Xoolihiisa , Sababaha waajibiya Masaariifta Noolaha waa : Guur , Xigtanimo , iyo Lahaansho .

Qodob.162^{aad} - Sidoo kale waxaa Ninka ku waajibey Masaariifta Haweenta uu furay oo Ku jidha Ciddo uu ku ceshan karo, iyo Midda Uurka u leh si kasta oo ay ku kala tageen .

Qodob.163^{aad} - Xaasku wax Masaariif ah Ninkeeda ku mutaysanmayso marka Arrimahan la helo :

b-Markay diido inay u wareegto Guriga Ninkeeda iyadoo aan lahayn Cudur-
daar Sharci ah .

t-Markay Cudur-daar la'aan Gurigiisa uga tagto .

j- Markay Shaqo ka qabato Meel Guriga Qoyska ka baxsan iyadoo ogolaansho
Ninkeeda uga haysan .

x- Markay diido inay Saygeeda la safarto Cududaar la'aan iyadoo la tixgelinayo
Qodob.(58),Xarafka(b).

kh- Markay Ninka ku amar diido Arrimaha ku xusan **Qodob.(58),Xarfaha.(t,j,x)** .

Qodob.164^{aad} -Meermeerinta , hormarinta , iyo Cafinta Masaariifta :

b- Xaqa Xaasku Ninkeeda ugu leedahay Masaariifta kaga dhicimaayo
Meermeerin waqtigii la soo dhaafay , ama inay Cafiso waqti aan wali la gaarin .

t-Ninku Xaaskiisa waa u hormarin karaa Masaariif Waqtigeedii aan la gaarin,
Marwadaasna waa lagu Xisaabinayaa .

j-Haweenta waxaa u banaan Inay Cafiso Masaariif ay Deyn u lahayd Waqti la
soo dhaafay.

x- Waajib kuma aha Haweenta inay aqbasho Masaariif Cid kale ugaga
tabarucday Xaga Ninkeeda.

Qodob.165^{aad} - Haddii Ninku Diido Masaariifta Xaaskiisa , ama uu maqanyahay
isla markaana ay sugnaato inuusan wax Masaariif ah uga tegin ama u soo dirin ,
Xaaskaas waxaa u banaan Haddii ay hesho Xoolo Ninkeedii leeyahay inay
Idankiisa la'aantiis ka qaadata Qadarka Masaariifta ay ku leedahay , Haday u

suurto geliweydana Qaadiga ayaa Xoolahaas Xaaskaas uga goynaya in Masaariifteeda ku filan.

Qodob.166^{aad} - Haddii Haweenta iyo Ninku Isku khilaafaan Masaariiftii inay qaadatay iyo in kale Haweenta ayaa Dhaarteeda loogu rumaynayaa.

Qodob.167^{aad} - Marka Ninku bixin waayo Masaariifta xaaskiisa oo iyadu Saburto ama Deyn qaadato , ama Cid kale Deyn siiso Xaaskaas , Masaariifahaas oo dhan waa Deyn loogu noqonayo Ninkaas .

Madaxa 2aad: Masaariifta Xigtada Qofka.

Qodob.168^{aad} - Carruurta aan Qaan-gaarka ahayn , Qofka waalan iyo Naafada aan shaqaysan Karin haday Xoolo leeyihiin Xoola-hooda ayaa laga masruufayaa, hadaysan Xoolo lahayn Masaariif-toodu waxay ugu waajibaysaa Aabohood iyo Awoowayaalka Aabuhu ka soo farcamay hadba siday ukala xigaan waana hadday Awood u leeyihiin Masaariiftaas , Haddii Aabihii iyo Awoowayaashii la waayo ama aysan Awood Dhaqaale u lahayn Masaariiftaas , waxaa Dadkaas Maasaariiftoodu ku waajibaysaa Hooyadood iyo Dadkii ay ka soo farcantay, hadba siday Ilmaha u kala xigaan, Haddii Awoowayaal iyo Ayeeyooyin Dadkaas Masaariiftoodu waajibtey u sinmaan Masaariifta waa loo qaybinayaa.

Qodob.169^{aad} - Gabdhaha ilaa laga Guursanayo ama shaqo Masaariif-tooda ku filan ka helayaan, hadaysan Xoolo kale lahayn waxaa Masaariiftooda qaba Waalid-kooda awoodda u leh.

Qodob.170^{aad} - Masaariifta Aabaha iyo Hooyada aan Xoola lahayn ,xataa haddii ay shaqaysan karaan waxay ugu waajibaysaa Duriyadooda Awooda Dhaqaale u leh , had-ba siday u kala xigaan. Haddii Durriyaddu Waalidka u sinaadaan Masaariifta ku waajibtey si isle'eg ayaa loogu qaybinayaa.

Qodob.171^{aad} - Haddii Qofku awoodi waayo inuu wada masruufo Xigtaddiisa Baahida Naftiisa kadib wuxuu u kala hormarinayaa hadba intuu awoodi karo sidatan: Xaaskiisa , Ilmahiisa aan Qaan-gaarka ahayn ama Waalan , Hooyadiis ,Aabihiiis ,Ilmihiiisa Qaan-gaarka ah , Awowgiis... siday u kala xigaan.

Qodob.172^{aad} -Masaariifta Xaaska Aabaha:
b- Haddii Aabuhu Xaas leeyahay Awood uu ku Masruufana uusan lahayn Ilmihiiisa Awoodda u leh ayay waajib ku tahay inuu u masruufo .

t- Haddii Aabuhu Xaas aanu lahayn una baahanyahay sidoo kale Ilmihiiisa Awoodi kara ayaa laga rabaa inuu u guuriyo .

j- Haddii Aabuhu Xaasas badan leeyahay, ama Guurin u baahdo, Hal Xaas oo keliya ayaa Ilmihiisa Awooda u lihi Masruufkeedu ama u guurinteedu ugu waajibtey .

x- Haddii Waalidku u baahdo Adeege Awood uu ku qabsadana aanu lahayn Ilmihiisa Awoodda u leh ayay Waajib ku tahay inuu u Qabto una masruufo.

Qodob.173^{aad} - Jaangoynta Masaariifta Xigtada iyo bixinteeda :

b- Masaariifta Xigtada waxaa lagu jaangoynayaa hadba Baahida Xigtadaas intay le'egtahay, iyo Awooda Cidda masaariiftu ku waajibtey .

t- Waqtigii Lasoo dhaafay Masaariifta Xigtada oo baaqatay Deyn ku noqonmayso Qofkay Waajibka ku ahayd.

j- Haddii Xigtadu Deyn qaataan ,ama Cid kale Deyn uqaado , ama Qaadigu Cid kale Deyn uga qaado, waxaa Deyntaas loogu noqonayaa Ciddii Masaariiftaasi ku waajibtey.

Qodob.174^{aad} - Xigtada Masaariifteedu waajibtey waa Waalid iyo Durriyad keliya, Diin ay ku kala Duwanyihiina loo eegi mayo .

Qodob.175^{aad} - Awoodda Bixinta Masaariifta Xigtada :

b- Waalidka ama Durriyadda waxay Masaariiftu ku waajibaysaa Markay heli karaan wax Dheeraad ka ah Masaariifta Naftooda Labaatan iyo Afarta Saac ee la joogo.

t- Hadduu leeyahay Qofka Masaariifta Xigtadu ku waajibtey Maguurto ka baxsan Baahidiisa lagama maarmaan ka ah Masaariifta Xigtaddiisa waa loo iibinayaa.

j-Haddii Xigtadu is ku qabtaan Awoodda Dhaaqaale ee Masaariiftu ku waajibayso waxaa Caddayn ama Markhaanti laga rabaa Cidda Masaariifta Sheeganaysa .

Qodob.176^{aad} - Waalidka Masaariiftiisu ugu waajibtey Ilmihiisa waxaa u banaan inuu Idan la'aan kaga qaato Hantida Ilmihiisa.

**Madaxa 3aad : Cidda Mas'uulkaka ah(Weliga u ah) Dadka
Dhiman**

Qodob.177^{aad} - Ilimaha aan Qaan-gaarka ahayn ,Qofka Waalan iyo Doqonka aan wax Maamul ah garanayn, Waxaa iyaga iyo Hanti-doodaba Mas'uul ka ah Aabahood, Haddii la waayana Awowgooda Aabe , Haddii la waayana Qofkii ay Aabaha ama Awowgu Xilkooda kala dardaarmeen (وصي) , haddii Cid lagala dardaarmay aanay jirina, Dadkaas dhiman waxaa Mas'uuliyadooda qaadaya Qaadiga Maxkamadda, ama Ciddii isagu u magacaabo.

Qodob.178^{aad} -Qofka Weliga u ah ama Mas'uulka ka ah Dadka Dhiman Hantidooda, waxaa waajib ku ah Arrimahan:

b- Inuu Hantida Dadkaas dhiman u ilaaliyo , uguna shaqeeyo hadba sida Dantu ugu jidho , Hantidooda Ma-guurtada ah (عقار) Ma gadi karo haddii aanay u baahan Dadkaasi, ama Faa'iido badani ugu jirin , isla markaana Maxkamadda waa in Ogolaansho looga helaa Iibintaas.

t- Hantida Guurtada ah (منقول) wuxuu ugu gadi karaa Qofka Mas'uulka ahi Badeeco iyo Deyn hadba sida Dantu ugu jidho, hadduu Hantidaas ku bixinayo Deyn la ogaadey inay Faa'iido weyni ugu jidho waa inuu Markhaanti u yeelaa , haday suura-gal tahayna Rahaamad u qabtaa.

j- Qofka Mas'uulka ka ah Hantida Dadkaas dhiman wixii Sako ah oo ku waajibbey waa ka bixinayaa, iyagana wuxuu Masaariifta uga siinayaa si waafaqsan Curfiga meeshaas ka jira.

x- Qofka Mas'uulka ka ah Hantida Dadka dhiman Deeq uma bixin karo, mana sadaqayn karo , Haddii arimahaas dhacaana waxba ka ansiximayaan , wixii Hanti ah oo sidaas ku dhumana waxaa Mas'uul ka ah Ciddii bixisay.

kh- Uma banaana Qofka Weliga ah inuu Naftiisa, ama Xaaskiisa ,ama Xigtadiisa kale uga faa'iideeyo, ama Deyn u sii qaato Hantida Dadka dhiman oo uu Mas'uulka ka yahay ,sidoo kale uma banaana inuu Hantidaas Rahaamad ugu dhigo Deyn isaga lagu leeyahay Daraadeed.

d- Haddii ay Khatar gasho Hantida ay leeyihiin Dadka dhiman,ama Qofkii Mas'uulka ka ahaa si xun u maamulo ,ama la helo Sabab kale oo Gabood-fal ama Dayac loogu tiirin karo Qofkaas Mas'uulka ah , Maxkamadda waxaa u banaan inay Mas'uuliyadii ka qaado Qofkaas ama Qaybo kamid ah ka dhinto.

r- Qofkii aan Qaan-gaar ahayn Markuu Qaan-gaaro ,ama Qofkii Waalaa miyirsado ,markaas ka dib haduu Aabihiis ama Awowgiis ku soo eedeeyo inuu Hantidiisii ku iibiyey(wareejiyey) si aan Dani ugu jirin ,wax Markhaanti ah ama Cadayn kalana uusan Sheegashadiisa u haysan,Aabaha ama Awowga ayaa Dhaartooda loogu rumaynayaa Eedaasi inaanay jirin .

Qodob.179^{aad} -Ku wareejinta Hantida Qofkii qaan-gaarey ama miyirsadey :

b- Qofka Weliga u ah Dadka Dhiman oo Hantidooda hayey ,ama hadduu dhinto Warasadiisii, waxaa waajib ku ah inay ku wareejiyaan wixii Hanti ah oo ay Dadkaas u hayeen Markii Dadkaasi qaan-gaaraan, ama Miyir-koodii u soo noqdo isla markaana la hubiyo inay Dadkaasi Awood u leeyihiin inay Hantidooda Maamulan-karaan .

t-Marka Hantida ay ku wareejinayaan waa inay Markhaanti ugu yeelaan Maxkamadda horteeda .

j- Wixii Hantidaas ka dhuma, isla markaana Dhumitaankiisa ay Mas'uul ka yihiin Dadkii hayey ,waa inay u qaan-dhabaan Dadkii lahaa Qiimihii ay joogtey Hantidaasi markay dhuntay ,ama ay dhunsadeen.

Kitaabka Afraad : Dardaaranka .

Qaybta Koowaad : Tiirarka Dardaaranka , Shuruudihiisa, iyo Waxyaalaha Buriya .

Madaxa 1aad : Tiirarka Dardaaranka iyo Shuruudihiisa .

Qodob.180^{aad} - Dardaaranku waa Qofku inuu Maamul ku yeesho Hantidiisa Geeridiisa kadib , ama waa Sadaqo Geerida ka dambaysa.

b- Dardaarankan waa in la fuliyaa hadduu shareecada Islaamka waafaqo.

t- Qofka geeriyooday ugu horeyn hantidiisa oo isku dhan intaan la dhaxlin ka hor waxaa laga bixinayaa waxyaalaha waajibka ku ahaa in uu bixiyo sida, kharashka duugtiisa, sakadii iyo xajkii ku waajibay eek u baaqday iyo daymanka lagu leeyahay.

j- Qofka waxaa ku waajib ah in uu ku dardaarmo haddii ay jirto xuquuq laga cabsi laga qabo in ay lunto sida dayman lagu leeyahay iyo amaanooyin uu hayo oo aanay ogayn cid kale, waxaa kale oo waajib ah in qofka dardaarmayaa markhaati u yeelo dardaarankiisa.

Qodob.181^{aad} - Tiirarka Dardaaranku waa Afar :

b- Oraahda Dardaaranka .

t- Qofka Dardaarmaya .

j- Cida wax loo dardaarmayo .

x-Shayga la dardaarmayo.

Qodob.182^{aad} - Shuruudaha Oraahda Dardaaranka :

b- Dardaaranku wuxuu ku guntamayaa Oraah uu ku dhawaaqo Qofka Dardaarmayaa, Qoraal uu sameeyo ,iyo Tilmaanta Qofka aan hadli Karin .

t- waxaa reeban Qofku inuu dardaarmo Fal aan Shareecada ku banaanayn .

j- Dardaaranku waa ku ansaxayaa haddii lagu xiro Waqti ama Shardi aan Shareecada ka hor imaanayn.

Qodob.183^{aad} - Shuruudaha Dardaaranku ugu Sugnaanayo Cidda wax loo dardaarmayo :

b- Cidda wax loo dardaarmay haday tahay cid Gaar ah, waa inay tahay Cid wax yeelan kadha ,Dardaarankaasina wuxuu ku sugnaanayaa inay Ciddaasi Aqbasho Geerida Qofka dardaarmay ka dib .

t- Haddii jiho Guud wax loo dardaarmayna(Masjid, Dugsi Dad Sifo gaar ah leh) waxaa Dardaarankaasi u sugnaanayaa marka Qofka dardaarmay geeriyoodo.

j- Hadduu wax u dardaarmay Ilmo Uur ku jira wuxuu Dardaaranku u sugnaanayaa Markuu Ilmahaasi Nolol ku dhasho, Weli-giisuna Shayga loo dardaarmay u gudoomo.

x- Aqbalitaanka ama diidista Qofka wax loo dardaarmay waxay ansaxaysaa oo keliya Geerida Qofka dardaarmay ka dib.

Qodob.184^{aad} - Shuruudaha laga rabo Qofka Dardaarmaya :

b- waa inuu yahay Qof Qaan-gaar ah ,Miyir qaba , isla markaana aan la khasbin. Qofka Safiih-nimo lagu Xukumay (Xoolo-Mubadar) Dardaarankiisu waa ansaxayaa.

t- waa inaan lagu lahayn Deyn Hantidiisa le'eg ama ka badan .

Qodob.185^{aad} - Shuruudaha laga rabo Qofka wax loo dardaarmayo:

b- Waa inuu yahay Qof, Koox, ama Jiho la yaqaan.

t- Waa inuu jiraa marka Dardaaranku dhacayo ilmo uur ku jiraba ha ahaadee.

j- Waa inuusan Qofka Dardaarmaya Dhaxalkiisa waxba ku lahayn .

x- Waa inuusan Dardaaranka kadib Dilin ama Dilkiisa Sabab u noqon Qofka wax u dardaarmay .

kh- Waa inuusan wax u dardaarmin jiho aan Shareecada ku banaanayn.

Qodob.186^{aad} - Shayga la dardaarmayo waxaa shardi u ah Arrimahan :

b- waa inuu yahay Shay Qiimo lacageed leh , ama Manfaco Faa'iido leh .

t- waa inuu yahay Shay jira marka Dardaaranku dhacayo , isla markaana ku jira Milkiga Qofka dardaarmay Markuu dhimanayey.

j- Haddii ay jiraan Dad dhaxlaya Qofka dardaarmaya waa inuusan Dardaarankiisu ka badnayn 1/3(Sadex meelood oo meel Hantidiisa oo isku dhan) .

Qodob.187^{aad} - Tabarruc kasta oo Qofku bixiyo intuu ku jirey Jirraduu u dhintay waxaa lagu tirinayaa Dardaaran, waana inaysan isu geyntoodu ka badnayn Sadex-meelood oo Meel Hantidiisa. Haddii Qofku Dardaarmo Hantiyo ama Manaafic kala duwan isla markaana isu geyntoodu ka badato Sadex-meelood (1/3) Hantidii oo isku dhan ,Sadex- meeloodkii ayaa dardaaranadaas loogu kal-soorayaa; (Boqoley ayaa loogu qaybinayaa).

Madaxa 2aad : Waxyaalaha Dardaaranka buriya.

Qodob.188^{aad} - Dardaaranka waxaa buriya Arrimahan:

b- Shaygii la dardaarmay oo dhinta,ama Dhuma(telfa) Geerida Qofka dardaarmay ka hor.

t- Qofkii wax loo dardaarmay oo diida ama celiya Dardaarankii Geerida Qofkii dardaarmay ka dib.

j- Qofkii wax loo dardaarmay oo dhinta ka hor intuuusan dhiman Qofkii dardaarmay. ama inay isku mar wada dhintaan iyadoo aan la ogeyn Midkooda dambeeyey ama horreeyey.

x- Waxa la dardaarmay haday tahay Manfaco Muddo loo qabtay inuu dhamaado Waqtigii loo qabtay inuu ka faa'iideysto Qofkii loo dardaarmay intuuusan geeriyoon ka hor Qofkii dardaarmay, ama Qofkii Manfacada loo dardaarmay dhinto Mudadii Manfacada loo dardaarmay oo aan u bilaaban , Markaas ka dibna Manfacadii waxay u noqonaysaa Dadkii lahaa Dhaxalka Qofkii dardaarmay.

kh- Qofkii dardaarmay inuu Dardaarankii ka noqdo , ama shayguu dardaarmay inuu Milkigiisa si kale uga bixiyo ama Qaab Dhismeed-kiisii Bedelo.

d- Qofkii Dardaarmay oo Deyntii lagu lahaa le'ekaatay ama ka badatay Hantidiisii oo dhan.

Qaybta Labaad : Axkaamta Dardaaranka, iyo ka noqoshada Dardaaranka.

Madaxa laad : Axkaamta Dardaaranka.

Faraca I : Axkaamta Cidda wax loo dardaarmayo.

Qodob.189^{aad} - Qofka dardaarmaya Dhaxalkiisa Qof wax ku leh uma banaana inuu wax u dardaarmo.

Cid wax loo dardaarmo waxaa ugu mudan Qofka dardaarmaya Xigtadiisa aan dhaxlayn islamarkaana baahan, iyadoo loo kala hormarinayo sidatan: Tafiirtiisa aan dhaxlayn, Waaliddiintiisa aan dhaxlayn, Walaalihiisa aan dhaxlayn ,iyo Xigtadiisa kale siday u kala xigaan, una kala mudanyihiin.

Qodob.190^{aad} - Qofka waxaa ka reeban haddii ay jiraan dad dhaxlaya inuu Hantidiisa ka dardaarmo Sadex-meelood wax ka badan, hadaanay Dadkaas dhaxlayaa ogolaan Geeridiisa ka dib . Haddii aanay jirin Dad dhaxlaya; Hantidiisa oo dhan waa dardaarmi karaa .

Sadex-meeloodka waxaa laga bixinayaa hadba Hantidii Qofka Dardaarmay uu ka geeriyooday intii Gacanta lagu hayo , wixii Hantidaa ka maqan waagii Gacanta lagu dhigo ayaa Sadex-meeloodka laga bixinayaa.

Qodob.191^{aad} - Dardaaranka wixii Sadex-meelood ka badan, ogolaanshihiisa Geerida Qofka dardaarmay ka dib, waxaa xaq u leh Qof-kasta oo Dhaxalka wax ku leh Isagoo aan la khasbin, waana in lala sugaa Dadka aan dhamayn ilaa ay ka qaan-gaarayaan ama ka miyirsanayaan.

Qodob.192^{aad} - Cid aan la garanayn in wax loo dardaarmo ku ansiximayo, Gaar ahaan iyo Jiho ahaanba.

Qodob.193^{aad} - Ilmo Uur kujira in wax loo dardaarmaa waa ansaxaysaa , Dardaarankaas-na la fulin mayo ilaa la hubiyo Ilmahaasi inuu Nolol ku dhashay hadii Haweentaasi Nin leedahay Lix Biloow wax ka yar laga soo bilaabo waqtigii Dardaaranka, Ama Afar Sano wax ka yar haddii Haweentaas Uurka leh aanay Nin lahayn.

Waana in la hubiyaa Ilmahaas inuu Leeyahay Ninka Abtir-siinyihiisa loo tiirinayo.

Qodob. 194^{aad} - Dad Diintoodu kala duwantahay wixii Shareecada Islaamka aan ku reebanayn waa isu Dardaarmi karaan.

Faraca II : Axkaamta Hantida la dardaarmayo .

Qodob. 195^{aad} - Dardaaranka Shayga ama Manfacadiisa:

b- Qofku Hantidiisa Shay Gaar ah Cayntiisa waa ka dardaarmi karaa, Shayga Manfacadiisa laga Faa'iidayanayo oo Cayntiisu aysan ku jirina waa dardaarmi karaa.

t- Shayga laga Dardaarmayaana waa inuu yahay Mid la mulkiyi karo, isla markaana aqbali kara in laysu wareejiyo.

j- Haddii Qofku Dardaarmo Manfaco la isticmaalayo oo aan Waqti loo qaban (abadi), Manfacadaas waxaa mulkiyaya Qofka loo dardaarmay, Markuu Dhintana waa laga dhaxlayaa.

Qodob. 196^{aad} - Haddii Qofku Shay Manfacadiisa Abadi ahaan cid kale u dardaarmo , Shaygaas Cayntiisii oo aan Manfaco lahayn waxaa Dhaxlaya Warasadii Qofkii dardaarmay , waxayna Caynta Shaygaas ka iibin karaan oo keliya Cida Manfacadiisa loo dardaarmay.

Qodob. 197^{aad} - Qiimaynta Shayga Manfacadiisa La dardaarmay :

b- Shayga haddii Manfacadiisa si abadi ah Cid kale loogu dardaarmo Qiimaha Shaygaas oo dhamays tiran ayaa Sadex-meeloodkii lagu xisaabinayaa, Kharashka ama Canshuurta ku baxaysana waxaa qaba Qofkii loo dardaarmay.

t- Haddii Shayga Manfacadiisa Muddo go'an Cid kale loo dardaarmo, Mudadaas ayaa Manfacadaas la qiimaynayaa, Qiimahaas intuu noqdo ayaana Sadex-meeloodkii lagu xisaabinayaa.

j- Shayga Muddo go'an Manfacadiisa la dardaarmay Kharashkiisa iyo Canshuurtiisa, waxaa qaba Qofkii Milkiga Caynta dhaxlay.

x- Muddadii go'nayd haduu ka faa'iidayan waayo Qofkii loo dardaarmay isaga ayay ka dhuntay Mudadaasi.

kh- markay Mudadii dhamaatana Shaygaas Manfacadiisu waxay u soo noqonaysaa Ciddii Cayntiisa dhaxashay.

Qodob. 198^{aad} - Qofku hadduu dardaarmo Dheef, Miro, ama Tafiiir Neef Xayawaan ah ,waxaa lagu fulinayaa wixii Waqtiga Geerida jooga , hase yeeshee haduu dardaarmo wax jooga iyo waxa dhalan doonaba , ama wuxuu dardaarmay waxa dhalan doona oo keliya intaba codkiisa ayaa loo raacayaa.

Qodob. 199^{aad} - Haddii qofku dardaarmo in Hebel la siiyo waxa uu sheegto, ama Xisaabta Buugiisa laga helo inuu leeyahay, waxaa lagu fasirayaa Qiraal Hebelkaas uu u qirtay inuu Deyn ahaan Hantidaas ugu leeyahay, waa haddii Cadayn kale oo beeninayasa aan la helin, waxaana Deyntaas laga bixinayaa Hantidii uu ka tegey oo isku duuban, Haddii la helo Caddayn kale oo Qirashadaas beeninaysa waxaa lagu fasirayaa Dardaaran Hebelkaas la siinayo ,waxaana laga bixinayaa Sadex-meeloodkii Dardaarananka.

Faraca III : Dardaaranadii oo tiro bata.

Qodob.200^{aad} - Haddii Qofka dardaarmay Hal Shay laba Qof iyo wax kabadan isku mar u wada dardaarmo si siman ayaa loogu wada qaybinayaa, sidoo kale haddii Qof iyo Jiho Guud hal Shay u wada dardaarmo waa loo kala barayaa.

Qodob.201^{aad} - Qofku Hal Shay haduu Dad kala duwan marar kala duwan u wada dardaarmo , ama uu Cadeeyo Dadka hore iyo kuwa dambe inay wadaagaan si siman ayaa loogu wada qaybinayaa. Hase yeeshee hadduu cadeeyo inuu Dardaarankii hore ka laabtay ,ama Codkiisa ka laabasho laga dheehsado Cidda gadaal looga dardaarmay ayaa iska leh.

Qodob.202^{aad} - Haddii Dardaaranadii kala dambeeyey ka bataan Sadex-meeloodkii Hantiduu ka tegey Qofka dardaarmay , siday u kala horeeyaan ayaa loo fulinayaa ilaa Sadex-meeloodkii ka dhamays-tirmayo ,hadiise isku mar uu wada dardaarmay Hantiyo Sadex-meeloodkii ka badan si siman ayaa loogu

garsoorayaa,(Boqoley ayaa loogu qaybinayaa) wax Sadex-meeloodkii ka badanna Dardaarankii lagu bixinmayo.

Qodob.203^{aad} - Hadii Qofku Laba Sadex-meelood oo kala duwan midba Qof gaar ah u dardaarmo ,Hal sadex-meelood ayaa la wadaajinayaa.waa Hadduusan caddayn Sadex-meeloodka dambe inuu yahay isla kii hore ,Markaas waxay noqonaysaa inuu Dardaarankii hore ka laabtay , Qofka dambe keligiis ayaana wada yeelanaya.

Madaxa 2aad : ka laabashada Dardaaranka iyo Diidista ama Aqbalidda Dardaaranka Qofkii wax loo dardaarmay.

Qodob.204^{aad} - Qofka dardaarmay waxaa u banaan inta uu noolyahay markuu doono inuu ka laabto Dardaarankiisii , Oraah ahaan iyo Fal ahaanba , sida inuu Shayguu Dardaarmay si kale u maamusho , inuu iibiyo , Dumiyo ama Qaab-dhismeedkiisii guud bedelo , Hase yeeshee Magaca keliya oo la bedelaa Dardaaran ka-laabasho ma noqonayso.

Qodob.205^{aad} - Hadii Qofku Shayguu dardaarmay wax ka duwan oo aan laga sooci Karin ku daro waxaa loo qaadanayaa inuu dardaarankaas ka laabtay,haddiise wax lamid ah uu ku daro isagoo Qaab-dhismeedkiisii aan waxba ka bedelin Warasadii ayaa Qofkii Shaygaas loo dardaarmay kula wadaagaya hadba intii lagu daray.

Qodob.206^{aad} - Aqbalaada iyo Diidista Dardaaranka :

b - Qofkii wax loo dardaarmay, Geerida Qofkii dardaarmay ka dib, waxaa u banaan inuu Dardaarankii Diido ama aqbaloo,Qowl ahaan iyo Fal-ahaanba.

t-markuu Dardaaranka ogaado Geerida kadib Qofkii wax loo dardaarmay,isla markaana aanu iman markii Hantida la tiro-koobayey ama Warasada loo qaybinayey , Cid kalana aanu soo wakiilan , iyadoo Dadkii Dhaxalka lahaa arrintiisa Qaadiga gaarsiiyeen, isla markaana uu diido inuu Maxkamadda yimaado Muddo Sagaashan Maalmood gudahood ah , waxaa Maxkamaddu xukumaysaa Qofkaasi inuu Dardaarankii diidey.

j- Ilmaha aan qaan-gaarka ahayn, Midka Uur-ka ku jira, ama Qofka waalan oo wax loo dardaarmay waxaa u aqbalaya ama u diidaya Weligooda iyadoo Maslaxaddooda la ilaalinayo, Marka Weligoodu wixii loo dardaarmay Dadkaas diidayo, waa inuu ogolaansho ka helaa Qaadiga Maxkamadda.

Qodob.207^{aad} - Shayga la daardaarmay Geerida Qofka dardaarmay kadib ilaa Qofkii loo dardaarmay aqbalayo , ama diidayo, waa Shay aan dhinac-na u dhicin

(Mowquuf) .Kharashka ku baxayana waxaa lagu leeyahay Qofkii loo dardaarmay, Qofkii wax loo dardaarmay hadduu geeriyoodo ka hor intuuusan dardaarankii aqbalin ama diidin, waxaa Booskiisii gelaya Warasadiisa iyaga ayaana Dardaarankii aqbalaya ama diidaya.

Qodob.208^{aad} - Qofkii wax loo dardaarmay Dardaarankii Qayb kamid ah waa aqbali karaa, Qayb kamid ahna waa diidi karaa.

Qaybta Sadexaad : Qofka Xilka Dadka dhiman iyo Hantidoodaba loo dardaarmay (Wasiga) .

Madaxa laad:Qeexidda Wasaayada iyo shuruudaha laga rabo.

Qodob.209^{aad} - Qofka wasaayada la saaray (Wasiga) waa Qofka loo dardaarmay Mas'uuliyadda Hantida uu ka tegey Dardaarmuhu , si uu u fuliyo Dardaarankiisii , Deymi-hii lagu lahaa inuu bixiyo , kuwii ka maqnaana soo xereeyo, iyo inuu warasada aan dhamayn iyaga iyo Hantidoodaba Gacanta ku hayo .

Qofka Wasiga ah waxaa u banaan Haddii Qofka dardaarmay Idan u siiyey inuu Qof kale Wasaayadii loo dardaarmay sii saaro, kaasoo Maamulkii la wareegaya Geeridiisa ka dib.

Qodob.210^{aad} - Qofka Wasiga ah Mas'uuliyadda waa ka mudanyahay Qaadiga iyo Weligaba, haduu dhinto Qofkii Wasaayada la saaray isagoo aan Cid kale u dardaarmin waxaa Mas'uuliyaddii la wareegaya Aabbaha Warasada, Dabadeedna Qofkuu Aabuhu u dardaarmay , Dabadeedna Awowga. Dabadeedna Qofkuu u dardaarmay . intaas marka la waayo Wasaayadii waxaa la wareegaya Qaadiga . Haddii Awowgii Aabe ee Warasadu joogo isagoo gudan kara Xilkii Wasaayada Cid kale Wasaayadii lama saari karo.

Qodob.211^{aad} - Warasada aan Cidna loo dardaarmin , Cid Weli u ahna aanay jirin Qaadiga ayaa Cid Mas'uul ka noqota u magacaabaya , iyadoo la tixgelinayo **Qodob. (218).**

Qodob.212^{aad} - Hadduu geeriyoodo Qofkii Wasiga ahaa , isagoo Cid-na aan ku wareejin, ama Awooddii Maamulka(Tasarufka) laga qaado , sida inuu noqdo Qof dhiman, ama masalafo , Qaadiga ayaa wuxuu u Magacaabayaa Qof Mas'uuliyadaas qaada.

Sidoo kale hadduu Qofkii Wasiga ahaa Maqnaansho dheer maqnaado , ama Xabsi galo, lagana cabsado inay Dadkuu Mas'uulka ka ahaa dayacmaan. Waxaa

Qaadigu ugu magacaabayaa si ku meelgaar ah Qof Mas' uul ka noqda. iyadoo tixgelin la siinayo Qodob. (218).

Qodob.213^{aad} - Qofkii dhintay Hadaanu Cidna Wasaayo u magacaabin, iyadoo Warasadiisuna yihiin Dad wada qaan-gaar ah, isla markaana ay jiraan Deyman lagu leeyahay iyo Xuquuq ka maqan, Warasaduna ku heshiin waayaan cidii Mas' uuliyada qaadi lahayd ,Qaadiga ayaa Qof kamid ah Mas' uuliyadaas u magacaabaya.

Hadii Qof warasada ka mid ah Gacanta ku dhigo Hantidii Dhaxalka ahayd wax kamid ah keligiis gaar uma qaadan karo Saamigiisiiba ha noqdee. Hadii Hantidii qayb ka mid ah Qof Warasadii ka mid ah wax kale ku soo iibiyo intii kale waxay xaq u leeyihiin inay la wadaagaan ama Hantidoodii loo soo celiyo.

Qodob.214^{aad} - Qofkii geeriyooda isagoo Safar ku jira, Cidnana aan u dardaarmin Wasaayadiisa, Dadka Safarka Rafiiqa kula ah ayaa Mas' uul ka ah Duugistiisa iyo inay Hantidiisii Ilaaliyaan una gudbiyaan Dadkii Dhaxalkiisa lahaa.

Qodob.215^{aad} - Shuruudaha laga rabo Qofka Wasiga loo magacaabayoo iyo Qofka magacaabaya :

b-waa inuu yahay Qofka Wasiga loo magacaabayaa Qof Qaan-gaar ah,Miyir qaba, Aamin ah, isla markaana Dhaqankiisa iyo Maamulkiisuba hagaagsanyihiin, Awoodna u leh inuu Mas' uuliyadda Xilkaas guto.

t-Warasadu haday yihiin Dad Muslimiin ah Qof aan Muslim ahayn Wasaayadooda lama saari karo.

j-Haddii Shuruudahaas Hooyada Warasadu buuxiso iyadaa Wasaayada ugu mudan.

x- Qofka Wasaayada ku dardaarmayaa waa inuu yahay Qof Dhan, islamarkaana leh Talada uu ka dardaarmayo , Wasaayadu haday ku saabsantahay Dad dhiman waa inuu Qofka Wasaayadooda dardaarmayaa Walaayadooda leeyahay.

Qodob.216^{aad} - Haddii Maxkamadda lasoo gaarsiiyo Cabasho ku saabsan ku takri-fal Hantiyeed oo aan sax ahayn, loogana cabsi qabo inuu fuliyo Qofkii Wasiga ahaa , ama lagu ogaado Tilmaamo arintaas tusinaya , Qofkaasi ogolaansho Maxkamadeed la'aantiis Hantidii kuma maamuli karo.Hase yeeshee hadduu sugnaado Takri-falkaas khaldani waxaa buraya Wasaayadii, Maxkamadda ayaana Cid kale u magacaabayaa Mas' uuliyadaas.

Qodob.217^{aad} - Haddii Qaadigu ka ogaado Qofkii Wasiga ahaa wax Khatar gelinaya Maslaxadda Cidii uu Mas'uulka ka ahaa , ama uu ogaado markuu la xisaabtamay ka dib inuu Khayaamo sameeyey. Qaadigu waa inuu Qofkaas casilaa Cid kalana Mas'uuliyadaas u magacaabaa.

Qodob.218^{aad} - marka Maxkamaddu Cid kale u magacawdo Mas'uuliyaddii Wasaayada iyada ayaa Mas'uul ka ah Kormeeridda iyo Xisaabtanka Hantidii Dadka dhiman.

Madaxa 2aad : Xilka Qofka Wasiga ah, iyo Hawlkiisa (Ujradiisa).

Qodob.219^{aad} - Wasaayadu waxay ku sugnaanaysaa magacaabista Qofka dardaarmaya iyo ogolaanshaha Qofka Wasiga loo dardaarmay Geerida Qofkii dardaarmay ka dib, kaasoo laga helay Shuruudihii Wasiga looga baahnaa .

Qodob.220^{aad} - Qofka Dardaarmay hadaanu Wasaayada Maamul gaar ah ku xirin , waxaa soo hoos gelaya Mas'uuliyaadka Warasada iyo Hantidooda oo dhan. Hadiise Wasaayada lagu xiro Waqti Gaar ah, ama Maamul gaar ah ,ama Shay si gaar ah loo cayimay intaas ma dhaafi karo Qofka Wasaayada loo dardaarmay .

Qodob.221^{aad} - Haddii Qofku Dhawr Qof Wasaayada saaro Midna Mas'uuliyaadkii Wasaayada Gaar-ahaantiisa uguma Takri fali karo .marka laga reebo Duugista Qofka Dardaarmay , in la daboolo Baahida Ilmaha yar oo degdega ah, Amaanooyin-ka in la celiyo , Shaygii Dayac looga cabsi qabo in la gado, Deymankii la lahaa in la bixiyo ,iyo in lasoo uririyo wixii Hanti ah oo dhumay . Hase yeeshee haddii Qofkaasi Idan gaar ah ka haysto Qofkii dardaarmay wixii loo idmay Gaar ahaan waa u fulin karaa.

Qodob.222^{aad} - Hadii ay Maamulka ku heshiin waayaan Dadkii Wasaayada la saaray, midna gaar uguma takri fali karo, waxaana Maamulkii sii wadaya ilaa inta ay ka heshiinayaan Qaadiga Maxkamadda.

Qodob.223^{aad} - Haddii Qofkii Dardaarmay Shardi ka dhigo Laba Qof ama ka badan inay Maamulka u wada jiraan ,oo Markaas midkood dhinto ama midkood Maqnaansho dheer galo Qaadiga ayaa Booskii Midka dhintay Cid kale u magacaabaya , Midka maqnaada ilaa intuu ka imanayo Qaadiga ayaa Mas'uuliyadiisii sii wadaya .

Qodob.224^{aad} - Hadduu jiro Qof Wasaayada la saaray (Wasi), isla markaana loo xil-saaray Maamul la yaqaan ,Qof Dhaxalka wax ku lihi Talada Maamulkaas waxba kuma laha.

Qodob.225^{aad} - Haddii Qof iskiis Hantidiisa ugu sii bixiyo Deymankii Qof dhintay lagu lahaa, ama iskiis u fuliyo Dardaarankiisii iyadoo labada jeerba wax

idan ah aanu ka haysan Weligii ama Qofkii Wasaayada lahaa Hantidaa ka baxday Cidna uguma laaban karo. haddii Hantiduu wax ku fuliyey tahay tii Qofkii dardaarmay ka tegey Markaas waxaa loo baahanyhay si Maamulkaasi u fulo inuu Ogolaado Weligii ama Qofkii Wasaayada lahaa.

Qodob.226^{aad} - Hawlka ama Ujrada Wasiga :

b-Mas'uuliyadda Wasigu waa Hor-Allaah geysasho (Tabarruc) , wax Ujra ahna ma leh Qofkii leh Awood dhaqaale oo Baahidiisa dabooli kadha , hadaanu sidaas wax ka duwan caddayn Qofka dardaarmay .

t- Haddii Qofka Wasiga ahi yahay Qof baahan, isla markaana uu Ujro(Hawl) codsado waxaa u jaan-goynaya Qaadiga isagoo tix-gelinaya Ujrada Curfi ahaan Shaqadaas oo kale lagu bixiyo .

j - Ujrada waxay ka bilaabanaysaa Taariikhduu Ujarada codsaday Qofka Wasiga ahi .

Qodob.227^{aad} - Hantida Ujrada laga bixinayo :

b- Ujrada (Hawlka) Qofka Wasiga ah hadaanay ka badnayn Ujrada Shaqadaas oo kale lagu qabto waxaa laga bixinayaa Hantidii oo isku dhan .

t- Haddii Qofkii dardaarmay Ujradii ka siyaadiyo intii Curfiga ahayd inta Dheeraadka ah waxay geleysaa Dardaarankii Sadex - meeloodka .

j- haddii Wasaayadu gaar ku tahay Dadka Dhiman iyo Hantidooda waxaa Ujrada Wasaayada laga bixinayaa Hantidooda u gaar ka ah.

Qodob.228^{aad} - Wax kasta oo Kharash ah oo Qofka Wasaayada la saaray ku bixiyo Ilaalinta iyo Difaaca Hantida Dadka aan dhamayn waxaa laga bixinayaa Hantidooda. Hase yeeshee wixii Curfiga ka duwanaada ama ka bata Kharashka lagu bixiyo Hawshaas oo kale, waa in ogolaansho looga helaa Qaadiga.

Madaxa 3aad : Qofka Wasiga ah waxa u banaan, iyo waxaan u banaanayn.

Qodob.229^{aad} - Maamulka ka reeban Qofka Wasiga ah :

b-Qofka Wasiga ah uma banaana inuu sadaqeeyo, Waqfo, ama Maalsiin(عارية) u bixiyo wax kamid ah Hantida Dadka dhiman oo uu Mas'uulka ka yahay.

t- uma banaana inuu Hantidooda Deyn ku bixiyo ama isagu Deyn ahaan u qaato ,hadaanay jirin Faa'iido la habsaday oo Deyntaas laga helayo, isagoo isla

markaas Markhaanti u yeelaya Deyntaas , Rahaamad-na u qaadaya haday Suurto-gal tahay.

j- uma banaana Qofka Wasiga ah Hantida Ma-guurtada ah ee Dadka dhiman inuu kiraysto,ama ka kireeyo Xaaskiisa, ama Xigtadiisa uu Weliga u yahay , ama Qof uu Wakiil u yahay.

Qodob.230^{aad} - Qofka Wasiga ah Dadka dhiman Hantidooda wuxuu u maamulayaa hadba sida la hubo inay Dantu ugu jidho,ama lagama maarmaan u ah Dhaqaalaynta Hantida Gacanta uu ku hayo , wixii Maamul Hantiyeed ah oo intaas ka duwan waa in Maxkamadda ogolaansho looga helaa.

Qodob.231^{aad} - Hantida Dadka dhiman Qofka Wasiga ah wixii Sako ah oo ku waajiba waa ka bixinayaa ,Masaariiftoodana sida Caadada Meeshaas ka jidha ayuu uga siinayaa.

Qodob.232^{aad} - Haday jiraan Dad Masruufkoodu ku waajibey Dadka dhiman, oo Hantidooda Qofka Wasiga ah Gacanta ku hayo sida Aabahood oo kale ; Qaadiga Maxkamadda ayaa jaan-goynaya Dadkaas Masaariifooda Hantidaas laga bixinayo.

Qodob.233^{aad} - Qofka Wasiga ah ma kirayn karo Hantida Dadka dhiman Muddo ka badan Sadex sano , kumana kireyn karo Ujro kayar inta sida Caadiga ah Hantidaasoo kale lagu kireeyo.

Qodob.234^{aad} - Qofka Wasiga ah kama Tanaasuli karo Dacwooyinka Dadka dhimani Maxkamadda geeyeen, Xuquuqda ay Cid kale ku leeyihiina ma cafiyi karo , in Arrimahaas Maxkamaddu ogolaato mooyee, iyadoo isla markaas la hubinayo inay sidaas Dadka dhiman Dantoodu ku jidho.

Qodob.235^{aad} - Ilaalinta Hantida Dadka Dhiman :

b- Qofka Wasiga ah waxaa waajib ku ah inuu Hantida Dadka dhiman ku ilaaliyo Meel Aamin ah , kuna haboon inay ku nabad-galaan .

t- waxaa Wasiga u banaan kadib markuu Maxkamadda ogolaansho ka helo, Hantida wixii Masruufka Dadka Dhiman dheeraad ka ah inuu Damaanad ku dhigo Bangi Aamin ah isla markaana Ribo aan ku shaqaysan, isagoo Bangigaas kula heshiinaya Faa'iido Wadaag .

j- Hantidaas wax kamid ahna Bangiga lagama soo saari karo iyadoo Maxkamaddu aanay ogolaan isla markaana aan la xaqiijin in sidaas Dadka dhiman Dantoodu ku jidho.

Qodob.236^{aad} - hadii Qofka Wasiga ah , ama Qofka Qaadigu u qabtay Mas'uuliyadda Dadka Dhiman iyo Hantidooda iyo Dadka dhiman oo Hantidooda uu hayey isku Maan-dhaafaan inay Dani ugu jidhey iyo in kale Maamul-Hantiyeed oo uu ka sameeyey Arrimahan :

b- Iib lagula soo wareegey waxyaabo loo baahanyahay.

- Waxyaalaha Haday sii joogaan Dayacmaya oo la gado.

- waxyaalaha Qiimaha yar ee Hantida Guurtada ah oo la sii gado .

- Masaariifta sida Caadada ah loo bixiyo.

Arrimahaas oo dhan marka laysku qabto waxaa Dhaartiisa loogu aqbalayaa Qofka Wasiga ah ama Mas'uulka ah sheegashadiisa.

t- Wixii Maamul Hantiyeed ah oo intaas ka baxsan si Maxkamaddu u ogolaato fulintiisa, waa inuu u keenaa Qofka Wasiga ahi ama Mas'uulka ahi Caddayn Muujinaysa inay Dadka dhiman sidaas Dani ugu jidho.

Qodob.237^{aad} - Maamul kasta oo lagu fulinayo Hantida Ma-guurtada ah iyo Hantida Guurtada ah oo Qiimaha badan leh, Fulitaankiisa waxaa lagama maarmaan u ah Ogolaanshaha Maxkamadda, iyadoo mar walba la xeerinayo Danta Dadkaas dhiman.

Madaxa 4aad : Waxyaalaha waajibka ku ah Qofka Wasiga ah inuu Maxkamadda gaarsiyo.

Qodob.238^{aad} - waxaa waajib ku ah Qofka Wasiga ah, Qof kasta oo Qaan-gaar ah oo Warasada ka mid ah, iyo Cid walba oo kale Dadkaasoo Gacanta ku haya wax kamid ah Hantidii uu ka tegey Qofka dhintay, isla markaana ka tegey Dad Dhiman inay Maxkamadda sida ugu dhaqsaha badan u gaarsiyaan Tira-koobka Hantidaas si loogu diiwaan geliyo Buugga Maxkamadda isla markaana Mas'uuliyadeeda loogu wareejiyo Qofkii Wasiga ahaa oo Wasaayada la saaray. Maxkamadana waxaa waajib ku ah inay si deg-deg ah u aqbasho Diiwaan gelintaas iyo Xilwareejinta Hantidaas.

Qodob.239^{aad} - Haddii Ilmihii Uurka ku jirey isla markaana Dardaaranku khuseeyey Dhasho, waxaa Waajib ku ah Qofkii Wasiga ahaa, inuu Maxkamadda gaarsiyo Warbixinta Ilmahaas, Nolol iyo Geeri mid ka uu ku dhashay, sidoo kale waa inuu Maxkamadda ku war-geliyaa haddii Ilmihii la waayo Waqtigii

ugu dambayn ay suurto gal ahayd inuu dhasho iyadoo la tixraacayo Waqtiga Ilmuhu ku dhalan karo kuna xusan Sharcigaan Qodob.(145) .

Qodob.240^{aad} - Qofka Wasiga ah waxaa waajib ku ah Sanad kasta inuu Maxkamadda u soo gudbiyo Xisaab-Xir ku saabsan Maamulkiisii Hantida Dadka dhiman, Isagoo soo raacinaya wax kasta oo Dukumenti ah oo Maamulkaas Hantida caddayn u ah. Sidoo kale waxaa waajib ku ah Hantida wixii dheeraad ka ah Baahida Dadka dhiman iyo Wixii kale oo Maxkamaddu lagama maarmaan u aragto Xisaab-xirka ka dib inuu Amaano ahaan ku dhigo Magaca Qofka dhiman Bangi aan Ribo ku shaqayn. Qaadiga waxaa u banaan inuu Xisaab-xirka ka cafiyo Qofka Wasiga ah, hadaanay jirin Faa'iido dheeraad ka ah Baahida Joogtada ah ee Dadka dhiman .

Madaxa 5aad :Mag-dhawga Qofka Wasiga ah.

Qodob.241^{aad} - Qofka Wasiga ah waxaa waajib ku ah inuu Magdhaw ka bixiyo wixii Maamul xumo ah oo Hantida Gacantiisa ku jidha ku fuliyo ,Taasoo ay sugnaatay inay ahayd Khayaamo , Xad-gudub , Gabood-fal , ama inuu Hantidii ku bixiyo Meeshii Qofka dardaarmay u xadidey Meel aan ahayn .

Qodob.242^{aad} - Qofka Wasiga ah Hadduu Hantidii Dadka dhiman ku kireeyo Ujro ka yar inta Caadi ahaan Hantidaasoo kale lagu kireeyo, isla markaana uu heli karo Cid Kirada Caadiga ah bixinaysa ,wixii Ujradaas ka dhiman isaga ayaa Magdhawgeeda bixinaya.

Qodob.243^{aad} - Hadduu dhinto Qofkii Wasiga ahaa iyadoo aan la ogeyn Meesha ay jidho Hantiduu Gacanta ku hayey, Taasoo ay lahaayeen Dadka uu Mas'uulka ka ahaa , Hantidaasi waxay Deyn laga jarayo ku tahay wixii Hanti ah oo Wasigaasi ka tegey.

Madaxa 6aad : Dhamaadka Wasaayada .

Qodob.244^{aad} - Qofkii Wasiga ahaa Xilkiisii wuxuu ku dhamaanayaa Arrimahan:

b- Inuu geeriyoodo .

t- In Qaadigu casilo ,ama Isagu is casilo isagoo keensanaya Cudurdaar la aqbali karo, waa haddii aysan Gaar ahaantiisa Waajib ugu ahayn Xilka Wasaayadu .

j- In laga cabsado inay dhunto Hantiduu gacanta ku hayey .

x- Inuu dhinto Qofkii dhimmanaa oo isaga iyo Hantidiisa uu Mas'uulka ka ahaa .

kh- Inuu Qofkaas Mas'uulka laga ahaa qaan-gaaro ,ama hadduu ahaa Qof Waalan miyirsado iyagoo Labadooduba Naftooda iyo Hantidoodaba Si wanaagsan u maamuli kara.

Qodob.245^{aad} - Markay Dhamaato Mas'uuliyaddii Qofkii Wasiga ahaa waxaa waajib ku ah Arrimahan :

b- inuu soo gubbiyo Xisaab-xir ku saabsan Hantidii uu Gacanta ku hayey, isagoo soo raacinaya wax kasta oo Dukument ah oo Caddayn u ah Xisaab-xirkaas .

t- Sidoo kale waxaa waajib ku ah inuu ku wareejiyo wixii Hanti ah oo ay lahaayeen Dadkii Dhimanaa oo iyagoo is maamuli kara Qaan-gaarey ama haday waalaayeen Miyirsadey .

j- Hadduu geeriyoodo Qofkii Wasiga ahaa, Mas'uuliyadda soo gudbinta Xisaab-xirkaas iyo Hanti-wareejintaas waxay saaran tahay Warasadiisii.

x- Qofkii Wasiga ahaa ama hadduu dhintay Warasadiisii Midna Mas'uuliyaddii ka Beri-noqonmayo ilaa Xisaab-xirkaas kama dambaysta ah iyo Hanti wareejintaas Maxkamaddu Saxiixdo ama uu Saxiixo Qofkii Qaan gaarey oo Hantida lagu wareejinayey , iyadoo islamarkaas Hanti-wareejintaas Markhaanti loo samaynayo.

Kitaabka Shanaad : Dhaxalka.

Qaybta koowaad : Axkaam Guud .

Qodob.246^{aad} -Soo bandhigid ujeedada laga leeyahay weedhaha loo adeegsanayo Kitaabka Dhaxalka:

Weedha

Ujeeddada

- **Dhaxal** : waxaa loola jeedaa Hantidii iyo Xuquuqdii uu lahaa Qofka dhintay in loo wareejiyo Dadkii Dhaxalkiisa lahaa .

- **Qofka la dhaxlayo** : waa Qofkii geeriyooday ama Markii la waayey ka dib Geeridiisa la xukumay.

- **Qofka wax dhaxlaya** : waa Qofka wada mutaystay ama Qayb kamid ah mutaystay Hantidii uu lahaa ,ama Xuquuqdii u gaarka ahayd Qofka geeriyooday Dhalasho ama Guur ka dhexeeya Darteed.marka Dhaxalka laga hadlayo Qofka wax dhaxlaya waxaa lagu tilmaamaa Xigtanimada Meydka uu dhaxlayo la wadaago (Sida Marka la sheego Wiil: waa Midka Meydka dhalay , Aabe: waa Ninka meydka dhalay, Say: waa Ninka qabey Haweenta Dhimatay).

- **Say iyo Marwo** : waxaa loo kala adeegsan doonaa Marka Dhaxalka laga hadlayo Labadii Qof oo Guurku ka dhexeeyey ,hadba Midka nool.
- **Sabab** : Waa Arrinta marka la helo ay ka dhalanayso in Xukun sugnaado , marka la waayana Xukunkaas la waayayo.(Marka Dhaxalka laga hadlayo waxaa loo jeedaa Sababaha keena in Laba Qof is dhaxasho sida Dhalashada iyo Guurka)
- **Horjoogsade(مانع)** : Waa Arrin marka la helo ay ka dhalanayso in Xukun sugnaan lahaa la Waayo (Marka Dhaxalka laga hadlayo waxaa loo jeedaa Arrimaha Qofka ka horjoogsan kara inuu wax dhaxlo iyadoo la helay Sababihii uu wax ku dhaxli lahaa sida Dilka) .
- **Saami (الفرض)** : (Waxaa loo jeedaa Qaybta Go'an oo Shareecadu u qoondaysay Qofka wax dhaxlaya inuu Dhaxalka ku leeyahay.
- **Dheef (نصيب)** : Waa Qadarka Qofka Dhaxalka Wax ku lihi ka helo Hantidii la dhaxlay iyadoo loo eegayo Saamiguu Dhaxalka ku lahaa ama qaybtii Casabanimo uu ku helay.
- **Casabeeye (عاصب)**: Waa Qofka Saami Go'an aan ku lahayn Hantida la dhaxlayo, oo haddii Dad Saami Go'an leh jiraan Saamigooda ka dib Qaadanaya Wixii Hantidaa ka soo haray , hadii aanay jirin Dad Saami Go'an lehna Hantida oo dhan wada dhaxlaya. sida Wiilka Meydku Dhalay iyo Aabihis.
- **Naftiisa ku-Casabeeye (عاصب بنفسه)**: Waa Qof kasta oo Lab ah kaasoo Qof Dhedig ahi aanu u dhexayn Isaga iyo Qofka uu Dhaxlayo.isla Markaana Cid kale aan u baahnayn si uu Casabo u noqdo.sida Wiilka Meydku Dhalay iyo Aabihis.
- **ku-Casabeeye Cid kale (عاصب بغيره)** : Waa Gabar/Gabdho kasta oo marka ay keliyowdo/keliyoobaan Shareecadu Dhaxalka uga qoondaysay Saami Go'an ,Kuwaasoo marka ay helaan Wiil/Wiilal Walaal ah oo Meydka ula siman Casabo isu bedelaya Hantidiina ka qaadanaya Saamiga Wiilku helay Barkiis , sida Gabadha Meydku dhalay iyo Walaashiis.
- **La casabeeye Cid kale (عاصب مع غيره)**: waa Gabar/Gabdho kasta oo Meydka la Walaal ah oo haddii ay keliyoobaan Saami Go'an Dhaxalka ka qaadan lahaa, kuwaasoo Casabo isu bedelaya marka ay la jirsadaan Gabar/Gabdho Meydka ka farcamay oo wax dhaxlaya , kadib marka Faracaasi Saamigooda ay qaataan .
- **Ka xigsashada Dhaxalka (الحجب)** : Marka Dhaxalka la joogo waxaa loo jeedaa in Qof Sababtii uu wax ku dhaxlayey laga helay laga xigsado ama laga horjoogsado Casabayntiisii ama inuu dhaxlo Saamigiisii oo dhan ama Qayb Saamigaa ka mid ah.

- **Hanti isku ciriirin (العول)** : waxaa loola jeedaa in Dadkii Saamiyada Shareecadu Jaan-goysey Dhaxalka ku lahaa, Saamiyadoodii Bataan Taasina ay Sabab u noqoto inay Yaraato Dheeftii Qof walbaa Hantida ka heli lahaa.

- **Dib-ugu-celin (الرد)**: Waxaa loola jeedaa markii Dadka Saamiyada go'an lahaa Dhaxalkii ay ka qaataan Saamiyadoodii ,isla markaana la waayo Cid Casabo ah, in Hantida wixii soo haray dib loogu celiyo Dadkii Saamiyada go'an qaatay marka laga reebo Lamaanihii is qabey Mid-kooda jooga , iyadoo Hantida soo hadhay loogu qaybinayo Saamiyadoodii hore.

- **Qaraabo (ذو الأرحام)** : Waxaa loola jeedaa Qof kasta oo Xigto u ah Qofka dhintay kaasoo aan Casabanimo iyo Saami Go'an midna aan wax ku dhaxlayn .

- **Awow Wax dhaxlaya** : Waa Awoowaha Xagga Aabaha ka yimid oo isaga iyo Meydka Qof Dhedig aanay u dhaxayn.

- **Ayeeyo Wax dhaxlaysa** : Waa Ayeeyada iyada iyo Meydka ay u Dhexeeyaan Dhedig soocan, ama Aabe, ama ay u dhexeeyaan Awoowayaal soocan , ama ay udhexeeyaan Ayeeyooyin iyaga iyo Meydka ay u dhexeeyaan Lab soocani.

- **Labeeb** : Waa Qofka leh Xubintii Taranka ee Labka iyo tii Dhediga Labadaba, ama Midna aan lahayn ,Kaasoo weli aanay kala Cadaan Rag iyo Dumar Midka uu yahay.

- **Qof la waayey (المفقود)** : Waa Qofka maqan kaa soo aan la ogeyn Noloshiisa iyo Geeridiisa Midna.

- **Garac (ولد الزنا)** : Waa Ilmaha ku dhashay Gogol-dhaaf ula kac ah ama Guur la'aan.

- **Ilma Leecaantan (ولد اللعان)** : Waa Ilmaha ku dhasha Gogol Laba Lamaane oo is qaba ,Hase yeeshee Ninkii Diidey inuu Ilmahaas isagu dhalay, Qaadiga Maxkamaduna Leecaantan ka dib Xukumay inaan Ninkaasi Ilmahaa dhalin .

- **Dhufsana-yare (أصل المسألة)** : Waa tirada ugu yar ee ay suurto gal tahay inay kawada baxaan Saamiyada Go'an ee Dadka dhaxalka wax ku leh.

- **Saafi-yeelid (تصحيح المسألة)** : Waa in Dhufsana-yarihii Saamiyada ka dhismay ama Wadarta Saamiyaalkii is ciriiryey lagu dhufto Tirada ugu yar ee suurto gelin kadha Taran ay kawada bixi karaan Dhamaan Saamiyaalkii Qof kasta oo wax dhaxlayey iyadoo wax Jajab ahi (Tiro Hal kayar) aanay gelin, Tarantaas sidaas ku

soo baxda ayaana waxay Noqonaysaa Dhufsana-yaraha la saafi yeelay ee kamadambaysta ah.

Qodob.247^{aad} -Shuruudaha Dhaxalka :

b- Qofna Hantidiisa lama dhaxli karo ilaa la xaqiijiyo inuu geeriyooday, ama Qaadi Maxkamadeed xukumo Geeridiisa , ama hadduu kamid ahaa Ciidamada Qalabka sida in Wasaaradda G/dhiggu Geeridiisa Dekreeto ku soo saarto.

t- waa in la xaqiijiyaa Qofka wax dhaxlaya Noloshiisu inay ka dambayso Marka uu geeriyooday Qofka uu dhaxlayo; Xaqiiqa ahaan ama Xukun ahaanba(Ilmaha Uurka ku jira) .

Qodob.248^{aad} - Labada Lamaane oo is qabaa haddii Midkood dhinto kan kale wuxuu ku dhaxli karaa Saami go'an oo keliya ,hase yeeshee Dadka Dhalashadu ka dhaxeysaa waxay isku dhaxli karaan: Saami go'an ,Casaba-nimo, ama Labadaba , sidoo kale waxay isku dhaxli karaan Qaraabanimo hadba kii Sababtiisa la helo iyadoo mar walba la tixgelinayo Tiirarka Ka xigsashada Dhaxalka (الحجب), is ciriiriga Saamiyada (العول) , iyo dib ugu-celinta Saamileyda (الرد) .

Qodob.249^{aad} - Mar kasta oo Laba Qof oo Lab iyo Dhedig ah oo wax dhaxlaya , Casabo ahaan ugu Sinmaan Qofka dhintay oo Hantidiisa la dhaxlayo , Labku wuxuu Qaadanayaa Laba Qof oo Dhedig Saamigood.

Qodob.250^{aad} - Marka Qofku geeriyoodu Hantiduu ka tegey waxaa ku sugnaanaya Afar Arimood oo siday u kala horreeyaan loo fulinayo:

b- in laga bixiyo Kharashka ku baxaya Meydka Diyaar-garayntiisa iyo Duugitaankiisa.

t- in laga bixiyo wixii Deyn ah oo ay sugnaato in lagu leeyahay Qofka geeriyooday.

j- In Hantida laga fuliyo Dardaaranadiisii.

x- Hantida intaas ka dib wixii soo hara in loo qaybiyo Dadkii Dhaxalkiisa lahaa.

Qodob.250^{aad} - Qofkii Dil u geysta isagoo Qaan-gaar ah Miyir-na qaba Cid uu dhaxli lahaa, Dhaxalkiisa waxba ku yeelanmayo.

Qodob.251^{aad} - Laba Qof oo kala Diin duwani isma dhaxlaan.

Qodob.252^{aad} - Qofku Laba sababood oo kala duwan isku mar wax waa ku dhaxli karaa (sida Say isla markaana Ina-Adeer ah, Cid kalena aysan Casabo ahaan ka xigin Marwadiisii geeriyootey) .

Qodob.253^{aad}- Ninka Dhaxal ka-cararka ah kaasoo Xaaskiisii /Xaasaskiisii ku fura Furriin Dhamaaday (Sadex Dalqadood) Mudada uu ku dhex jiro Jirradii uu u dhintay ,Isagoo Furriinkaas Iskii u doortay, Xaaskaas /Xaasaskaasi Ninkaas way dhaxlayaan Hadduu Ninkaasi dhinto inta ay Ciddada ku jidho /ku jiraan ama Ciddada ka dib uu dhinto Iyadoo/Iyagoo aan wali la guursan .

Qaybta Labaad : Dadka wax dhaxlaya , iyo Dhaxalsiintooda .

Madaxa 1aad : kala hormarinta Jihooyinka wax dhaxla.

Qodob.254^{aad} - Dadka Sharcigaan Dhaxalka ku mutaysan kara waa Afar Jiho oo kala ah :

- 1- Dad Saami go'an wax ku dhaxlaya .
- 2- Dad Casabanimo wax ku dhaxlaya.
- 3-Dad Qaraabanimo (ذو الأرحام) wax ku dhaxlaya .
- 4- Khasnadda Dawladda .

Qodob.256^{aad} -Jihooyinkaas Afarta ah Dhaxalka waxay u kala Mudan yihiin, ama loo kala hormarinayaa sidatan:

I- Dad Saami go'an wax ku dhaxla kuwaasoo ah:

b- Gabdhaha Meydku dhalay iyo Kuwa Wiilashiisa ka sii Farcama, ,waa hadii aanay Gabdhahaa la jirin Wiilal Walaalhood ah oo la siman, ama Meydka ka xiga oo Casabo Geliya ama Dhaxalka ka xigsada .

t- Gabdhaha Walaalaha ah oo Meydka Labada Waalidba la wadaaga, ama Aabaha keliya la wadaaga,waa hadaanay la jirin Wiilal Walaalo-hood ah oo la siman.

j-Hooyada Meydka dhashay .

x- Ayeeyada Hooyo iyo Midda Aabe Duud-ba ha ahaatee , Ayeydaas oo aanu Meydka ka xigin Awow aan waxba dhaxlayn.

kh- Walaalaha Hooyada keliya Meydka la wadaaga ,Lab iyo Dhedig mid kasta oo ay yihiin.

d- Aabaha ama Awoowaha markay la jiraan Wiil ama Wiilal Meydka dhalay, ama Wiilal Meydkaas ka farcamay ay sii dhaleen.

r- Saygii iyo Marwadii is qabey hadba Midka nool.

II- Casabada Xaga dhalashada ka timid :

b- Xigtada Lab-ka ah kuwaasoo Casabaynta Dhaxalka u kala mudan siday u kala horeeyaan: Wiilka Meydka dhalay ,Wiilka Wiilkiisu sii dhalay Hoos-ba ha sii aadee, Aabaha, Awoowaha Aabe haba sareeyee,Walaalka Labada Waalid Meydka la wadaaga , Walaalka Aabe keliya la wadaaga,Wiilka uu dhalay Walaalka Meydka Labada Waalid la wadaaga Tafiir hooseba ha ahaadee , Wiilka uu dhalay Walaalka Meydka Aabe keliya la wadaaga Tafiir hooseba ha ahaadee, Adeer-ka Meydka Aabihiis ay Labada Waalid-ba wadaagaan, Adeeka Meydka Aabihiis ay Aabe keliya wadaagaan,Ina Adeerka Meydka Labadooda Aabe Labada Waalidba ay wadaagaan haba sii Durkee,Ina Adeer-ka Meydka Labdooda Aabe ,Aabe keliya wadaagaan haba sii Durkee....

t- Casabada Labka ah ayna suurto-gal tahay inay Meydka u wada sinaadaan kuwaasoo ah Wiilasha Meydka dhalay ama kuwa Wiilashiisu sii dhaleen, Walaalaha Labada Waalid Meydka la wadaaga ama Aabe keliya la wadaaga, Dadkaas haday la jiraan Gabdho walaalahood ah oo Meydka ula siman way Casabo gelinayaan waxayna kula dhaxlayaan Ku-Casabeeye Cid- kale .

III- Qaraabo : Marka Jihooyinka lagu soo sheegay Tirada(I&II) loo waayo Qofkii dhintay oo Hantida ka tegey, waxaa Hantidii dhaxlaya Qaraabadiisa kuwaasoo ah Xigtadiisa aan Casabanimo iyo Saami go'an mid-na wax ku dhaxlayn.

IV-Khasnadda Dawladda : marka la waayo Dadka lagu soo sheegay Tirada.(I,II&III) waxaa Hantidii Qofka dhintay la Dhigayaa Khasnadda Dawladda Si Dadka Muslimiinta ah Danahooda Guud loogu Fuliyo.

Madaxa 2aad : Saamiyada go'an iyo Dadka wax ku dhaxla.

Qodob.255^{aad} - Saamiyaal-ka Go'an oo Allaah Qur'aanka ku sheegay waa Lix Kuwaasoo kala ah :

b-kala-Bar ($\frac{1}{2}$): waxaana loo jeedaa Qofku inuu dhaxlo Hantidii Meydku ka tegey Nuskeed.

t-Waax($\frac{1}{4}$) : waxaa loo jeedaa Qofku inuu dhaxlo Hantida Afar-meelood oo Meel.

j-Falar ($\frac{1}{8}$): waxaa loo jeedaa Qofku inuu dhaxlo Hantida Sideed-meelood oo Meel.

x-Laba-dalool ($\frac{2}{3}$): waxaa loo jeedaa Qofku inuu dhaxlo Hantida Markii Sadex-meelood loo qaybiyo Laba-meelood oo ka mid ah.

kh-Hal-Dalool ($\frac{1}{3}$): waxaa loo jeedaa Qofku inuu dhaxlo Hantida markii Sadex-meelood loo qaybiyo Meel kamid ah.

d- Nus-Dalool ($\frac{1}{6}$) : waxaa loo jeedaa Qofku inuu dhaxlo Hantida oo Lix-meelood loo qaybiyey Meel ka mid ah.

Qodob.256^{aad} -Kala-bar ($\frac{1}{2}$) waxaa wax ku dhaxla shan Qolo oo kala ah:

b- Say ; haddii Marwada dhimatay aanay ka tegin wax Tafiir ah oo dhaxlaya.

t- Hal Gabar oo Meydku dhalay ; hadaanu jirin Hal Wiil ama ka badan oo Meydku dhalay.

j- Gabar keliya oo Meydka Wiilkiisu dhalay ; hadaan la xijaabin ama aanay helin Hal Wiil ama ka badan oo la Walaal ah ama Ina Adeer ah kaasoo Meydka ula siman.

x-Walaasha keligeed ah taasoo Labada Waalid-ba Meydka la wadaagta ; Hadaan la Xijaabin, ama aanay helin hal Wiil ama ka badan oo Walaalkeed/Walaalaheed ah oo Meydka ula siman.

kh- Walaasha keligeed ah taasoo Aabaha keliya Meydka la wadaagta ; Hadaan la Xijaabin, ama aan la helin hal Wiil ama ka badan oo Walaalkeed/Walaalaheed ah oo Meydka ula siman.

Qodob.257^{aad} – Waax ($\frac{1}{4}$) : waxaa wax ku dhaxla Laba Qolo oo kala ah:

b- Say : waa haday jiraan wax Tafiir ah oo Marwadiisii dhimatay dhaxlaya.

t- Hal Marwo iyo ka badan; waa Hadaanay jirin wax Tafiir ah oo Saygeedii/Saygoo-dii dhintay dhaxlaya.

Qodob.258^{aad} - Falar(1/8) : waxaa wax ku dhaxla Hal Qolo oo kelya kuwaasoo ah Hal Marwo iyo ka badan Markii Saygee-dii/Saygoo-dii ka tago Tafiir dhaxlaysa.

Qodob.259^{aad} - Laba Dalool(2/3) waxaa wax ku dhaxla Afar Qolo oo kala ah:

b- Laba Gabdhood iyo wax ka badan oo Meydka dhalay ; hadaanu jirin Hal Wiil ama ka badan oo la Walaal ah .

t- Laba Gabdhood iyo wax ka badan oo Meydka Wiilkiisu dhalay ; hadaan la xijaabin ama aanay helin Hal Wiil, ama ka badan oo la Walaal ah, ama Ina Adeer ah kaasoo Meydka ula siman.

j- Laba Gabdhood iyo wax ka badan oo ah Walaalo ,Labada Waalid-ba Meydka la wadaaga ; Hadaan la Xijaabin, ama aanay helin hal Wiil ama ka badan oo Walaalkood/Walaalahood ah oo Meydka ula siman.

x- Laba Gabdhood iyo wax ka badan oo Walaalo ah ku waasoo Aabaha keliya Meydka la wadaagta ;Hadaan la Xijaabin, ama aanay helin hal Wiil ama ka badan oo Walaalkood/Walaalahood ah oo Meydka ula siman.

Qodob.260^{aad} -Hal Dalool(1/3) waxaa wax ku dhaxla laba Qolo oo kala ah:

b- Hooyo; haddii Meydka aanu ka tegin Wax Tafiir ah oo dhaxlaya ama Walaalo Labo gaara, Dhinac kasta oo Meydka Walaalahaasi uga yimaadaan.

j- Labo iyo Wax kabadan oo Walaalo Hooyo la ah Meydka , Lab iyo Dhedig midkay doonaan-ba ha ahaadeene,waa haddii aanay jirin Wax Tafiir ah ama Waalid Lab ah oo Meydka dhaxlaya .

Qodob.261^{aad} -Nus-Dalool (1/6) waxaa wax ku dhaxla Todoba Qolo oo kala ah:

b- Aabe : waa haddii Meydka ka tago Tafiir Lab ah oo wax dhaxlaya.

t-Awoowe Wax dhaxlaya : waa haddii Meydka ka tago Tafiir lab ah isla markaana aanu jirin Aabe Xijaaba .

j- Hooyo : waa haddii Meydka ka tago Wax Tafiir ah oo dhaxlaya , ama Walaalo Labo gaara, Dhinac kasta oo Meydka ay uga yimaadaan.

x- Hal Gabar ama ka badan oo Meydka Wiilkiisu dhalay Marka ay la jidho/la jiraan Hal Gabar keliya oo Meydka dhalay , si ay Labadii Dalool isugu

dhamaystirtaan .waa haddii aan la Xijaabin ama aan la helin Wiil la walaal ah ama Ina Adeer ah oo la siman oo Casabo geliya.

kh- Walaasha keliya ama ka badan oo Meydka Aabe keliya la wadaagta/ wadaaga, marka ay la jidho Hal Gabar ah oo Walaal Meydka Labada Waalid-ba la wadaagta ah si ay isugu dhamays-tirtaan Labadii Dalool. Waa haddii aan la helin Wiil la walaal ah oo Meydka ula siman oo Casabo geliya.

d-Hal Qof oo Walaal Hooyo ah Lab iyo Dhedig kuu doono ha ahaadee ; waa marka aanay jirin Wax Tafir ah ama Waalid Lab ah oo Meydka dhaxlaya.

r- Hal Ayeeyo ama ka badan ; haddii aan la xijaabin.

Madaxa 3^{aad} : Dadka Casabanimada wax ku dhaxla iyo Is-Casabaynta.

Qodob.262^{aad} - Is-Casabaynta Xaga Dhalashadu waxay ku timaadaa Sadex Nooc:

- 1- Naftiisa ku-casabeeye (العاصب بنفسه) .
- 2- ku- casabeeye Cid kale (العاصب بغيره).
- 3- La-casabeeye Cidkale (العاصب مع غيره) .

Qodob.263^{aad} - Ku-casabeeye Naftiisa oo dhamaantood wada Lab ah : waa Dadka haddii ay Keligood Meydka dhaxlayaan Hantidii oo dhan wada qaadanaya , Haddii ay la jiraan Dad Saami go'an wax ku dhaxlayana ,markii Saamiyadooda Dadkaasi qaataan Hantida soo hadha wada qaadanaya. haddii ku-Casabeeyaha Naftiisu Hal Qof yahay Hantidii oo dhan ama intii Saamiyada ka soo hadhay keligiis ayaa qaadanaya ,hadiise ay yihiin Dad badan Sida Wiilasha Meydka dhalay ama Walaalihiis dhaxalka si siman ayaa tiradooda loogu qaybinayaa . Waxayna Dadkaasi ka yimaadaan Afar jiho kuwaasoo Dhaxalka loogu kala homarinayo isuna xijaabaya siday Meydka u kala xigaan ,waxayna u kala mudanyihiin sidatan ay u soo kala horeeyaan :

b- Wiilka Meydka dhalay ,Dabadeed-na Wiilkiisa Wiilkuu sii dhalay ilaa inta Tafiirtaasi ka farcamayaan Lab soocan .

t-Aabaha Dabadeed-na Awowga wax dhaxlaya Duud-ba ha ahaadee.

j- Walaalaha Labka ah oo Meydka Labada Waalid-ba la wadaaga,Dabadeed-na kuwa Aabaha keliya la wadaaga, Dabadeed-na Wiilasha Walaalaha Labada Waalid-ba Meydka la wadaagaa ay dhaleen , Dabadeed-na kuwa Aabaha keliya la wadaagaa ay dhaleen Tafir hooseba ha ahaadeene.

x- Adeer-ka Aabaha Meydka Labada Waalidba la wadaaga, Dabadeed-na Midka Aabaha Meydka Aabe keliya la wadaaga, Dabadeed-na Ina-Adeerka Isaga iyo Meydka Labadooda Aabe Labada Waalidba ay wadaagaan, dabadeed-na Midka Labadooda Aabe , Aabe keliya ay wadaagaan, haba sii fogaadeene.

Qodob.264^{aad} - Ku-Casabeeye Cid kale : Dhamaan-tood waa Dhedig ay la jiraan Walaalo Lab ah oo la siman, kuwaasoo Gabdhahaa Casabo ka dhigaya, waxayna Hantidii Dhaxalka ku qaybsanayaan Wiilkiiba inuu qaato Laba Gabdhood Saamigood oo kale, hadii Walaalahaas Labka ahi aanay jiri lahayn Waxay Gabdhahaasi wax ku dhaxli lahaayeen Saami go'an, waxayna kala yihiin Sidatan:

b- Gabdhihii Meydku dhalay oo la jira Wiilal uu dhalay.

t- Gabdhihii Meydka Wiilkiisu dhalay ,Hoos-ba ha u degeene, oo ay la jiraan Wiilal Meydka Wiilkiisu dhalay oo la siman ama ka hooseeya iyadoo Gabdhahaasi Saami go'an aanay waxba ku dhaxlin.

j- Walaalaha Gabdhaha ah oo Meydka Labada Waalid la wadaaga, oo la jira Walaalo Lab ah oo la siman, iyo Walaalaha Gabdhaha ah oo Meydka Aabe keliya la wadaaga,iyadoo ay la jiraan Walaalo Lab ah oo la siman.

Qodob.265^{aad} -La-Casabeeye Cid kale : waxay ku koobanyihiin Gabdha soocan oo Meydka Labada Waalid la wadaaga ama Aabe keliya la wadaaga kuwaas oo ay la jiraan Gabdho soocan oo Meydku dhalay ama kuwo Wiilkiisu sii dhalay ,Markaas Gabdhahaas Meydka la Walaal ahi waxay wax ku dhaxlayaan Casabo ahaan oo Saamigii Go'naa waxba ku qaadanmayaan ,waxayna qaadayaan Hantida wixii ka soo hara Marka Gabdhaha Meydka ka farcamay Saamigooda Go'an qaataan. Gabdhahaas Walaalaha ah Kuwa Meydka Labada Waalid la wadaaga ayaa Dhaxalka ka mudan kuwa Aabaha keliya la wadaaga, sidii Wiilasha Walaalaha ah oo kale.

Madaxa 4aad : Dhaxalka Markii Warasadu ku koobantahay Aabe Hooyo , iyo Sayga ama Marwada hadba midka jooga.

Qodob.266^{aad} - Haddii Meydku aanu ka tegin wax Tafiir ah oo dhaxlaya , ama Walaalo Labo gaara Dhinac kasta oo ay ka yimaadaan , Islamarkaana Meydka ay Dhaxlayaan Labadiisii Waalid, iyo Saygii ama Marwadii Hadba midka noo Hooyadu Markaas waxay dhaxlaysaa Saamiga Lamaanaha jooga ka dib Hantinta soo hadha Dalool(1/3) ka mid ah , Labada Dalool oo soo harana Aabaha ayaa dhaxlaya .

Madaxa 5aad: Dhaxalka Aabaha iyo Awowga wax dhaxlaya.

Qodob.267^{aad} - Haday Dhaxalkii isugu yimaadaan Aabe ama Awoowe iyo Gabar/Gabdho soocan oo Meydku dhalay ama Gabar/Gabdho Wiilkiisu Dhalay oo Dhaxlaya, Aabihii ama Awowgii Hadba kii joogaa wuxuu Saami ahaan ku qaadanayaa Nus-Dalool (النسب) Hantida oo isku dhan, Markaas kadib-na Saamiyada Go'an Marka la qaato Hantida haday wax soo haraan Waxaa Aabihii ama Awowgii ku qaadanayaa Casabanimo.

Qodob.268^{aad} -Haday Dhaxalka isugu yimaadaan Aabe ama Awoowe iyo Wiil/Wiilal Meydku dhalay Ama Wiil/Wiilal Wiilkiisu sii dhalay, Aabaha ama Awoowaha hadba kii joogaa wuxuu wax ku dhaxlayaa Nus-Dalool(النسب) Keliya , Saamiyada ka dib Hantida wixii soo hara waxaa Casabanimo ku qaadanaya Wiilka / Wiilasha Meydku dhalay ama kuwuu Awowga u yahay haday iyagu Dhaxalka yeeshaan.

Qodob.269^{aad} - Haddii Meydku aanu ka tegin wax Tafiiir ah oo dhaxlaya, Aabaha iyo Awowga Hadba kii jooga ayaa Hantidii oo dhan Casabanimo ku dhaxlaya Hadaanay wax Saamiyaal ahi jirin ,Haday jiraana Saamiyada ka dib wixii soo hara ayay Casabanimo ku qaadanayaan.

Madaxa 6aad : Dhaxalaka Awowga iyo Walaalaha:

Qodob.270^{aad} - Haddii Awowga Aabaha iyo Walaalaha meydku Dhaxal isugu yimaadaan waxaa Hantida loogu qaybinayaa sidatan:

b- Marka Aabihii aanu jirin Haddii Awow-gii wax dhaxlayey , iyo Meydka Walaalihii oo Lab iyo Dhedig-ba leh ama mid kamid ah u soocan Dhaxalkii isugu yimaadaan, Awowgaasi Walaalihii ma xijaabay Hantidiina way wada dhaxlayaan .

t- Marka Awowgii iyo Walaalihii Dhaxalka isugu yimaadaan hadii aanay jirin Warasa kale oo Saami go'an Dhaxalkaas ku leh, Awowgu wuxuu Dhaxalkaas ka Qaadanayaa hadba Laba Arimood midka u Dheef badan ; inuu Hantida oo isku dhan Sadex-meelood oo Meel(الثالث) ka qaato inta soo hadhayna Walaalihii qaybsadaan, iyo Inuu Walaalahaas Wiil ahaan Madax-ka-kow Dhaxalka ula qaybsado (المقاسمة) .

j-Marka Awowga iyo Walaalihii Dhaxalka isugu yimaadaan haday jiraan Waraso Saami go'an Dhaxalkaas ku leh waxaa Awowgu kala dooranayaa Sadex arimood mida u Dheef badan ; inuu Hantidoo isku dhan ka qaato Dalool barkiis (النسب) (Lix-meelood oo meel) , ama Hantida inta soo hadha Saamiyada go'an ka dib

inuu Dalool(Sadex-meelood oo meel) ka qaato, iyo inuu Saamiyada ka dib Hantida soo hadha Walaalaha Wiil ahaan ula qaybsado.

x- Haday Awowga la jiraan Walaalo Qayb kamid ahi Meydka Labada Waalid-ba la wadaagaan qayb-na Aabe keliya la wadaagaan, Marka Awowgu Walaalaha Wiil ahaan Dhaxalka ula qaydsanayo Dhamaantood waa loo wada tirinayaa Awowga, Markii Awowgu ka baxo kadib Hantida inta soo hadha Haddii Walaalaha Meydka Labada Waalid la wadaagey ku jiraan wax Lab ahi Hantida soo hadha iyaga keliya ayaa qaybsanaya oo Walaalihii Aabuhu waxba qaadan-mayaan, Haddii Walaalaha Meydka Labada Waalid la wadaagaa yihiin Gabdho soocan Hal mid haday tahay Hantida soo hadhay Marka loo eego Hantidii oo isku dhan ilaa kalabar iyo wixii ka yar iyada keliya ayaa qaadanaysa, markaas ka dib haday wax soo haraan Walaalihii Aabaha ayaa qaadanaya, Haddii Gabdhahaas walaalaha ahi Labo iyo wax ka badan yihiina Hantidii oo isku dhan marka loo eego ilaa Laba Dalool iyo wixii ka yar iyaga ayaa qaadanaya, Markaasna Walaalihii Aabaha waxba u soo harimayaan.

kh- Haday Awowgii iyo Walaalo Gabdha soocan ahi Dhaxalkii isugu yimaadaan Marna Gabdhahaasi Saami go'an wax ku dhaxlimayaan, Marka laga soo reebo Hal mas'alo keliya taasoo ah Markay dhimato Marwo aan wax Tafiir ah ka tegin Dhaxalkeediina isugu yimaadaan: Saygeedii, Hooyadeed, Awoowe iyo Hal Gabar oo Walaasheed ah oo keliya oo Labada Waalid-ba la wadaagta ama Aabe keliya la wadaagta, Dabadeed-na Sayga iyo Hooyadu markay Saamiyadooda qaataan ,waxaa mar kale dib laysugu celinayaa Barkii Gabadha Walaasha ah iyo Nus- Daloolkii(1/6) Awowga waxayna mar kale Labadoodu u qaybsanayaan sidii Wiil iyo Gabar Walaala ah.

Qaybta Sadexaad : Ka-Xigsashada Dhaxalka (الحجب)

Qodob.271^{aad} - Ka-Xigsashada ama is Xijaabka Dhaxalku : waa in Qofkii laga helay Sababtii uu wax ku dhaxli lahaa Qof kale Jiritaankiisa dartiis Dhaxal-kii oo dhan laga hor-joogsado, ama Saamigiisii Badnaa laga hor-joogasado oo mid ka yar uu helo.

Ka-Xigsashada Dhaxalku waxay ku timaadaa laba Nooc oo kala ah :

b- Ka-X igsasho Dhiman .

t- Ka-X igsasho Buuxa .

Qodob.272^{aad} - Ka-X igsasho Dhiman waxaa loola jeedaa : in Qofka laga hor-joogsado Dheeftii Badnayd oo uu Dhaxalka ka heli lahaa Isla markaana uu helo Mid ka yar. Ka-Xigsashadaasina waxay Saameysaa Shan Qolo oo kamid ah Dadka Saamiyada go'an wax ku Dhaxla waxayna kala yihiin:

b- Sayga : Markay joogaan Tafiir Wax dhaxlaysa Waxaa laga xigsanayaa inuu Kala-bar(1/2) wax ku dhaxlo wuxuuna wax ku dhaxlaa Waax(1/4).

t- Marwada / Marwooyin : Markay joogaan Tafiir Wax dhaxlaysa waxaa laga xigsanayaa inay Waax(1/4) wax ku dhaxasho/dhaxlaan waxayna wax ku dhaxlaan Falar(1/8).

j- Hooyada : Markay joogaan Tafiir Wax dhaxlaysa ama Walaalo hal ka badan dhinac kasta oo ay ka yimaadaan, xataa haddii aanay Walaalahaasi wax-ba dhaxlayn, Waxaa laga xigsanayaa Hooyadaas inay Dalool (1/3)wax ku dhaxasho, waxayna dhaxlaysaa Nus-Dalool (1/6) .

Sidoo kale haduu Joogo Saygii ama Marwadii Midkood Dadka kale oo wax dhaxlayaana ku koobnaadaan Hooyada iyo Aabaha; Hooyadii waxaa laga Xigsanayaa inay Daloolka Hantida oo dhan dhaxasho, waxayna dhaxlaysaa Saamiga Sayga ama Marwada marka laga saaro kadib Daloolka Hantida soo hadha, inta kalena waxaa dhaxlaya Aabaha .

x- Gabadha / Gadhaha Meydka Wiilkiisu dhalay : Haday Joogto Hal Gabar oo Meydka dhalay waxay ka hor-joogsataa Haday Gabar keliya tahay kuwa Meydka Wiilkiisu dhalay inay Kala-bar wax ku dhaxasho ,Haday Mid ka badanyihiina inay Laba Dalool wax ku dhaxlaan ,waxayna mar walba wax ku dhaxlaan Nus-Dalool (1/6).

kh- Gabadha / Gabdhaha Meydka la Walaal ah oo Aabe keliya la wadaaga : Haday Joogto Hal Gabar oo Meydka Labada Waalid-ba la wadaagta; waxay ka hor-joogsanaysaa Haday Walaasha Aabe Hal Gabar ah tahay inay Kala-bar wax ku dhaxasho ,haday ka badanyihiina inay Laba-Dalool wax ku dhaxlaan.waxayna Gabdhahaa Meydka Aabe keliya la wadaagaa mar walba dhaxlayaan Nus-Dalool.

Qodob.273^{aad} – Ka-xigsashada Buuxda ama dhamays-tiran waxaa loo jeedaa Qof laga helay Sababtii uu wax ku dhaxli lahaa in Dhaxal-kii oo dhan laga hor-joogsado Qof kale jiritaankiisa Dartiis. Ka-xigsashadaas Buuxda Dadka Dhaxalka wax ku yeelan kara oo dhan waa saamayn kadhaa Marka laga reebo Lix Qof kuwaasoo ah: Labada Waalid, Sayga iyo Marwada Hadba kii jooga , iyo Wiilka iyo Gabadha Meydka dhalay.

Dadka Ka-xigsashada Buuxda - ee Dhaxalku saameysaa waa Toban iyo Kow Qolo waxayna kala yihiin :

b-Dhammaan Tafiirta Meydka Wiilkiisa/Wiilashiisa ka farcama waxaa Dhaxalkii ka xigsanaya Wiilkii/Wiilasha Meydka dhalay. Sidoo kale Wiilba Wiilka uu Meydka ka xigo (ka sareeyo) Dhaxalkii waa ka xigsanayaa midka ka shihseeya(Hooseeya).

t-Awowga wax dhaxlaya iyo wixii ka sareeya Dhamaan waxaa Dhaxalka ka xigsanaya Aabaha , sidoo kale Awowba Midba Midkuu ka sokeeyo kan ka shisheeya Dhaxalkii wuu ka xigsanayaa, Dhamaan Ayeeyooyinka Xaga Aabaha ka yimaada Waxaa Dhaxalkii ka xigsanaya Aabaha iyo Awowga wax dhaxlaya oo Ayeydaas ka sokeeya.

j-Ayeeyo Dhinac kasta oo ay ka timaado waxaa Dhaxalkii ka xigsanaya Hooyo.

x- Walaalaha Meydka Labada Waalid la wadaaga waxaa Dhaxalkii ka xigsanaya: Wiil Meydku dhalay ama Wiilkiisu sii dhalay Hoos-ba ha sii aadee iyo Aabihii Meydka.

kh-Walaalaha Meydka Aabaha keliya la wadaaga waxaa Dhaxalkii ka xigsanaya: Wiil Meydku dhalay ama Wiilkiisu sii dhalay Hoosba ha sii aadee , Aabihii Meydka, Walaalaha Meydka Labada Waalid la wadaaga , iyo Gabadha Walaasha/Walaalaha ah oo Meydka Aabe iyo Hooyo la wadaaga markay la jiraan Gabar/Gabadho Meydku dhalay ama Wiilkiisu sii dhalay (La-Casabeeye Cid-kale).

d-Walaalka /Walaalaha Hooyo keliya Meydka la wadaaga waxaa Dhaxalkii ka xigsanaya Tafiir Kasta oo wax dhaxlaysa , iyo Aabe ama Awoowe wax dhaxlaya.

r-Wiilka /Wiilasha Meydka Walaalkiis Labada Waalid-ba ay wadaagaan uu Dhalay waxaa Dhaxalkii ka hor-joogsanaya: Wiil Meydku dhalay ama Wiilkiisu sii dhalay Hoos-ba ha sii aadee , Aabihii Meydka, Awoowihii wax dhaxlayey haba sareeyee, Walaalaha Meydka Labada Waalid la wadaaga , Walaalaha Meydka Aabaha keliya la wadaaga iyo Gabadha Walaasha/Walaalaha ah oo Meydka Aabe iyo Hooyo la wadaaga ama Aabe keliya la wadaaga markay la jiraan Gabar/Gabadho Meydku dhalay ama Wiilkiisu sii dhalay (La-Casabeeye Cid-kale).

s- Wiilka /Wiilasha Meydka Walaalkiis Aabe keliya ay wadaagaan uu dhalay waxaa Dhaxalkii ka xigsanaya : Wiil Meydku dhalay ama Wiilkiisu sii dhalay Hoos-ba ha sii aadee , Aabihii Meydka, Awoowihii wax dhaxlayey haba sareeyee, Walaalaha Meydka Labada Waalid la wadaaga , Walaalaha Meydka Aabaha keliya la wadaaga Wiilka /Wiilasha Meydka Walaalkiis Labada Waalid-ba ay wadaagaan uu Dhalay, iyo Gabadha Walaasha/Walaalaha ah oo Meydka Aabe iyo Hooyo la wadaaga ama Aabe keliya la wadaaga markay la jiraan Gabar/Gabadho Meydku dhalay ama Wiilkiisu sii dhalay (La-Casabeeye Cid-kale).

sh-Adeerka iyo Wiilashiisa waxaa Dhaxalkii ka xigsanaya :

Wiil Meydku dhalay ama Wiilkiisu sii dhalay Hoos-ba ha sii aadee , Aabihii Meydka, Awoowihii wax dhaxlayey haba sareeyee, Walaalaha Meydka Labada Waalid la wadaaga , Walaalaha Meydka Aabaha keliya la wadaaga ,Wiilka /Wiilasha Meydka Walaalkiis Labada Waalid-ba ay wadaagaan uu Dhalay, Wiilka /Wiilasha Meydka Walaalkiis Aabe keliya ay wadaagaan uu dhalay, iyo Gabadha Walaasha/Walaalaha ah oo Meydka Aabe iyo Hooyo la wadaaga ama Aabe keliya la wadaaga markay la jiraan Gabar/Gabadho Meydku dhalay ama Wiilkiisu sii dhalay (La-Casabeeye Cid-kale).

dh- Gabadha /Gabdaha Meydka Wiilkiisu dhalay waxaa kale oo dhaxalkii ka xigsan kara Laba Gabdhood iyo wax ka badan oo Meydku dhalay hadii Gabdhahaasi aanay helin Walaal ama ina Adeer la siman oo Casabo geliya. hadii walaalkaas la siman la waayo Hantida wixii soo hara waxaa lala raadinayaa Qofkii Lab ah oo Meydka ugu dhow Casabo ahaan .

c- Walaasha/Walaalaha Gabdhaha ah oo Meydka Aabe keliya la wadaaga iyagana waxaa kale oo Dhaxalkii ka xigsan kara Laba Gabdhood iyo wax ka badan oo Meydka Labada Waalid-ba la wadaaga, waa haddii Gabdhahaas Meydka Aabaha keliya la wadaagaa aanay helin Wiil Walaal ah oo la siman oo Casabo geliya. hadii walaalkaas la siman la waayo Hantida wixii soo hara waxaa lala raadinayaa Qofkii Lab ah oo Meydka ugu dhow Casabo ahaan.

Qaybta Afraad: Dib-ugu-Celinta Saamileyda (الرد).

Qodob.274^{aad} - Markii la waayo wax Cid ah oo Meydka Casabo u ah , isla markaana Dadkii Saamileyda ahaa Hantidii wada dabooli waayaan , wixii Hantida Saamiya-dooda ka dib soo hara, waxaa dib loogu celinayaa Dadkii Saamileyda ahaa marka laga reebo Saygii iyo Marwadii haddii Midkood joogo , iyadoo loogu Qaybinayo Saamiyadii Markii hore ay kala heleen(Wadarta Saamiyadooda ayaa waxaa loo qaybinayaa Hantidii oo dhan, hadii Saygii iyo Marwadii Midna aanu joogin, Haddii Mid-kood joogana Saamigiisa kadib Hantida inta soo hadha , Dabadeed-na Isirka soo baxa ayaa Qof walba Saamigiisii hore loogu Dhufanayaa).

Qaybta Shanaad : Dhaxalka Qaraabada.

Qodob.275^{aad} - Qaraabadu waa Dadka Qofka dhintay Xigtada u ah isla markaana Casabanimo iyo Saami go'an Midna aan wax ku dhaxlayn.

Qodob.276^{aad} - Qofka geeriyooday markuusan ka tegin wax Xigto ah oo Casabanimo ku dhaxlaya ama Saami go'an ku dhaxlaya, marka laga reebo Labada Lamaane had-ba Mid-ka jooga, Qofkaas Hantiduu ka tegey oo dhan, ama

Labada Lamaane hadba kii jooga Saamigiisii marka looga saaro ka dib waxaa dhaxlaya Qaraabadiisii kale.

Qodob.277^{aad} - Dadka Qaraabanimo wax ku dhaxlayaa waxay ka yimaadaan Afar Jiho oo kala ah:

b- Dad Meydka ka Tafiirmay kuwaasoo ah Tafiirta Gabdhaha Meydka iyo Tafiirta Wiilashiisu Gabdhaha ay dhaleen Hoosba ha sii aadeene.

t-Dad Meydku ka soo tafiirmay kuwaasoo ah Awoowayaal-ka iyo Ayeeyooyin-ka aan Dhaxalka waxba ku lahayn.

j- Dad ka tafiirmay Labada Waalid ee Meydka kuwaasoo ah Tafiirta Gabdhaha Meydka la Walaal ah Dhinac kasta oo ay ka yimaadaan, Tafiirta Walaalaha Hooyo ee Labka ah, iyo Tafiirta Gabdhaha Meydka Walaalihiisa Lab-ka ah sii dhaleen , Hoosba hasii aadeene.

x-Dad ka tafiirmay Awoowayaal-ka iyo Ayeeyooyin-ka Meydka kuwaasoo ah Adeerada Hooyo , Eedooyin oo dhan ,Abtiyaal iyo Habar-yaro oo dhan. iyo Ilma-Abtida iyo Ilma-Eeda-da Dhinac kasta oo ay ka yimaadaan iyo Tafiirtooda Hoos-ba ha sii aadeene.

Qodob.278^{aad} - Dadka Qaraabada ah marka Hantida la dhaxalsiinayo Cid walba oo ka mid ah waxaa la dejinayaa Booskii Qofka ugu xiga oo haduu joogi-lahaa Qofkaas dhintay dhaxli-lahaa. Cid walba oo kamid ahna Qaraabadaas waxaa la siinayaa Dhaxalkii uu ku qaadan lahaa Casabanimo ama Saami go'an Qofkaas Qaraabadaas ugu dhow kaasoo Haduu joogi lahaa Qofka dhintay dhaxli lahaa. Waxaana loo dhaxalsiinayaa sidatan:

b- Tafiirta Gabdhaha Meydka iyo Tafiirta Gabdhaha Wiilasha Meydku dhalay waxaa la joojinayaa Booskii Hooyooyin-kood.

t- Adeero Hooyo oo dhan iyo Eedooyin oo dhan waxaa la joojinayaa Booskii Aabaha.

j- Abtiyada ,Habar-yaraha, iyo Awoowaha Hooyo iyo Cid-walba oo ku abtirsata , Abtiyada iyo Habar-yaraha Aabe oo dhan ,iyo Awowga Hooyo ee Aabaha iyo Cid walba oo ku abtirsata, Habar-yaraha iyo Abtiyada Hooyo oo dhan ,iyo Hooyada Awowgeed Hooyo iyo Cidwalba oo ku abtirsata, Qaraabadaas oo dhan waxaa la joojinayaa Booskii Hooyada.

x-Gabdhaha Meydku Adeer-ka u yahay ama hadduu Dhedig yahay Eadada u yahay iyo Wiilashoodu Gabdhaha ay sii dhalaan waxaa la joojinayaa Booskii Aabayaal-kood.

kh-Walaalaha Hooyo Tafiirtooda waxaa la joojinayaa Booskii Walaalaha Hooyo. Tafiirta Gabdhaha Meydka la Walaala ah dhamaantood waxaa la joojinayaa Booskii Gadhaha Walaalaha ah. Gabdhaha Ilma-Adeerta ah iyo Tafiirtooda waxaa la joojinayaa Booskii Aabayaalkood.

Qodob.279^{aad} -Hantida Qofka dhintay oo Qaraabadu Dhaxlayso Dhamaanteed ama intii ka soo hadhay Labada Lamaane midkood haduu jiro , waxaa Qaraabadaa Hantidaa loogu qaybinayaa sidatan :

b-Dadka Qaraabada ah haday yihiin Hal Qof oo keliya Keligiis ayaa Hantidii wada qaadanaya ,hase yeeshee Qaraabadu haday yihiin Dad koox ah oo Meydka u wada siman Hal Jihana ka wada yimid Hantidii si siman ayaa loogu wada qaybinayaa iyadoo Lab iyo Dhedig loo kala eegayn.

t- Dadka Qaraabada ah haday Jihooyin kala Duwan ka yimaadaan waxaa Dhaxalka Qaybintiisa loogu tixgelinayaa Qof walba Cida uu Meydka ugu soo dhowaadey Sababtii ay wax ku dhaxleysey , Sababtaas ayuu isna wax ku dhaxlayaa kuna qaadanayaa hadba wixii Dheef ah oo Qofkaasi ku heli lahaa Casabanimo ama Saami go'an Hadba kuu dhaxli lahaa.

j- Dadka Qaraabadu Meydka ugu soo dhowaadeen haday Dhaxalka iska xigsan lahaayeen(is-xijaabi lahaayeen) iyana Dhaxalka waa iska xigsanayaan ,Haday Qaarkood Casabo wax ku dhaxli lahaayeen Qaraabadooduna Casabadii ayay wax ku dhaxlaysaa.

Qaybta Lixaad : Dhaxalka Qofkii Xigtanimo loo qiray(Dhalasho ahaan lays-haleeshiiyey مستحق).

Qodob.280^{aad} - Ilmaha Nool oo Qof kale Naftiisa haleeshiiyey si uu wax u dhaxlo waxaa loo baahanyahay in la helo Shuruudahan :

b- Ilmahaas waa inaan Cid kale loo aqoon inay Waalid u tahay.

t- Sharciga iyo Xiska Mid-na waa inaanu Beenin Is-haleeshiintaas .

j- Hadduu Ilmahaasi Qaan-gaar yahay waa inuusan Beenin Is-haleeshiintaas.

x- waa inaan la helin waxyaalihii kale ee hor-istaagayey Qofku inuu wax dhaxlo.

kh- waa inuu yahay Qof la habsaday inuu Noolaa Markuu geeriyooday Qofka uu dhaxlayo kana geeri dambeeyey.

Qodob.281^{aad} - Nin-kii Ilma Dhintay is-haleeshiiya inuu isagu Aabe u yahay isla markaas-na la helo si Dhalashadaasi u sugnaato Shuruudihii lagu soo sheegay **Qodob. (139)** , Ilmahaas Hantidiisii waxaa dhaxlaya Ninkaas Sheegtay .

Qodob.282^{aad} - Haddii Qofku Dhalashada Qof kale Haleeshiiyo Cid'aan Naftiisa ahayn, sida inuu Yiraahdo Qof-kaasi waa Walaal-kay ama Adeer-kay , kadib Marka la helo Shuruudihii lagu soo sheegay **Qodob.(139)**, si Qofkaas lays-haleeshiiyey wax u dhaxlo waa in la helaa shuruudahaan Dheeraad-ka ah:

b- waa inuu yahay Qof-ka waalidka ah oo wax la haleeshiinayaa Qof dhintay Haleeshiin-ta ka hor.

t-Qofka wax haleeshiinayaa waa inuu yahay Qof Dhaxalka Xaq u leh, isla markaana keligiis wada leeyahay Dhaxalka Hantida la dhaxlayo oo dhan , Cid kale oo la wadaagtaana aanay jirin.

j- haddii Is-haleeshiintaasi keenayso in Dhaxalka laga hor-joogsado Qofkii Dhalashadaas qiray, Dhaxalkiisiina meesha ka baxayo(sida Walaal keligiis dhaxalka leh, Walaal-kuu dhaxlayey Wiil u qiray) , Qofkaas Dhalashada loo qiray Dhaxalkii waxba ku yeelan mayo, hase yeeshee Dhalashadiisii waa sugnaanaysaa.

Qodob.283^{aad} - Dadka Dhaxalka wada leh Mid kamid ah laga aqbali mayo inuu keligiis Qof kale Dhalashadiisa sugo (Qiro), si Qofkaasi dhaxalka wax ugu yeesho, hadaanay wada ogolaan dhamaan Dadkii Dhaxalka wax ku lahaa.

Qaybta Todobaad : Dhaxal-siinta Dadka aan Mutaysa-shadooda Dhaxalka la hubin, ama Saamigoodu kala cadayn.

Madaxa 1aad : Dhaxalka Dadka isku-marka dhinta.

Qodob.284^{aad} - Dad laga helay Sababihii ay isku dhaxli lahaayeen, isla markaana aan la ogeyn koodii Geeri Dambeeyey, ama horreeyey, ama isku marba ay wada geeriyoodaan , Dadkaasi is dhaxli mayaana , Qof walba oo kamid ahna Hantiduu ka tegey waxaa dhaxlaya Xigtadiisii kale oo la hubsaday inay ka Geeri dambeeyaan.

Madaxa 2aad: Dhaxalka Qofka la waayey (المفقود).

Qodob.285^{aad} -Qofka la waayey oo aan wax War ah laga hayn Noloshiisa iyo Geeridiisa midna,waxaa Hantidiisa la dhaxli karaa oo keliya Marka la helo Arrimahan:

b- In Cadayn Buuxda loo Helo Geeridiisa .

t- In Qaadiga Maxkamaddu Xukumo Geeridiisa isagoo tixgelinaya Axkaamta lagu soo sheegay Qodob.(130 fiqradiisa (T) ee Sharcigaan.

j-Marka Qaadiga Maxkamaddu Xukumo Qofkaas la waayey Geeridiisa waxaa Hantidiisii dhaxlaya Xigtadiisa inta markaas nool oo keliya .

Qodob.286^{aad} - Kala duwanaanshaha Dheefaha ama Saamiyada Qofka la waayey Dhaxli lahaa iyo Qofkii Isaga dhaxli lahaa :

b- Mudada Qofka la waayey maqanyahay hadduu Geeriyoodo Qof uu Dhaxalkiisa wada yeelan lahaa haduu Nolol ku iman lahaa , Hantidii oo dhan waa loo joojinayaa , Hadiise Qofka lawaayey Qofkaas dhintay Dhaxalkiisa Saami gaar ah ku leeyahay, Saamiguu Hantidaa ku yeelan lahaa ayaa loo joojinayaa.

t-Qofkaas la waayey Noloshiisu Qofkay Dhaxalka ka xigsanayso waxba la siinmayo ka hor inta Arrintu kala caddaanayso.

j- Qofkii Dhaxalkaas wax ku leh oo Saamigiisu Isla bedelayn Qofka la waayey Geeridiisa iyo Noloshiisa Midna, waxaa la siinayaa Saamigiisii oo dhamays-tiran.

x-Qofkii Saamigiisa ay Saamayn ku yeelanayso Qofka la waayey Geeridiisu ama Noloshiisu waxaa Dhaxalka lagu siinayaa Hadba sida Dheef ahaan u daran.

Qodob.287^{aad} - Saamigii loo joojiyey Qofkii la waayey ,marka Geeridiisa la hubsado ama Qaadiga Maxkaddu xukumo waxaa dib loogu celinayaa Dadkii xaqa u lahaa iyadoo loo eegayo Qof walba Qadarka uu Saamigaa ku mutaystay.

Madaxa 3aad : Dhaxalka Ilmaha Uurka ku jira (الحمل).

Qodob.288^{aad} - Ilmaha Uurka ku jira wuxuu wax dhaxlayaa markii la hubiyo inuu Caloosha ku jirey markuu geeriyooday Qofkuu dhaxlayo ,waana in la hubsadaa inuu Ilmahaasi Nolol ku dhashay sida in lagu arko Hindhiso,Oohin, ama Dhaq-dhaqaaq ,iyo Cadayn kale oo kasta taasoo tusir avasa Noloshiisa.

Qodob.289^{aad} - Ilmaha Uurka ku jira hadduu Aabe u yahay Ninka dhintay ,ama Haweentaasi aanay lahayn Say kaloo u galmoonaya, si Ilmahaasi Qofkaas dhintay u dhaxlo waa inuu ku dhashaa Muddo ka yar Afar Sano laga soo bilaabo

Waqtigii Geerida. Hase yeeshee Haddii Haweentaasi leedahay Say kaloo u galmoonaya, haddaanay Warasada kale isku raacin Ilmahaasi inuu jirey Waqtigii Geerida , si Ilmahaasi Qofkaas dhintay u dhaxlo waa inuu ku dhashaa Waqti Lix bilood ka yar laga soo bilaabo Ayaantii Geerida .

Qodob.290^{aad} - Ilmaha Uurka ku jira iyo Dadka kale oo ay wax wada dhaxli karaan waxaa Hantida la dhaxlayo loogu qaybinayaa Sidatan :

b- Ilmaha Uuka ku jira iyo Dadka kale oo dhaxalka wax ku leh waxaa Dhaxalkooda loogu tix-gelinayaa , Wiil ama Gabar hadba Midkii Dheeftiisa Dhaxalka uu ku leeyahay ay badantahay , Isagana waxaa loo joojinayaa Saamigaas badan , Haddii Ilmahaas keligiis Hantida Dhaxalka wada yeelan karo Hantidii oo dhan waa la joojinayaa lana dhaxlimayo ilaa Ilmahaasi ka dhasho.

t-Qofkii Dadka wax dhaxlaya ka mid ah oo Dheef-tiisu marna aanay is bedelayn Lab iyo dhedig mid kasta oo Ilmahaasi ku dhasho waxaa la siinayaa Dheef-tiisa oo dhamays-tiran, hase-yeeshee Qofkii Ilmahaasi Jinsi kasta oo uu ku dhasho Dhaxalka ka hor-joogasanayo Inta Ilmahaasi inuu Nolol ku dhasho laga hubinayo waxba la siinmaayo.

j-Qofka Dheef-tiisu isku bedelayso hadba Lab iyo Dhedig midka Ilmahaasi ku dhasho waxaa la siinayaa Saamigiisa u daran , hase-yeeshee Qofkii ay suurtoagal tahay in Ilmahaasi Jinsi gaar ah oo uu noqdaa Dhaxalka ka horjoogsanayo waxba la siinmayo .

x-Ilmahaasi marka uu dhasho hadii uu noqdo Laba Qof iyo wax ka badan , hadduu Dheeftii loo joojiyey ka badan yeesho Warasadii kale ayaa looga celinayaa, haduuse ka yar yeesho Dheeftiisa inta dheeraadka ku ah ayaa Dadkii kale looga soo celinayaa.

kh- haduusan Uurkaasi Nolol ku dhalana Dheeftii loo joojiyey oo dhan ayaa Warasadii kale Cid walba inta ay ku leedahay looga darayaa.

Madaxa 4aad : Dhaxal-ka Qof-ka Labeeb-ka ah (الخنثى).

Qodob.291^{aad} - Marka uu geeriyoodo Qof Dhaxalkiisa uu wax ku leeyahay Qof Labeeb ahi, loona baahdo in xoolaha la dhaxlo, intii aanu labeebkaasi kala cadaan waxaa loo dhaxlayaa sidan :

b- Waxaa loo dhaxal joojinayaa wiil ama gabadh hadba midka warsada u daran, labeebkana waxaa la siinayaa hadba kii isaga u daran, baqigana waxaa laga dhigayaa Mawquuf (المفقود) (Joojin) ilaa uu ka kala cadaanayo.

t- Haddii uu labeebdku kala cadaan waayo ka dib marka uu qaan gaaro ama uu geeriyoodo inta aanu kala cadaan, waxaa la siinayaa saamiyada wiil iyo gabadh

marka la isku daro oo laba loo qeybiyo qeyb ahaan, taasoo u dhiganta
($100 + 50 = 150/2 = 75$)

Qodob.292^{aad} - Haddii Rajo laga qabo Labeeb-ku inuu kala cadaado Isaga iyo Dadka kaloo Dhaxalka wax ku yeelan kara waxaa Dhaxalka loogu qaybinayaa sidatan:

b- Haddii Qof-ka Labeeb-ka ah Dhaxalkiisu isla bedelayn Lab iyo Dhedig Mid kasta oo uu ku cadaado Qof kasta oo Dhaxalka wax ku leh waxaa la siinayaa Saamigiisii oo dhamays-tiran.

hadiise Saamigiisu is bedelayo Qof wal-ba Dheefta la hubo inuu heli karo ayaa la siinayaa, Qadarka laga shakisan-yahayna waa la joojinayaa.

t- Qofka Labeeb-ka ah hadduu Labada Jinsi Midkood keliya wax ku dhaxlayo, wax-ba la siinmayo, Saamigiisii oo dhana waa la joojinayaa ilaa Jinsigiisu kala cadaanayo. Sidoo kale Qof-kii Dadka wax dhaxlaya ka mid ah oo Labeebku Labada Jinsi Midkood Dhaxalka kaga hor-joogsanayo Isagana Waxba la siinmayo Saamigiisiina waa la joojinayaa.

j-Qof-ka Labeebka ah Labada Jinsi-ba haduu wax ku dhaxlayo hase yeeshee Saamigiisu kala badan-yahay ,Hadba Saamiga yar ayaa wax lagu siinayaa Qadarka Dheeraad ka ahna waa la joojinayaa, sidoo kale Qof-kii Warasada ka mid ah oo Labada Jinsi ee Labeeb-ka Dhaxalka ku kala bad-sanaya waxaa la siinayaa Saamigiisa yar ilaa inta Labeeb-ku kala cadaanayo. Hase-yeeshee Qofkii Saamigiisu aanu isla bedelayn Jinsiga Labeeb-ka Isaga Saamigiisii oo dhamays-tiran ayaa la siinayaa.

Madaxa 5aad : Dhaxalka Ilmaha Garaca ah, iyo Midka Leecaantanka lagu Diidey .

Qodob.293^{aad} - Ilmaha Garaca ah iyo Midka Leecaantan lagu diidey waxay dhaxlayaan Hooya-dood iyo Xigtadeeda oo keliya ,Labadooda-na waxaa dhaxlaya Hooya-dood iyo Xigtadeeda oo keliya.

Qaybta Sideedaad : Qaybinta Hantida Dhaxlka.

Madaxa 1aad : Dhisida Mas'alooyinka Saamiley-da iyo Casabada.

Qodob.294^{aad} - Dhisida Mas'alooyinka Dhaxalka waxaa loo jeedaa : Qofka Hantida dhaxlayaa inuu qaado Talaabooyinkaan:

b- isagoo eegaya Saamiyadii Lixda ahaa Had-ba inta la kala helay - inuu Mas'alada Dhaxalka saleeyo, isla markaana haday u baahantahay saafi yeelo, markaas ka dibna Mas'aladaas la saleeyey ama la saafi yeelay Hantidii loo

qaybiyo, Isirka soo baxana Qof walba loogu dhufsto Tirada Saamigii uu Mas'aladii ka helay.

t- In la saleeyo: waxaa loola jeedaa in la soo saaro Tirada ugu yar (Dhufsane-yaraha) taasoo ay ka wada bixi karaan Saamiyada Dad-ka wax dhaxlayaa leeyihiin.

j- Dad-ka wax dhaxlayaa haday dhamaantood Casabo wada yihiin Salayn-tu waxay Noqonaysaa Wadarta Tiradooda iyadoo wiilkii-ba loo xisaabinayo Laba Gabdhood Saamigood.

x- Saafi-yeelida waxaa loola jeedaa: In la soo saaro Tirada ugu yar Taasoo ay ka wada bixi karaan Dhamaan Tirada Saamiga Qof walba oo Dhaxalka wax ku leh iyadoo wax Ja-jab ahi(Hal kayar) aanay gelin Tirada Saamiyadaas.

Madaxa 2aad : Meyd Meyd kale dhaxlaya (المناسخات).

Qodob.295aad -Meyd Meyd kale dhaxlay waxaa loola jeedaa: inuu dhinto Qof ama wax ka badan oo Warasadii kamid ah, ka hor intaan la dhaxlin Hantidii Meydkii hore ka tegey, Meydka dambana Hantidiisa lama dhaxli karo ilaa la ogaado inta uu Hantida Meydka hore ka tegey Ku leeyahay.

Qodob.296aad - Meydka Labaad Dadka dhaxlayaa haday yihiin Warasadii Meyd-kii hore ka tegey oo keliya ,Dhaxal-kooda Meydka dambe ay dhaxlayaana uu lamid yahay Dhaxal-koodii Meyd-kii hore, sida inay yihiin Walaalo siman ama Awlaad siman oo Qaar-kood Qaarkii kale ay ka dhinteen.markaas Qofka dambe oo dhintay waxaa loo tixgelinayaa sidii Qof aan jirin oo kale, Hantidii Meydka Horena waxaa loo qaybinayaa Hadba Warasadaa inta Nool.

Qodob.297aad - Haddii Labada Meyd Warasadoodu kala duwanyihiin, ama iyagoo isku mid ah, ay kala duwantahay Saamiyada ay ka kala helayaan Dhaxal-ka Hantida Meydka dambe , Markaas waxaa la qaadayaa Talaabooyinkan :

b- waxaa la salaynayaa ama haddii loo baahdo la saafiyeelayaa Labada Mas'alo ee Dhaxalka hore iyo kan dambe.

t- Dabadeed-na Meydka Dambe Dheeftuu ka helay Mas'lada Hore haday Toos ugu qaybsamayso Mas'aladiisa Dambe, Mas'aladii hore ayaa Labada Warasaba Hantidii loogu dhaxlayaa .

j- hadaanay isu qaybsami karin Mas'alada dambe iyo Dheeftii Meydkaasi ka helay Mas'aladii hore, Haddii ay jidho tiro u wada qaybsamaysa Mas'alada Dambe iyo Dheeftii Meydka dambe ka helay Dhaxalkii Meydka hore, Isir-ka ugu yar ee mas'alada dambe ayaa lagu dhufanayaa Mas'aladii Hore Dhamaanteed , Taranta soo baxda ayaana labadii Mas'aloba ka wada ansaxayaan.

dabadeedna Qofkii Mas'alada hore wax ku lahaa waxaa Dheeftiisii loogu Dhufanayaa Isirkii Mas'alada dambe oo Markii hore lagu dhuftay Mas'aladii hore, Qofkii Mas'alada Dambe wax ku lahaana waxaa Dheeftiisii loogu dhufanayaa Isirkii Dheeftii Meydka dambe ka helay Dhaxalkii hore .


x-hadaanay jirin tiro u wada qaybsamaysa Mas'alada dambe iyo Dheeftii Meydkaasi ka helay Mas'aladii hore, Mas'aladii dambe oo dhan ayaa waxaa lagu dhufanayaa Mas'aladii hore, markaas-na Taranta soo baxda ayaa Labadii Mas'alaba ka wada ansaxyaan .

dabadeedna Qofkii Mas'aladii hore wax ku lahaa Dheef-tiisii ayaa waxaa loogu dhufanayaa Mas'aladii dambe oo dhan , Qofkii Mas'alada Dambe wax ku lahaana Dheeftiisii waxaa loogu dhufanayaa Dheeftii Meydka labaad uu ku lahaa Mas'aladii hore oo dhan.

Qodob.298^{aad} - Sharcigaan Qoyska Marka la ansixiyo wuxuu Baabi'inayaa Qaanuun kasta , Wareegto kasta , iyo Xeer Nidaamiye kasta oo Axkaamtiisa ka horjeeda .

Gaar ahaan wuxuu Meesha ka saarayaa Xeerkii Qoyska ee Soomaaliya ka dhaqan galay 1dii Janaayo 1975 tii .

Qodob.299^{aad} - Axkaantan waxaa la fulinayaa marka Golaha Wakiilladu u gudbiyaan Madaxweynaha, Madaxweynuhuna u gudbiyo Garsoorka.


Dr, Cabdiraxmaan Maxamed Maxamud
Madaxweynaha Dawladda Puntland

